QARMULLAHA AL QAAMIDI

DAWAN

HA ISKU HALLAYN MUSHAHARKAAGA



Turjumid Iyo Soo Koobid

Xamse Xabiib Xuseen

DAWAN

Qarmullaah Alqaamidi

DAWAN

HA ISKU HALLAYN MUSHAHARKAAGA

لن أكون عبدا للراتب

Turjumid iyo Soo koobid:

Xamse Xabiib Xuseen

Cilmiye Books

DAWAN

HA ISKU HALLAYN MUSHAHARKAAGA

Hibayn

Cid kasta oo horumarka jecel. Cid kasta oo u jeelan inay gaadho xorriyad dhaqaale, Cid kasta oo dhinaca wanaagsan wax ka eegta. Cid kasta oo garab ii noqotay maalin uun. Aabahay iyo hooyaday iyo dhammaan qoyskayga ayaan u hibaynayaa buuggan.

Qoraaga

Tusmada Buugga

Hibayn..... VI

Mahadnaq.....X

Afeef.....XII

ARAAR.....XIII

Hordhaca Turjumaha.....XIX

Hordhac.....25

Ballan.....38

Xoolo-ogi.....39

Dhaqdhaqaaqa Maalka.....44

Waa Maxay Xisaabtanku?.....46

Maxay ku Kala Duwan Yihiin Raasamaal (Assets) iyo Gashi (Liabilities)? 49

Tartanka Jiirka.....63

Mushahar Keliya 70

Su'aalo Saamayn Kugu Leh.....76

Qisada Guulayste Ismaareeyay 78

Hantida Ayaa ka Horraysa Xarragada 82

Casriga Wershadaha iyo Isbeddelka Nolosha..... 88

Sheeko Xikmadaysan.....90

Halbeegga Hodantinimadaada.....97

Jidka Maalintaada Xorriyadda Dhaqaale.....103

Qodobbo Muhiim kuu ah: 106
(A) Muhiimadda Ficilka iyo Waxqabadka 106
(B) Mudnaanta Caadooyinka.....109
Caadooyinka Guuleystayaasha.....112
(B) Mudnaanta Waqtiga.....114
(C) Dadaalkaagu Muhiimadda uu u Leedahay Naftaada.....117
Maalinta Xornimadaada Dhaqaale.....125
Xaruntaada Dhaqaale.....135
Barashada Macaash iyo Khashaare.....141
Warbixinta macaashka iyo khasaaraha gaarka ah.....147
Dheelitirka Miisaaniyadda 152
Hadafka (Yoolka) Maaliyadda.....153
Horumarinta Nafta.....157
Xirfado..... 158
Qaaciidada 30% - 70%.....161
Sekada iyo Sadaqadda.....166
Xisaabta Hodantinimada.....168
Naftaadu Qayb ma ku Leedahay Dakhligaaga?..... 169
Xisaabta Kaydsiga.....171
Side Ayaad ugu Noolaan Kartaa 70% Dakhligaaga?.....174
Jidka Xorriyaddaada Dhaqaale.....178

Tallaabooyinka Jidka Xorriyada Dhaqaale 178
Gebagebo 182
Maalgashi 185
Gunaanad 187

Mahadnaq

Akhriste waxa aad maanta gacantaada ku haysaa natiijada dadaalka naf hurka ah iyo wax soo saarka ay iska kaashadeen dhinacyo kala duwan, kaas oo loogu magac daray "Dawan". Waxaan si buuxda ula socdaa in guul sidan oo kale ah aan la gaadhi lahayn haddii aan la isku darin dedaallo ay dad sharaf leh siyaabo kala duwan uga qayb qaateen. Sidii looga midho dhalinlahaa natijadan quruxda badan. Waxaan mahad iyo bogaadin aan la soo koobi karin u soo jeedinayaa cid kasta oo gacan ka gaysatay dhamaystirka buuggan, oo ay ugu horreeyaan tifaftirayaasha sharafta leh ee dedaalka dheer u galay dib u eegista qoraallada, iyo sixidda khaladaadka afka iyo naxwahaba leh. Talooyin wax ku ool ah ku daray hodannimada garaadka iyo farshaxanka buugga.Waxaan dhammaantiin idiinka mahadnaqayaa garab-istaaggii iyo wada-shaqayntiina, wakhti iyo dadaalba aad ku bixiseen sidii buuggan tixraac muhim ah ugu noqon lahaa dhinaca aqoonta dhaqaalaha. Waxaan garowsanahay milgaha aad iga mudantihiin in uu weyn yahay, dadaalkiinuna uu yahay mid aan la illaawi karin. Aniga oo aan kala qaadqaadin, dhammaantiin waad mahadsan tihiin. Waxa aan rajaynayaa in uu buuggani noqdo mid wax badan kusoo kordhiya maktabadda soomaalida, kana qayb qaadan doono faafinta wacyiga dhaqaale ee bulshada. Waxa aan si gaar ah ugu mahadnaqayaa:

Tafatirayaasha:

Aadan-Sahan

Maxamed Xasan Kaarshe

Qaabayn Iyo Qurxin:

Ridwaan Sheekh Cabdiraxmaan

Ayman Maxamed Axmed

Agaasim iyo isku xidh

Bilal Mustafe Axmed

Daabacaadda iyo dib u eegista

Cabdicasiis Maxamed limaan

Waxa aan ku nuuxnuuxsanayaa in aan bogaadiyo cid kasta oo gacan ka gaysatay dhammaystirka buuggan, mid aan xusay iyo cid aanan xusinba. Waxa aan rejaynayaa in uu buuggani noqdo mid wax badan ku soo kordhiya maktabadda soomaalida, kana qayb qaadan doono faafinta wacyiga dhaqaale ee bulshada.

Afeef

Waxa aan ka cudurdaaranayaa, in aanan weli helin oggolaanshiyaha turjumaadda buugga. Isku dayo badan oo aan sameeyay oo aan kala xidhiidhay isgaadhsiinta casriga ah wali iima suurta galin, oo wax jawaab ah kama helin qoraaga. Sidaa darteed, waxa aan si buuxda diyaar ugu ahay in aan kala xaalo wixii xuquuq ah maalinta ay ii suurta gasho inaan helno qoraaga. Cilmigu waa ehelnimada xidhiidhisa dadka u ehelka ah in cilmigu dadka gaadho ayaana ah ujeedada ugu muhiimsan ee qoraa kastaa wax u qoro, ama u turjumo.

Xamse Xabiib Xuseen

Feb 2024

ARAAR

Buuggani isaga oo u xanbaarsan xog iyo aqoon cid kasta oo doonaysa horumar dhanka dhaqaalaha ah. Haddana waxa uu si gaar ah ula hadlayaa, farriimo mahadho ahna u sidaa, dadka ah "shaqaalaha mushaharka kooban ku shaqeeya" kuwaas oo ay is dabooli waayaan mushaharkooga iyo duruufohooga nololeed, amaba dhibaatooyin kaga yimaaddaaan dhinaca xuquuqda shaqaalanimo. Nin dhallinyar ah oo ka shaqaynayay mid ka mid ah meheradaha suuqa ayaa ii sheegay, in ninka ay u shaqaynayeen ee ay meheradda u hayeen habeenkii dusha kaga qufuli jiray, isaga oo markaa u arkayay in haddii uu ka tago meheradda oo furan ay xadayaan!

Xaq buu u leeyahay in uu ilaashado xoolihiisa, laakiin waxa jirta siyaabo kale oo uu xoolihiisa ku ilaashado isaga oo aan ku xad gudbayn xuquuqda shaqaalaha. Guud ahaan iyada oo dulmi badani ka jiro xuquuqda shaqeeyaha, iyo loo shaqeeyahaba, hadana marka la joogo wadamadeenan saboolka ah waxa aad u dulman xuquuqda shaqaalaha. Buuggani uma hadlayo qaab caadifad iyo dareen la ciyaar ah, waxa uu se si dhab ah kuugu hagayaa dhabbaha aad kaga bixi karto, isdaba wareegga iyo culaysyada kaa haysta mushaharka. Adiga oo shaqadaada iska haysta ka tagain kana hiyi kicin, ugana shaqaynaya sida ugu fiican waa in aad yeelataa hammi iyo aragti dheer oo aad kaga xoroobayso mushaharka kooban ee aad sugayso.

Rabbigaa ayaana ah deeqsiga deeqda bixiya. Ii oggolow in aan ku waydiiyo su'aalo dhawr ah:

Miyaad ka daashay xannibaadaha kaaga imanaya shaqada joogtada ah? Ma waxaad raadinaysaa dareen kugu dhasha oo xoreeya hal-abuurkaaga, kaas oo kuu beera midhaha xasilloonidaada dhaqaale? Ma ku riyoonaysaa in aad jebiso caqabada mushaharka oo aad gacanta ku dhigto masiirkaaga dhaqaale? Buuggan hortaada yaallaa waa mid ka mid ah meelaha aad kala baxayso sirta iyo xogaha kaa dahsoon, ee aad raadinaysay meel aad ka hesho. Haddii aad si miyir qabta u akhrido buuggan, xogta aad ka helaysona aad ku darto ficil iyo fulin, waxa ku gaadhsiinayaa: Isku- kalsoonaan nafeed iyo inaad wax u samayn karto sida dadka kaleba u sameeyeen, oo aan waxba kaa dhinnayn adiga qofnimadaada keliya aad u baahantahay xog sax ah iyo fulin. In aad gaadho madax bannaani dhaqaale, waxa aad ka dheefaysaa; in aanad mar dambe ku tiirsanaan mushahar xaddidan bishii. In aanad Ka werwerin isbeddellada dhaqaale ee ku imanaya xaaladaha dadka ku kooban mushahar. Keliya Waxa aad kaga baxaysaa fasaxa aad maamulahaaga ka raadinayso, maalinta aad hawl culus leedahay. Waxaad si wanaagsan u maaraynaysaa wakhtigaaga, tamartaada, iyo mustaqbalkaaga danbe. Waxay u furaysaa albaabbo ballaadhan iyo fursado aan dhammaad lahayn.

Seeska buugga

Seeska ugu muhiimsan ee kugu hagaya halka iyo sida dhaqaale loo sameeyo, ayaa ah in aad fahanto waa maxay meelaha uu dhaqaaluhu ka yimaaddaa?

maxayse ku kala fiicanyihiin?

Muxuu mid waliba leeyahay dhib iyo dheef, si aad isku qiyaasto ka dibna aad u raadiso albaabka aad ka geli lahayd xorriyaddaada dhaqaale ee boqollaal iyo kumanaan kale oo kaa horeeyay ka galeen maalin walbana ay boqollaal iyo kumanaan kale ka galaan.

Meelaha ay dadku ka helaan dakhliga ilaha dhaqaalaha ee caadiga ahi waa saddexda midkood:

Shaqaalenimo (muruqmaal).

Xirfadle (maskax maal).

Ganacsi (alaab ama adeeg)

Saddexdan qaab waxa ay u kala fursado yaryihiin sida ay u kala horreeyaan, waxana ay u kala wanaagsanyihiin una kala qiima badanyihiin sida ay u kala danbeeyaan. Waxa ugu sarreeya ganacsiga, xirfadda iyo farsamada, ka dib shaqaalenimada, hadana sidaa ay u kala horreeyaan ayay u kala khatar iyo culays badanyihiin, oo shaqo- taggu waa waxa ugu fudud ee dakhli lagu sameeyo, waana sababta ay dadka badankoodu u yihiin shaqaale. Aynu eegno mid kasta waxa uu ku wanaagsanyahay iyo waxa aanuu ku wanaagsanayn iyo halka uu u nugulyahay si uu qofka u garan karo halka uu u socdo Shaqada, xirfadda, iyo ganacsiga:

Shaqada Qeexid:

Waa shaqo gaar ah oo uu qofku qabto, isagoo ku beddelaya xooggiisa iyo waqtigiisaba mushaharka loo shaqeeyaha.

Faa'iidooyinka shaqada:

Mushahar go'an.

Faa'iidooyinka sida caymiska caafimaadka.

Fursadaha dallacsiinta.

Mushkiladaha ay leedahay shaqaalanimadu

Xakameyn la'aanta shaqada laguu dirayo iyo nooceeda Saacadaha shaqada ee gaarka ah oo kordha mararka qaar. Waxaa laga yaabaa in jawiga shaqadu aanu fiicnayn.

Xirfadda Qeexid:

Waa goob shaqo oo u baahan xirfado iyo khibrad gaar ah, sida xirfadaha tamarta, caafimaadka, tiknoolajiyada iwm.

Faa'iidooyinka xirfadaha:

Suurtagalnimada in aad isticmaasho xirfadahaaga iyo hal abuurkaaga. Dareenka qanacsanaanta shaqada. Fursadaha koritaanka iyo horumarka.
Mushkiladaha ay leedahay xirfaddu:

Ma jiro dammaanad dakhli.

Saacadaha shaqada ee aan joogtada ahayn.

Masuuliyad weyn.

Ganacsiga Qeexid:

Mashruuc ganacsi oo ujeedadiisu tahay faa'iido-doon, kaas oo ku tiirsan alaab iibin ama adeeg bixin.

Faa'iidooyinka ganacsiga:

Xakamaynta dhamayskatiran ee shaqadaada. Suurtagalnimada in ay dhaliso dakhli aad u badan. Dareen guul iyo gaadhid xorriyad dhaqaale.

Mushkiladaha uu leeyahay ganacsigu

Khatar sare.

Saacado shaqo oo dheer.

masuuliyad weyn.

Mid kasta oo ka mid ah qaababka kala duwan ee dhaqaale loo sameeyaa waxa uu wataa dhibtiisa iyo dheeftiisaba. Aduunyada aynu joogno ayaaba ka samaysan dhibaato iyo daal oo ma aha deegaankii nasashada. Haddaba waxa kula gudboon in aad kala doorato culayska iyo dhibaatooyinka si aad u gaadhi karto waxa aad hadba adigu doonayso. Ka warran haddiiba aad iska dayso in aanad midnaba dooran, maadaama oo ay dhibaatooyin badan ku jiraan qaababka kala duwan ee aad dakhli aad u samayn karto? Waxa aad ogaataa in markaa lafteeda aanad ka baaqsanayn dhibaato iyo culays ee waxa aad xanbaaraysaa mid ka mid ah dhibaatooyinka dunida ugu culayska badan oo ah "saboolnimo" doorashadaaduna waxay dhex taallaa "laba daran mid dooro" Doorashadaada saxda ah waxay ku xidhan tahay baahidaada, iyo yoolalkaaga.

Haddii aad raadinayso shaqo xasilloon oo leh mushahar dammaanad ah, shaqadani waxay noqon kartaa doorashada saxda ah ee adiga kugu haboon. Haddii aad rabto inaad isticmaasho xirfadahaaga iyo hal-abuurkaaga oo aad hesho dakhli badan waxa kuu haboon inaad barato xirfad suuqeedu sarreeyo, kuna shaqaysato.

Haddii se aad u socoto xorriyad dhaqaale waa in aad samaysaa mashruuc adiga kuu gaar ah kas ayaana noqon kara doorashada ugu habboon.

Marka aynu eegayno habka ugu haboon ee aad ku gaadhi karto madaxbanaani dhaqaale.

Talo:

Kahor intaadan dooran waddo kasta oo shaqo, qiimee meelaha aad ku fiican tahay iyo meelaha aad ku liidato. Dadka oo dhani ma wada noqon karaan ganacsato ama xirfadlayaal ama shaqaale, laakiin qof kasta oo dedaala oo yeesha yool madax banaani dhaqaale wuu gaadhi karaa, isaga oo u maraya hababka aan soo sharraxnay. Waxa aad dhaqaale fiican ka samayn kartaa shaqadaada, xirfaddaada ama ganacsigaaga. Muhiimaddu waa inaad leedahay hammi iyo hiigsi sare. Sidoo kale waa in aad leedahay fahan dhaqaale oo aad wax ku samayn karto waana waxa ugu muhiimsan ee buugani kaa caawinayo.

Xamse Xabiib Xuseen

April 2024

Hargeysa

Hordhaca Turjumaha

"Madhax ma laba aadmigu waxa uu kuu mitimiyaaye

Macaluul wax kaagama taraan maal laguu guraye

Midigtaadu waxa ay xoogsataa maydha gaajada'e

Marko aanad lahayn looma lulo maanka weligaaye

Maggaabada hashaadaa ka roon maydhanaan kale'e"

Cabdillaahi Suldaan (Timacadde)

Dawan [1] waa koor yar oo bir ka samaysan oo gammaanka loo xidho. Degaannada Soomaalida qaarkood waxa looga yaqaannaa jalas ama ganbaleel, waana qalab bir ah oo laga dhawaajiyo marka xiisadaha dugsigu billaabmayaan ama dhammaadaan. Buuggan waxa loogu bixiyay Dawan, in fursadaha faraha badan ee Ilaahay SWT uu kuugu kaalmeeyay ay sidii dawanka kaa dulyeedhayaan iyaga oo kugu baraarujinaya in aanad is'illaawin, farriinta gaarka ah ee uu xanbaarsan yahay buugganina waa (shaqada aad hadda ka shaqayso ha isku hallayn ee tab iyo xeeladba waxa aad isugu gaysaa in aad noloshaada maarayso, inta aannu waa kale kugu beryin).

Buuggani waxa uu ka warramayaa dib-u-helida xorriyadii ay dhacday noloshan casriga ahi, taas oo kordhisay shaqaalihii iyo loo-shaqeeyihii. Meel keliya buuggan kagama xusna in uu ka hiyikiciyo dadka shaqadooda oo uu nacsiiyo. Taas beddelkeeda waxa uu ku dhiirrigelinayaa in ay

[1] Eeg qaamuuska afka Soomaaliga ee la yidhaahdo Qaamuuska Qarniga,maaddada xarafka "D"

shaqadooda hagaajiyaan, sida ugu fiicanna ay u gutaan. Waxa uu sidoo kale ku baraarujinayaa shaqada ay ka shaqeeyaan in aanay iyagu lahayn, si kastabana ay u dhici karto in ay ka tagaan, sidaas darteedna ay habboon tahay in ay ka faa'iideystaan awoodaha dahsoon ee Ilaahay SWT uu ku abuuray ee maskax iyo muruqba leh, si ay u gaadhi karaan hanti ay iyagu leeyihiin si xornimo lehna ay u adeegsan karaan.

"Hantiyey macaan, waa mid aan hoy lagaa odhaneey!"

Sida adigu aad u haysato ama aad u doonayso in aad yeelato hanti aad kaga jawaabto baahiyahaaga gaarka kuu ah iyada oo aanay cidina kuu qiyaasin, maxay kuula muuqataa in adiga iyo dadka kaleba loo tilmaamo fursad ay xorriyaddaas ku gaadhi karaan?

Doodda ku saabsan shaqaalanimadu ma addoonnimo casriya mise ma aha? Ma aha mid u taalla bulshadayda Soomaalida ah ee aan la hadlayo, buugganna uu ka qorayo, waayo; bulsho ahaan waxa aynnu ka mid nahay bulshooyinka adduunka ugu saboolsan ee qofku maalintii uu ku nool yahay wax ka yar $2 celcelis ahaan, oo ah xaddiga ay Qaramada Midoobay u taqaanno Xadka Saboolnimada.

Dhalinyarada Soomaalidu badanaa waxa a la daalaadhacayaan sidii ay u heli lahaayeen aasaasiyaadka nolosha, haddii aynnu ku dulfurno bulshadeenna dooddan oo caalamka meelo badan ka jirta, waxa aynnu la mid noqonaynaa sidii ninkii loo geeyey dad maxaabiis ah oo jeel ku jira si uu wax ugu sheego, ka dibna uga sheekeeyay raynraynta iyo raaxada guurka!

Farriinta buuggani waxa ay ku socotaa dhallinyarada maskax iyo muruq wixii uu Ilaahay SWT siiyay hagraday ee ku qancay in ay maqaaxiyaha iyo fadhi-ku-dirirka isku dhaafiyaan culaysyada nolosha, ama ay mushahar yar oo kooban kaga dhuuntaan halganka nolosha ee ay ka sugayaan naftiisa, qoyskiisa iyo ummaddiisa inta uu gaadhi karaba.

Dunidan aynnu ku nool nahay waxa u kacay dhallinyaro saamayn xoog leh ku yeeshay dhaqaalaha, siyaasadda iyo dhammaan qaybaha kale ee arrimaha bulshada. Si aan uga qayb qaato, waxna aan ugu darsado qaadhaanka kor-u-kaca garaadka bulshadayda, waxa aan isku deyay in aan soo turjumo soona koobo buuggan oo asalkiisu uu af Carabi ahaa, magaciisana la yidhaahdo, Addoon uma Noqonayo Mushaharka.

لن أكون عبدا للراتب

Waxa uu kaga warramayaa qoraagu arrimo aad u muhim ah oo xidhiidh la leh fahanka dhaqan-dhaqaale ee bulshada (Financial Literacy). Qoraagu waxa uu si qoto dheer uga warramay shaqaalanimada iyo dabeecadeheeda isaga oo waqti dheer soo ahaa shaqaalaha mid ka mid ah shirkadaha dalka Sucuudiga.

Aragtidayda, waxa uu milix ku shubay boog la huursanayay oo dadku aanay jeclayn taataabashadeeda, laakiin muhiimaddu ay tahay in dhallinyarada la baraarujiyo si ay u sameeyaan dhaqdhaqaaq dadkooda iyo dalkoodaba wax ku soo celiya. Aragtida buuggu waxa ay ku dhisan tahay xoogga dhallinyarada jihayntiisa. Kuma filna dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay in ay ka jawaabaan dhammaan baahiyaha ku xeeran bulshada, gaar ahaan dhallinyarada, dawlado dhaqaalohoodu uu aad usarreeyo ayaa haddana la daalaadhacaya xal u helida iyo maaraynta shaqo beelka xad dhaafka ah ee dhallinyarada.

Sidoo kale; waxa aan garan karnaa shirkadaha gaarka loo leeyahay in aanay iyaguna ku fillaan karin xoogga dhallinyarada ee sii kobcaya. Jaamacadaha dalka sannad walba waxa ka qalin jebiya boqollaal iyo kumannaan arday ah, haddana ay si fiican u barteen hal xirfad oo ay ku shaqayn karaan. Qaar badan oo ka mid ahi ma awoodaan in ay ku hadlaan luuqadihii ay wax ku soo baranayeen waqtiga dheer.

Haddaba si ay wax u hal'abuuraan, oo dhallinyaradu ay u helaan nolol wanaagsan, isla markaana uu dalka wax soo saarkiisu kor ugu koco, loogana baaqsado dhibaatooyinka ka dhashay saboolnimada tirada badan, waa in la isu kaashadaa ku- jihaynta tamarta dhallinyarada dhinaca waxqabsiga, hal'abuurka iyo horumarka.

Buugga asalka ah uma aanan soo turjumin si xaraf- raac ah, waxa se aan maray mid ka mid ah qaababka ugu fiican ee wax loo soo turjumo oo ah xulasho, oo ah in aan isku deyay in aan buugga doorto oo aan ka soo xusho waxyaabaha inaga dhexeeya innaga iyo qoraaga oo aan ka jaro waxyaabo ku gaar ah degaanka qoraaga asalka ah sida: qaab nololeedka bulshada, tusaalayaasha gaarka u ah, eray bixinaha qaarkood oo u gaar ah degaankiisa, iwm.

Sidoo kale; waxa aan iskaga tagay meelo badan oo aan u arko in aanay xidhiidh badan la lahayn mawduuca buugga sida: mid ka mid ah

cutubyada u danbeeya uu kaga warramayo eray bixinno dhaqaale oo tiro badan. [2]

Sidoo kale; waxa aan isku deyay meelo badan oo aad u soo noqnoqonaya, una badan dhiirrigelin in aan soo koobo. Sidaas si la mid ah; waxa aan soo koobay tusaalayaasha, waxa kale oo aan ka ilaaliyay in ay soo noqnoqdaan. Buugga waxa aan isku deyay in aan degaameeyo oo aan ku saleeyo dhaqanka, afka iyo fahanka Soomaalida, qaab aan isla fahmi karnana aan u soo dhigay tusaalayaasha, jaantusyada, iwm.

Buugga meelaha qaarkood waxa aan u beddelay siyaabo aan u arkay in ay ka midho badan tahay sidii asalkiisa hore uu ahaa marka loo eego bulshadeenna Soomaalida ah, sida cutubyada u danbeeya oo uu kaga warramayo ku dayashada dadka guulaystay oo dhiirrigelin badan oo soo noqnoqtay ay ku jirto, waxana aan ku beddelay afartan talo oo koob-kooban oo aan ka soo dheegtay qoraalladii hore, si aanay akhrsitaha uga kala baahin xogtu.

Guntii iyo gunaanadkii, qoraal ceeb ka nabad galay waa uun kitaabka Ilaahay, wixii wanaagsan ee aan haleelay waa Ilaahay mahaddii, wixii aan ku gefay ama aan garab marayna Ilaahay ha iga cafiyo. Waanan soo

[2]Meelaha aan ka tegay waxa ka mid ah tusaale ahaan boggaga 49-54. Sidoo kale 58-65 waxana aan u arkay in ay tahay xog soo noqnoqonaysa, faahfaahin dheeri ahna uu ka qoray qoraaga asalka ahi. Sidoo kale waxa aan ka tegay meelo kale oo aan u arkay in aanay ka mid ahayn mawduuca asalka ah ee buuggu uu ka warramayo sida: 153-162, iyo 175-187. Sidoo kale; waxa aan gebi ahaanba ka saaray 189-217 oo ku kala saabsan laba qaybood oo uu ka kala dhigay qoraaga asalka ahi "eraybixinno maaliyadeed" iyo "isku-ekaysiinta dadka guuleystay" iyada oo aragtidayda labadaas cutubba ay baahinayaan ujeeddadii buuggu uu xanbaarsanaa. Taas beddelkeeda waxa aan ku beddelay afartan 40 talo oo maaliyadeed oo aan ka soo uruuriyay buugga intiisa hore, si qofku uu si dhow ugu noqon karo, una soo koobaysa nuxurka buugga.

dhowaynayaa talo iyo tusaale kasta oo uu akhristuhu kudarsanayo.

Akhris wacan.

Turjume

Xasme Xabiib Xuseen

Hargeysa April 2024

Hordhac

"Diintu Waa Nasteexo" Xadiis Sexeex ah

Aniga oo ogsoon in qofka wax qoraa naftiisa uu u bandhigayo dabaylaha canbaaraynta iyo canjarafaynta, haddana aaminaadda aan ku qabo iyo dedaalka aan gelinayo in aan qoro buuggani waxa ay ii samaynaysaa aragti togan si aan uga qayb noqdo wanaagga nolosha qof kale, tallaabadaas oo ii sababaysa in aan u dulqaato dabaylaha canbaaraynta.

Bar bilawgaygii markii aan ka shaqaynayay mid ka mi ah shirkadaha gaaska "Etihad" ayaan doonay in aan u barto shaqo-wadaagtayda si qoto dheer, aniga oo ku saamoobay markaa casharro iyo tobabarro aan ka qaatay Mr. Jim Rohn barnaamijkiisa uu bixiyo ee la yidhaahdo (one year success plan), iyo sidoo kale akhrinta aan ku soo afmeeray buugga Aabbe Hodan ah Aabbe Sabool ah ee Robert Kiyosaki.

Waxa aan weydiiyay qaybo aan xushay oo saxiibadaas ka mid ah su'aalo dhawr ah, halkan se waxa aan kugula wadaagayaa laba su'aalood oo ka mid ahaa:

- Goorma ayaa kuu qorshaysan in aad ka fadhiisato shaqada aad hayso?
- Haddii ay duruuftu qasabto in aad ka tagto shaqada aad hayso hadda, illaa imisa maalmood ayaad ku sii noolaan kartaa wixii aad kaydsatay? Ta Ilaahayna waa xaggeeda'e! Waxa ay noqotay jawaabta dhammaan dadkii aan waraystay:

“Waxa aan shaqada ka fadhiisan doonaa marka aan lixdan jir gaadho." Jawaabta labaad ee ay bixiyeenna waxa ay noqotay mid u baydhaysa dhanka dahsoonaanta oo aan caddayn, hase yeesho'e badankoodu waxa ay sheegeen in ay haystaan wax ku filan muddo bil ah marka laga reebo hal qof oo isagu la wareeray su'aashan la weydiiyay fikirka ay ku dhalisay aawadi, sababta oo ah; horeba isuma uu weydiin su'aashaas, aragtidiisuna waxa ay ku koobnayd keliya maalintiisaa uu nool yahay.

Wax lala yaabo ma aha in lagu hawlgabo da'da sharciga ah ee dhigaysa in lagu hawlgabo lixdan jirka, laakiin waxa uu ahaa waxa igu riixaya in aan weydiiyo su'aalahaas oo aan qoro buuggani, waa si aan uga qayb qaato bidhaaminta iyo waddada dadka kale si aanay ugu hungoobin sidii aan aniguba hore ugu hungoobay isku-hallaynta wax aanan lahayn, iyo in aan kiciyo garaadka dadka oo aan ku cariyo qorshaynta iyo isla-xisaabtanka saxda ah ee u saamaxaya qofka in uu helo door kale oo aan ahayn mid uu ku qasban yahay, isku-hallayntiisa buuxda ee mushaharka si indho-la'aan ah.

Waxa aan isku deyay sida qofka hoggaamiyaha ahi uu uga caaggan yahay keliya in uu ku gaabsado bidhaaminta waddada saxan, laakiin ay waajib ku tahay in uu mudnaan ballaadhan siiyo sidii ay u guuleysan lahaayeen dadkiisu, sidaas oo kale ayaan xil isaga saaray qoraalkan. Sooyaalkaygii nololeed ee shaqadaydu ilaa aan ku dhowaaday da'da hawlgabka, waa mid ka mid ah tusaalayaasha nool ee aad u heli karto waxa uu ku danbaynayo mustaqbalkaaga shaqaalanimo ee aanu qorshe kale la soconi. Aniga oo dareensan xaqiiqadaa biyo kama dhibcaanka ah,

waxa aan caddaynayaa in aanan tusaale mudan u ahayn ka-jawaabidda su'aalahaas, waxa se igu kellifaya buuggani uu yahay in aan kala cararo dadka kale in aanay ku dhicin isla dabinkii aan ku dhacay anigu waqti hore. Waa ikan hadda! Waxa aan taaganahay albaabadii hawlgabka iyo shaqo ka fadhiisiga, waxa ii muuqda wixii aan soo maray noloshii dheerayd ee aan soo noolaa, wixii aan soo maray tijaabo dhib iyo dheefba leh. Waxa aan kuugu soo uruuriyay oo aan kuugu shubay khibraddaa dheer waraaqahan hortaada yaalla. Way badan tahay in la weriyo nolosha dad ku guuleystay qaybaha kala duwan ee nolosha, si loogu daydo guushoodu, laakiin aad ayay u yar tahay in aad hesho qof kuu weriya oo kaaga warrama guuldarrada ku timid qof kale iyo iskuday ka fashilmay, si aanad adiguna u qaadin waddadaas oo aad uga baydho oo aanad ugu jabin.

Waa ikan mar kale! Waxa aan kuu fududaynayaa shaqada si aan uga sameeyo casharro bilaash ah wixii aan ku guuldarraystay anigu qof ahaantayda, si aad uga fogaato dabinkaa dahsoon. Waxa aan ka gaabsaday in aan u koco dhinaca badweynta, waxana aan ku kaaftoomay iliilaha biyaha ah ee yaryar, waxana aan muddo dheer oo 30 sano ah addoon u ahaa mushahar kooban oo aan ku noolaa.

Dhibku ma aha mushaharka, waxa se moogganaan xooggani ay iga haysatay fahanka dhaqan-dhaqaale oo aan muddo ku soo dhaqmayay aragtiyaha duugga ah ee qaldanaa ee aan ka haystay maaliyadda shakhsiga ah, taas ayaana sababta ugu weyn u ahayd in aan ka tago

badda ballaadhan oo aan ku kaaftoomo iliilaha biyamareenka ah ee aadka u yar. Waxyaabaha aan aaminsanaa waqtigaa hore waxa ka mid ahaa:

- Bixi waxa aad hayso Ilaahay ayaa kuu maqane!
- Lacagtu waa hooyada xumaanta!
- Maalqabeenku waa dad isla weyn, lacagtana addoomo u ah!
- In yar oo joogto ah ayaa dhaanta in badan oo laga yaabo in ay kaa go'do!
- Doog waliba qodax leh, halkaygan ayaan iska joogi!
- Ma warshad lacag samaysa ayaan haystaa, iwm!
- Qofna ma dhaafo intii loo qoray (weedhan muran kama taagna, waxa se uu muran ka jiraa qofka qaddarka marmarsiiyo uga dhiganaya wahsiga, isdhigashada, dad- ku dul noolaashaha, iyo raaxo-jacaylka aan shaqo lahayn).

Sida aad arki karto, weedhahani waa weedho ka siman han-jabnaanta iyo in uu garaadkaaga dahsooni (Subconscious Mind) uu aqbalo isdhiibidda iyo ka- hadhida hayaanka halganka nolosha lagula jiro. Waa taas aragtiyaha qayrkay iga reebay ee iga dhigay in aan addoon u noqdo mushaharka aan ku shaqayn jiray, illaa aan ku dhowaaday da'da hawlgabka! Haddaba, adiga aragtidaada maaliyadeed waa maxay? Xaggee ayay se kugu hoggaaminaysaa?

Waa maxay aragtidaada maalgashi?Aragtida dadka hodanka ahi waa (kaydso, ka dib maalgasho oo ka shaqaysii wixii aad uruurisay wixii kuu soo hadhana isticmaal markaa). Taa liddigeeda, aragtida dadka saboolka

ahi waa iska isticmaal dakhliga ku soo gala marka hore, haddii ay wax soo hadhaanna markaas maalgasho oo ka shaqaysii baaqiga. Labadaa aragtiyood midkee ayaad ku dhaqantaa adigu? Falsafaddani waxa ay ka dhigan tahay halka ay ku kulmaan aqoontaada waxyaabaha aad ka aaminsan tahay hantida. Si kale haddii loo dhigo; waa maxay waxa aad rumaysan tahay ee la xidhiidha hantida? Dib u celi giraanta maskaxdaada oo dib u habee waxyaabaha aad ka aaminsan tahay hantida, adiga oo is weydiinaya waxyaabaha aad aaminsan tahay ma wax ku gaadhsiinaya madaxbannaani dhaqaale ayaa?

Mise waa wax kula hadhaya oo kugu garbaduubaya in aad addoon u ahaato mushaharkaaga? Halkaa innaga oo ka sii anbaqaadayna waxa aan kaa codsanayaa in aad si mug iyo miisaan leh ugu fiirsato jawaabaha aad ka bixinayso su'aalahan adiga oo ku qiimaynaya naftaada.

- Waa maxay argatida aad ka haysato hantida?
- Aragtidaada maaliyadeed ma mid kuu horseedaysa xorriyad maaliyadeed?
- Ma leedahay qorshe maalgashi?
- Ma u fulisaa sidii aad u qorshaysay?
- Qorshahaaga iyo fulintaadaba intee ayay gaadhsiisan tahay xeel dheeraantooda iyo inta ay xaqiiqada ku qotomaan?
- Waa maxay aragtiyahaaga maalgashi?
- Ma waxa aad maalgashaynaysaa wax kuu gaar ah, mise shirkado kale oo guud?
- Haddii aanu maalgashigaagu ahayn mashruuc kuu gaar ah qorshe ma ka leedahay arrintaa?

Waxa suuragal ah in hadba jawaabaha aad u hesho su'aalahaas iyo sida ay u yihiin kuwo xaqiiqo ah inuu noqdo xawaaraha socodkaaga ee jidka maalgashiga iyo xorriyad dhaqaale. Antoni Ropens buuggiisa (Great Steps) isaga oo arrintan ka hadlaya ayuu yidhi:

"su'aalaha aad isweydiiso ee noloshaada qaabeeyaa ma aha keliya kuwa aad isweydiiso, laakiin waa kuwa aad tahli weydo ama aad ku guuleysan weydo in aad isweydiisaba! Waa su'aalaha aan si iskaa ah kuugu soo dhicin laakiin ay keenaan waxyaabo kugu curiya su'aalahaasi.

Waxa kula gudboon in aad ogaato qorshe-la'aanta kaa haysata noloshaada qiraal aad bixinayso oo aad siinayso cid kale si ay kuugu qaabeeyaan oo ay kuugu qorsheeyaan noloshaada seegitaanka aad seegayso, guul yar oo aad gaadhaana waxa ay sabab u noqon kartaa in aad ku seegto guulo waaweyn oo aad gaadhi lahayd.

Dhibaatooyinka inaga haysta nolosha dhammaanteed kuma qotomaan oo keliya in la garan la'yahay waajibka inala gudboon ee ay tahay in aynnu gudanno, laakiin waxa ay sidoo kale ku qotomaan in uu maqan yahay doorkii shaqada iyo waxqabsiga aynnu wax ku qabsanaynno hadba inta ay garashadeennu tahay, waxa uu ku tilmaamay Jim Rohn mid ka mid ah casharada uu bixiyo laba qodob oo muhiim ah oo kala ah:

- Si ay arrimahaagu u saxmaan waa in aad adigu saxantahay marka hore.
- Muhiim ma aha waxyaabaha kugu dhacayaa marka loo eego sida ay muhiimka u tahay qaabka aad uga falceliso waxa kugu dhacaya.

Sidoo kale muhiim ma aha halkee ayaad taagan tahay hadda?

Sidee iyo halkee ayaad kaga jirtaa hadda sahanka noloshaada?

Laakiin muhiimadda mahuraanka ahi waa sidee ayaad uga falcelinaysaa marka aad ogtaato halka aad taagan tahay.

Haddii aad dib u raacdo heerarkaagii waxbarasho ee kala duwanaa, hoose, dhexe, sare, ilaa heer jaamacadeed, kama helaysid maaddo ku saabsan fahanka dhaqan-dhaqaalaha (Financial Literacy), iska daa in aad ku aragto maaddooyin kale oo kor kuu sii qaadaya sida maalgashiga iyo aasaaska mashruucaaga gaarka ah oo ku baraya sidee ayaad u aasaasi kartaa mashruucaaga?

Sidee loo sameeyaa handida? Iwm.

Wacnaan lahaydaa haddii ay mushkiladdaasi ku gaar tahay dugsiyada guud, laakiin sidoo kale waxa kuula mid ah dugsiyada gaarka loo leeyahay oo iyaga laftoodu ka madhan barashada waxyaabaha sida tooska ah u taabanaya nolosha dadka sida: fahanka dhaqaalaha, kobcinta ruuxda, waxqabsiga, isxilqaanka, iyo samaynta mashruucyada, iwm.

Dhibkaa waxa sii laba jibbaaray in manhajkii waxbarasho, waalidkii iyo bushadiiba ay ku dhiirrigelinayaan oo lagama-maarmaan ay ugu sawirayaan ubadkii in ay ku dedaalaan waxbarshada, si ay hadhow u helaan shaqo wanaagsan oo ay ugu shaqeeyaan mid ka mid ah shirkadaha waaweyn. Aad iyo aad ayay u yar tahay in lagu dhiirrigeliyo

Barbaarta sidii ay u samaysan lahaayeen mashruucyadooda gaarka ah, ama ay u baran lahaayeen xirfado u gaar ah oo iyaga loogu baahdo si loo helo jiil aan ku fekerin keliya in shaqo la siiyo ee ay u soo baxaan jiil ku fekera in ay iyagushaqooyin abuuraan.

Waxa ay isu kaashadeen dhammaan manhajyadeenna waxbarashada iyo dhaqanka bulshadu sidii loo soo saari lahaa hormooyin shaqaale ah oo aan lahayn wax xirfad ah. Waxa sannadkii ka qalin jebinaya jaamacadaha dalka boqollaal ama kumannaan arday oo aanad ka dhex helayn 10% bartay xirfad ay si wanaagsan u barteen ama aqoonta la barayay lafteeda ka midho keenay, taasina waxa ay dhashay in xooggii dalku uu ku soo dhammaado tahriib iyo maqaaxiyaha oo la buuxiyo waqtigii shaqada.

Waxa la gaadhay waqtigii dib loo milicsan lahaa manhajkeenna waxbarasho iyo dhaqankeenna guud, loona abuuri lahaa manhaj iyo dhaqan soo saara dad waxqabsi leh oo hal'abuur iyo himilo xanbaarsan.

Waxa la gaadhay xilligii la soo saari lahaa ruuxda hal'abuurka iyo curinta fikirrada maalgashi ee dhallinyarada, sidii mid kastaaba uu u noqon lahaa seeska horumarka bulshada ee dhaqaalaha iyo aqoonta, qaybna ay uga noqon lahaayeen horusocodka dadka iyo dalka oo aanay iyagu noqon mid ka mid ah mushkiladaha dalka ee xalka loo la'yahay.

Waxa laga yaabaa in aad bilawday geeddi- socodkaaga nololeed dhawr sano ka hor, weli se ma yara joogsatay oo si dhab ah nafta ma ula sheekaysatay, si aad ula soo baxdo natiijada hayaankii aad soo haysay uu hadda kuu dhalay?

Haddii se aad sii hayso ilaa iyo halkee ayuu kula gaadhi doonaa sannadaha soo socda?

Aan ku weydiiyo su'aalo dhawr ah:

Hadda nolosha halkee ayaad kaga sugan tahay?

Halkee se ayaad ku socotaa shan ama toban sano ka dib?

Ma kuu astaysan yihiin halka aad u socoto iyo waxa aad doonaysid?

Weli se ma u kacday in aad qaaddo waddadii halkaa ku gaadhsiin lahayd?

Haddana aan ku siiyo doorashooyin dhawr ah oo laga yaabo in ay kugu hoggaamiyaan, kuuna ibo furaan waddadii aad ku gaadhi lahayd halka aad doonayso?

- Nolol qorshaysan, mise nolol bilaa qorshe ah oo ku salaysan hadba ka jawaabidda wixii yimaadda?
- Nolol iska caadi ah oo aan ka duwanayn tan dadka kale, mise nolol ku dheehan halgan iyo xisaabtan toosan?
- Nolol aad adigu maamusho, mise nolol ay kuu maamulaan duruufaha kugu xeeran ee aad wax kabeddeli karto?

Isla hadda midkee ayaad u aragtaa noloshaadu in ay ku dul socoto?

Muhiim ma aha sida aad doonayso ama aad jeclaan lahayd, laakiin muhiimadda saamaynta kugu lihi waa maxaad qabataa hadda?

Halkee ayuu ku baxaa waqtigaagu?

Halkee ayuu ku baxaysaa hantidaadu?

Wax aqoon ahi ma kuu korodhaa?

Noloshaadu waxa ay martaa marxaladaha kala duwan ee cimilada sannadku ay marto, gu', dayr, xagaa, iyo jiilaal Nolosha uu qof waliba hadda uu ku sugan yahayna isla hadda uun kuma ay soo boodin'e waxa ay ka samaysantay maalmaha iyo habeennada ku soo marayay wixii aad u dhiibatay, maalmaha soo socda' ee noloshaaduna waxa ay ku siin doonaan keliya waxa aad imika u dhiibato.

Aad iyo aad ayaan uga xanuunsadaa marka aan arko dhallinyaro ku sugan xilligii gu'ga cimrigooda nafahooda ku liidaya in ay baryootamaan dadkana wax ka weydiistaan masaajidada, wadooyinka iwm, waxa sidoo kale jira dhallinyaro kale oo badan oo kuwaas kala mid ah xagga haynta, laakiin xishoodka iyo sariigashadu ay u diidayaan in ay dadka wax weydiistaan. Maxaa ku dhacay kuwa tuugsanaya iyaga oo xoog ah oo caafimaad qaba?

Maxay se ku dayeceen sannadihii cimrigooda?

Waxa kula gudboon in aad mustaqbalka odorostid (saadaaliso), isla maanta oo aad talagal ka yeelato sida uu u muuqan doono xaalkaaga diineed, caafimaad, dhaqaale, muddo ka dib haddii cimriga Ilaahay SWT uu kuu dheereeyo. Hadda waxa aad isa sii weydiisaa qoyskaaga ma ku fillnaatay sida qayrkaaba ay ugu filnaadeen qoysaskooda?

Maxaad ku odhan doontaa ubadkaaga marka ay soo gaadhaan goor aad weynaatay iyo adiga oo aan u qorshayn wax ay kaga maarmaan ay dadka u baahdaan, gacmahana ay hoos dhigtaan, sida uu nabigeennu ﷺ kula

taliyay saxaabigii doonay in uu hantidiisa sadaqo u wada bixiyo[1]?

Waa kuwaa su'aalaha la doonayo in aad hadda isa sii weydiiso oo aad jawaabu raadisaa. Damqashada iyo hantaaqada uu qofku ka dareemayo in uu is xakameeyo oo uu is xisaabiyo xilliga dhallinyaranimadiisa waxa ka culays badan tiiraanyada iyo laxawga ku sugaya mustaqbalkiisa danbe haddii aanu ku adkaysan dhibka uu ka dareemayo is xakamaynta iyo halgankiisan hore.

Ka adkaysiga wax kasta oo aan ku anfacayn iyo ku adkaysiga waxa ku anfacaya adduun iyo aakhiraba waa waxa diinteenna suuban lagu magacaabo (samirka).

Guuldarrada adduunyada waxa iyaduna ka sii culays badan oo ka sii dhib badan guuldarrada aakhiro. Isweydii labada qolo kee ayaad ku biiri qolada guuleysatay adduun iyo aakhiraba, iyo qolada guuldarraysatay iyaga oo aanay waxbana u madhxin ee intaa dedaalayay.

Ilaahay sarreeye waxa uu yidhi:

﴿ الَّذِينَ ضَلَّ سَعْيُهُمْ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَهُمْ يَحْسَبُونَ أَنَّهُمْ يُحْسِنُونَ صُنْعًا (١٠٤) أُولَٰئِكَ الَّذِينَ كَفَرُوا بِآيَاتِ رَبِّهِمْ وَلِقَائِهِ فَحَبِطَتْ أَعْمَالُهُمْ فَلَا نُقِيمُ لَهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَزْنًا (١٠٥) ﴾

[الكهف : ١٠٤ - ١٠٥]

Alle sarreeye waxa uu yidhi: ((kuwa uu khasaaray dadaalkoodii oo u malaynaya in ay wanaag samaynayaan * kuwaasi waa kuwa ka gaaloobay aayadaha Alle iyo la kulankiisa * waxaana ka buray wixii ay soo Shaqay sanayeen wax qaddar ahna u yeeli mayno maalinta qiyaamaha kuwaa)).

(1) Sacad Ibnu Abii Waqaas.

Aayadda Ilaahay korreeye waxa uu ku sheegay duul aan dedaal yaraysan, iskuna haystay in ay qumman yihiin, laakiin aanay waxba u madhxin ee isla dedaalkoodii ku khasaaray Ilaahay ha inaga koriyo'e. Walaal; noloshaadu waxa ay bilaabantay waqti hore, laakiin ma ku socotaa waddadii saxda ahayd? Walaal; maalin walba waxa uu Ilaahay sarreeye ku siiyaa fursad cusub oo aad dib ugu abaabulan karto nolol ka wanaagsan tan hadda aad ku nooshahay. Tilmaamidda iyo astaynta nolosha aad doonayso in aad ku noolaata waa ta jaangoynaysa in aad doorato bilaw sax ah.

Bilawga ugu muhiimsani waa in aad ka bilawdo naftaada lafteeda, oo aad isweydiisaa adiga qudhaadu ma tahay shakhsi gaadhi kara yoolka uu rabo? Walaal; geeddiga noloshaadu waxa uu soo bilaabmay waqti hore. Joogso oo ka shaqee. Is xisaabin madax furan ku samee dhawr meelood oo noloshaada saamayn weyn ku leh oo ay ka mid yihiin:

- Xidhiidhka aad la leedahay Rabbigaa.
- Xidhiidhka aad la leedahay qoyskaaga qof kastaba.
- Xidhiidhkaaga bulsho.
- Xaaladdaada dhaqaale.
- Qorshayaashaada nolosha.
- Tusaalahaaga sare ee aad ku dayataa se wa'ayo?
- Ma akhridaa aqoon ku gaadhsiinaysa halka aad usocoto?

Xasuusnow mar walba geerida iyo marka aad dunidan ka tegaysaa ma aha mid doorasho ku xidhan, ee waa arrin u go'an noole kasta. Sidaa darteed; waxa kula gudboon in aad garan karto halkee ayaad ka taagan tahay hayaanka nolosha maanta iyo berriba (adduun iyo aakhiro).

Waxa aan ugu baaqayaa Muslin kasta iyo Muslimad kastaba in uu ku sugnaado dariiqa toosan noloshan adduunyada ilaa maalinka qiyaame. Ogow in aad gaadho yoolkaaga nololeed waxa kaa xiga keliya laba qodob, ka dib marka aad astaysay labadaa qodob oo kala ah:

- Joogtayn: macneheeduna uu yahay in aanad ka hadhin hayaankaaga wax kasta oo ay kugu qaadanayso iyo caqabad kasta oo ku soo wajahaysa ilaa aad ka gaadhayso dantaada.
- Dib-u-dhigidda: in aad noloshaada ka saarto waxa la yidhaahdo dhayalsiga iyo dib-u-dhiga nafta aad ku maaweelinayso berri ama saadanbe ayaan qaban hawshaas. Dib-u-dhiggu waa cadawga fursadaha togan iyo baabi'iyaha rejooyinka muuqda.Maanka ku hay in socdaalka kunka mayl ahi uu ka bilaabmo hal tallaabo oo keliya oo loo qaaday dhinaca saxan. Waxa aan rejaynayaa in buuggani uu kuu noqdo tallaabadaada koowaad ee dhinaca saxan aad u qaadayso hadii aanad horeba wax u bilaabin.

Ballan

Adiga, haa! Adiga oo xiise qabay in aan soo saaro buuggan waxa aan ku leeyahay: igula ballan in aad naftaada kula ballamayso in aanad noloshaada uga tegayn nasiibka iyo dabaylaha rejada oo oo keliya, ee hawsha iyo shaqada aad hadda haysaa ay dhammaanayso maalinta aad adigu u qorshaysay in ay soo dhammaato, una dhammaato sida aad adigu u qorshaysay, ma aha sida ay u qorsheeyeen ee ay kula rabaan dadka kale ama duruufaha kugu xeerani,

Dhammaan qaddarintayda iyo ixtiraamkayguna waa la jirkaaga!

Qoraaga buugga

Xoolo-ogi

Dadku waa mid xoolo-moog (xoolo-hunno) iyo mid xoolo-og. Ka xoolaha ogi waa ka fahansan siyaabaha lagu maamulayo xoolaha si loo ilaaliyo, loona kobciyo waana waxa loo yaqaano fahanka dhaqan- dhaqaalaha (financial literacy) ee qofka iyo qoyska.

Waxa aad la amakaagaysaa marka aad ogaato in waxyaabaha seeska u ah kasbashada hantida, kobcintiisa iyo xallinta mushkiladihiisa, iyo in uu yahay wax la baran karo oo leh xeerar iyo aqoon la kala barto oo ay ahayd aqoon dadku ay kala baran jireen ka hor shan kun oo sano, gaar ahaan

magaalada guunka ah ee Baabil, halkaas oo uu daaha ka rogay ninkii ugu hantida badnaa magaaladaasi sababta uu ku kasbaday hantidan faraha badan. Ninkan waxa la odhan jiray Arkaad, waxa uuna sameeyay hanti badan oo ay saaxiibadiisii yaraantii ay soo wada koreen, isku duruuftana ay ahaayeen aanay samayn!

Waxa ay is weydiiyeen saaxiibadii, sidee ayay ugu suuragashay in uu sameeyo hodantinimada intan le'eg isaga oo aan waxba ka duruuf duwanayn iyaga oo kula nool isla degaankooda, haystana isla fursadaha ay haystaan oo keliya, waxana ay go'aamiyeen in ay arrimahaa kala sheekaystaan saaxiibkoodii yaraantii, imikana maalqabeenka ah.

Waxa ay ku yidhaahdeen: "waxba nagama aadan duwanayn yaraantii, haddana waxa aad haysataa hanti badan. Waxa aannu kaa doonaynaa in aad nooga warranto sida aad ku shaqaysatay hantida intan le'eg adiga oo na dhex jooga?"

Waxa uu ugu jawaabay Arkaad: "sababta aad u kasban weydeen hanti badan waxa weeye, in aydaan waxba ka baran xeerarka maamulka dhismaha hantida, ama waad barateen, laakiin ma aydaan fulinin wixii aad barateen. "Hadalkiisii ayuu sii watay Arkaad, waxana uu ku yidhi saaxiibadii: "waxa uu nooga warramay macallinkayagii xikmadda badnaa in waxbarashadu tahay laba nooc:

Nooca hore, waa waxyaabaha aan baranno ee ku soo kordha aqoonteenna.

Nooca labaadna, waa fulinta wixii aan barannay oo iyaduna daaha ka qaadda sidee ayaynnu u ogaannaa xaqiiqada wixii aynaan aqoonta u lahayn ee la inoo sheegay?,

Anigu Arkaad ahaan waxa aan go'aansaday in aan ogaado sidee ayay qofka suuragal ugu tahay in uu sameeyo hanti badan, ka dib waxa aan u jihaystay halkii aan ka heli lahaa aqoontaas waxa aan u tegay nin maalqabeen weyn ahaa oo la odhan jiray Aljaamiish, waxana aan ku idhi: 'waxa aad tahay nin maalqabeen ah. Waxa aad iiga warrantaa, sidee ayaan ku noqdaa maalqabeen adiga oo kale ah?'

Waxa uu iigu jawaabay: 'waxa aan helay waddada hodantinimada markii aan go'aansaday in aan kaydsado wax ka mid ah waxa isoo gala, si aad adiguna u noqoto hodan waa in aad samaysaa sidaas oo kale. Waxa uu weydiiyay Arkaad maalqabeynkii Aljaamiish: "oo ma intaas ayuun baa hawshuba?"

Waxa uu ugu jawaabay: "maya! Intaas kuma koobna, ee marka hore waa in aad ka adkaataa tallaabadaa koowaad oo aad wax dhigataa, ugu yaraan 10% waa in aad kaydsataa wixii ku soo gala.

Marka aad taa ka soo gudubto ee aad ka adkaato, ta labaadna, waa in aad ka shaqaysiiso wixii aad kaydsatay oo aanay meel iska oollin lacagtaadu. Hantidu waa sida geedka oo kale. Waxa ay u kobocdaa si aayar aayar ah, sidaa darteed; 10%ka aad hadda kaydinaysaa waxa ay ka dhigan tahay midhihii beerista geedkaaga ugu horreeyay.

Sidaas ayuu ku weynaanayaa geedkii aad beertay marka aad ilaaliso, kana war hayso. Mar kasta oo uu qofku hore u bilaabo kaydsiga wax ka mid ah waxa soo galaa, waa mar kasta oo uu sii kordho waxa ku soo noqonaya isbeddelka habeennada iyo maalmaha dhexdoodu.

Si aad u kobciso kaydkaaga haddii aanad aqoon u lahayn sida aad ugu shaqaynayso kaydkaaga, waxa aad kaashanaysaa dadka aqoonta gaarka ah u leh shaqadaas. Xikmadda ka mid ma aha in aad u tagto roodhile ama kaboole si aad wax uga weydiiso cilmiga xiddigiska. Miyaanay sidaa ahayn?!

Waxa aan iska garanaynaa haddii aad cilmiga xiddigiska wax uga baahan tahay in aad u tagto qof aqoon u leh cilmigaas. Sidaas oo kale; marka aad doonayso in aad ka shaqaysiiso kaydkaaga oo aad maalgashato, waxa lagama-maarmaan ah in aad u tagto cidda aqoonta u leh shaqadaas. Waxa ay fahmeen saaxiibada Arkaad in ay la gudboon tahay in ay dakhliga soo gala ka kaydsadaan 10%, iskuna dayaan in ay ku noolaadaan mar walba waxkayar waxa soo gelaya oo aanay dib u wada isticmaalin

waxa soo gala. Sidaas oo kale; adiguna waad fahantay in ay kula gudboon tahay in aad sidaas samaysaa.[2] Waxa aynnu ka barannay sheekadan in aqoonta iyo fulintu ay yihiin mataano aan kala maarmin, labadaa dhexdoodana ay ku dhintaan himilooyin badan oo ay dad xanbaarsanaayeen, waxa dhiciska ka dhigay halgankoodiina ama waa aqoon darro, dedaalba kuma yarayn'e, ama aqoon way lahaayeen, laakiin waxa ay hagradeen fulintii iyo dhabar-adayggii, odoroska ugu fiican ee laga qiyaasi karo mustaqbalkaaguna waa sida aad isugu daboosho labadaa dhardhaar.

Aqoonta dugsiyada iyo jaamacadaha kala duwan lagu bartaa ma xuma, ceebna ma laha, laakiin aqoonta uu qofku naftiisa si gaar ah u barto isaga oo naqaysanaya, waxa sida dhabta ah uu ugu baahan yahay ee ka jawaabaya baahiyihiisa ayaa ka muhiisan aqoonta guud, aqoontaa gaarka ah ayayna ku hoos aasan tahay hantida ku duugan qofka ee u tarmaysaa, aqoonta quruxdeedu waxa ay ku jirtaa marka ay ka jawaabayso baahiyahaaga nololeed, sidoo kalena; ay ku horumarinayso kuna gaadhsiinayso hadafkii aad lahayd. Hadii aad doonayso in aad ogaato waddada ugu muhiimsan ee aad u mari karto horumarinta naftaadanu, waa wax-akhriska.

Waxa uu ku xusay faylasoofka weyn ee Jim Rohn[3] mid ka mid ah casharada kaydsan ee uu bixiyay:

[2] Sheekadan waxa uu ka soo qaatay qoraagu buuga.

[3] Jim Rohn. Waxa uu ahaa faylasoof Maraykan ah oo ka hadla arrimaha dhiirrigelinta, sidoo kalena waxa uu ahaa qoraa. Waxa uu dhashay 1930kii, waxana uu dhintay 2009kii. Waxa uu caan ku ahaa fikradihiisa togan iyo kuwa dhiirrigelinta leh ee ku saabsan guusha shakhsi ahaaneed iyo gaadhitaanka yoolalka. Waxa uu saameyn weyn ku yeeshay dad badan oo ku shaqeeya dhinacyada ganacsiga iyo horumarinta shakhsi ahaaneed.

"Akhrinta waa wax muhiimad kuu leh maalinti waa wax aad iyo aad u qiimo badan, waxa ay ku dhaxal siinaysaa waxyaabo badan oo cusub, qiimana leh. In aad maalin walba wax akhridaa waa wax aad u qiimo badan, kana qiimo badan cuntada aad maalintii cunto."

Waxa uu adkeeyay wax akhrinta maalintii, waxana uu sheegay in ay suuragal tahay in aad illawdo wax-cunidda waqti ka mid ah maalintii, laakiin aanay sinaba suuragal ku ahayn in aad illawdo maalintii wax-akhriska.

Dhaq-dhaqaaqa Hantida

Dhaq-dhaqaaqa hantida iyo muhiimadda ay leedahay in fahan loo yeesho aasaaska maaliyaddu waxa ugu mudan ee qofku uu ku xaqiijin karo himiladisa madax-banaanida dhaqaale. In aad horumariso oo aad maalgashi iyo horumar joogto ah ku samayso naftaada, waa waxa ugu muhiimsan ee ku gaadhsiin kara qofka aad doonayso in aad noqoto.

Joogtee sahanka horumarinta naftaada. Haddii aad naftaada horumariso wax waliba hortaada ayay imanayaan. Isu diyaari sida ugu habboon ee aad u horumarin karto naftaada.

Baro wax kasta oo aad ka baran karto ganacsiga, xirfadaha ama waxsoosaarka, hantida iyo maamulkeeda, xataa adiga oo aan waxba haysan, waayo; barashada waxa kaa maqan ayaa kuu furaya albaabo badan oo kaa xidhan. Aqoonso waxyaabaha aad ku fiican tahay oo sii horumari.

Sidoo kale; ogow meelaha aad u jilicsantahay amaba u nugushahay oo ka shaqee sidii aad u hagaajin lahayd sannad walba, bil walba, iyo maalin walba, oo ka dhig mid ka fiican kii hore.

Waxa uu allifay Robert kiyosaki[4] buug aad u qiimo badan oo uu u bixiyay

[4] (Robert kiyosaki) Waa maalgashade Maraykan ah iyo qoraa caan ku ah buugiisa "Rich Dad Poor Dad" oo la baahiyay 1997. Buuggan, Kiyosaki waxa uu ku sharaxayaa aragtiyo u gaar ah oo ku saabsan sida loo gaadho guusha maaliyadeed iyadoo la beddelayo qaabka fikirkaaga iyo barashada mabaadi'da maaliyadeed ee aasaasiga ah. Fikradda buuggu waxa ay ku wareegaysaa farqiga u dhexeeya waxbarashada maaliyadeed ee carruurtu ka helaan waalidkood, iyo siday u kala duwantahay waxana uu ku sawirayaa laba aabbo oo kala ah "aabbo taajir ah" oo ilmihiisa Bara sirta hantida iyo maamulka lacagta, iyo "aabbo sabool ah" oo isku halleeya. Xagga waxbarashada dhaqanka iyo shaqada xasilloon. Buugga "Aabbe hodan ah iyo aabbo sabool ah" ayaa loo turjumay luuqado badan oo adduunka ah, oo ay ku jiraan Ingiriisi, Isbaanish, Faransiis, Carabi, Soomaali iyo kuwo kale. buuggani waxa lagu tiriyaa mid ka mid ah buugaagta ugu muhiimsan dhinaca dhiirrigelinta, horumarinta shakhsi ahaaneed ee dhaqaalaha.

Aabbe Hodan ah, Aabbe Sabool ah, kaas oo uu ku fududeeyay sawirro iyo muuqaallo kaa caawinaya fahanka hantidu iyo dhaqdhaqaaqiisa, iyo fahanka xisaabtanka. Waxa aynanu soo aroorin doonnaa xogtiisii innaga oo isbeddel togan ku samayn doonna qaab-dhigaalkiisa.

Fahanka aasaaska xisaabtanka qaabkeeda fudud iyada oo la adeegsanayo sawirro iyo dhigaallo, waxa ay fududaynaysaa in si sahlan loo koobo xogta ku saabsan maaraynta dhaqaalaha, taas oo sababaysa kobcinta iyo samaynta hantida.

Inta aynaan soo aroorin sawirrada iyo dhigaallada, waxa aynnu soo bandhigi doonnaa wax ka mid ah seeska iyo fahanka qeexitaannada xisaabtanka, sida la isula yaqaanno aqoonyahanka dhexdooda.

Waa Maxay Xisaabtanku?

Xisaabta maaliyadeed waa aragtiyo cilmi ah oo isla yaqaanno, taas oo maamusha qaabsocodka lacagta, qaybqaybinta, iyo falanqaynta lagu samaynayo dhaqdhaqaaq ganacsi, adeeg ama waxsoosaar kale, iyada oo danta laga leeyahayna ay tahay si loo garto dhaqdhaqaaqa lacagta muddo tilmaaman.Waxa jira ujeeddooyin iyo laamo kala duwan oo uu leeyahay xisaabtanku oo loogu noqon karo buugaagta iyo meelaha u gaarka ah ciddii danaynaysa aqoon faahfaasani, waxa aynnu se halkan ku gaabsanaynaa waxyaabaha akhristaha ka khuseeya ee uu fahmi karo, isla markaana ay muhiimka u tahay in uu fahmo qof kastaaba si uu u go'aamin karo maarayntiisa maaliyadeed, taas oo saamayn taban ku reebaysa mustaqbalkiisa maaliyadeed.

- Waa maxay Raasamaal (Assets)?

Raasamaal: waa wax kasta oo qof ama shirkadi ay leedahay oo ah ilo dhaqaale oo qiimo iyo waxtar leh.

- Waa maxay Gashi (Liabilities)?

Waa kharashaad iyo gunnooyin qofka saaran oo laga doonayo in uu bixiyo oo cid kale uu siiyo iyada oo ka dhalanaysa alaab ama adeeg uu qaatay qofka ama shirkaddu.

- Waa maxay Dakhli (Income)?

Waa xog caddayn ah oo sheegaysa qaddarka iyo ilaha dhaqaale ee qofka ama shirkaddu ay haysato waqtigaa.

- Waa maxay Kharashaad (Expenses)?

Waa culaysyada dhaqaale ee uu xanbaarayo qofka ama shirkaddu, iyada oo lagu bixinayo baahiyaha aasaasiga ah ee loo baahan yahay.

Marka aynu dhinac uga baydhno waxa uu koobsanayo cilmiga xisaabaadka ee culayskiisa lihi, oo ay ka jibbokeeni karaan keliya dadka aqoonta u lihi, waxa jira si fudud oo loo soo bandhigi karo qaabka ay dadku ula soconayaan hantidoodu, taas oo ku caawinaysa in ay sidaa ku galaan naadiga hodanka. Si loo gaadho fudaydinta xisaabtanka iyo gaadhsiinta maanka akhristaha, qaab fududna la isula jaanqaadi karo, waxa aynnu u soo bandhigi doonnaa qaab sawirro iyo dhigaallo ah.

Waxa gacantayda ku soo dhacay muddo ku dhow shan sano buugga qiimaha badan ee Aabbe Hodan ah Aabbe Sabool ah nuqulkiisa Ingiriisiga ah, markii danbena ay maktabadda Jariir u tarjuntay afka Carabiga,

waana aan u mahad naqayaa qoladaa soo turjuntay buuggaas oo raad weyn ku reebaya cidda danaynaysa in ay wax ka barato arrimaha dhaqaaluha. Buuggaasi waxa uu isbeddel aad u weyn ku sameeyay qorshaynta noloshayda maaliyadeed, gaar ahaan markii aan ku kabay casharrada ku saabsan (guusha hal sano gudohood), oo aan ka qaatay aqoonyahanka reer- Maraykan ee Jim Rohn.

Xogta labadaa aqoonyahan aan ka faa'iiday iyo wixii danbe ee aan jaantusyada ku sheegi doono ayaana sees u ahaa buuggan. Qorshaynta qaab nololeedka la naawilayo iyada oo loo marayo waddooyin hore loo asteeyay, laguna ladhay fahanka afka xisaabtanka waxa ay sees u tahay halkii looga dhaqaaqi lahaa hodantinimada ee laga gali lahaa

albaabka madaxbanaanida maaliyadeed. Saboolka iyo qofka hodanka ah waxyaabaha kala sooca waxa ka mid ah, sida ay u fahansan yihiin in ay xisaabtamaan oo ay ku kala duwan yihiin:

Hantida ay samaynayaan maxay ku bixinayaan?

Intee in le'eg bayna bixinayaan?

Arrintaas go'aankeedu waa mid adiga oo keliya kuu taallaa. In badan waxa aad maqlaysaa dadka oo leh: "in badan ayaan soo shaqaynayay noloshayda, haddana waxa aan u baahanahay caawimo!"

Halkii ay ahayd in ay yidhaahdaan: "in badan ayaan soo shaqaynayay noloshayda, haddana waxa aan awood u leeyahay in aan wax caawiyo. Haddaba; si aad uga fogaato in aad noqoto kuwa shaqeeya in badan oo noloshooda ka mid ah, isla markaana u baahnaanaya caawimo, waa in aad horumarisaa aqoontaada maaliyadeed.

Maxay ku Kala Duwan Yihiin Raasamaal (Assets) iyo Gashi (Liabilities)?

Aniga oo ka dhinbiil qaadanaya cinwaankan su'aasha ah, maxay ku kala duwan yihiin raasamaal iyo gashi? Waxa ay i xasuusisay su'aashani qisada saaxiib aan wada shaqayn jirnay oo ay u hoseedday dhibaatooyin dhaqaale oo culculus xog-la'aanta ka haysata maaliyaddu, dhinacyo badan oo noloshiisa ka mid ahna ku reebtay saamayn aan wanaagsanayn. Saaxiibkayga magiciisu waa Sayd. Waxa uu haystaa shahaado jaamacadeed oo injineernimo ah, weliba waxa uu ka soo baxay mid ka mid ah jaamacadaha ugu tayada sarreeya Sucuudiga.

Shirkada aannu ka wada shaqaynaynay waxa ay lahayd barnaamij deyn-bixin ah, si qofka shaqaalaha ahi uu u heli karo dhul, guri, iwm. Saaxiibkay waxa uu dalbaday deyntii, waana loo oggolaaday waana uu qaatay, isla markiiba waxa uu bilaabay dhismaha guriga isaga oo aan ka warqabin, waxna aan iska weydiin lacagta uu haystaa inta ay le'eg tahay.

Sidoo kale guriga uu doonayaa waa noocma?

Kharashka ku baxayaa se waa imisa?

Saxiibkay markii uu fuliyay 75% dhismaha guriga ayay lacagtii ka go'day, mana hayo dhaqaale kale oo uu ku dhammaystiro dhismaha guriga. Feker dheer dabadeed waxa uu go'aansaday in uu deyn kale u doonto bangi si uu u dhammaystiro gurigii, bangigiina waxa uu ka soo qaatay deyntii isaga oo ku reebay mushaharkiisii qayb ka mid ah in uu bangigu

deyn ahaan u qaato. Mushaharkiisii waxa uu ku soo uruuray inay kala qaybsadaan shirkaddii uu ka shaqaynayay iyo bangigii, biil ahaanna waxa ugu soo hadhay wax aad uyar oo aan ku filnayn. Fikir dabadii haddana saaxiibkay waxa uu go'aansaday in uu codsi kale u gudbiyo maamulaha shirkadda, codsigaas oo ah in la siiyo beddel shaqada ah oo loo diro meelaha ka nolol jaban magaaladiisa si uu gurigiisana u kireeyo, reerkiisana uu ugu diro xaafadddoodii, si uu nafis dhaqaale halkaa uga helo, tiina wuu oggolaaday maamulihii shirkaddu, ka dib markii uu ku qancay culayska iyo dhibka haysta saaxiibkay.

Waxa ka soo wareegtay intii la beddelay muddo laba bilood ah, ka dib ayuu dib ugu soo noqday isaga oo ooyaya, ilmadana iska tiraya, kana codsanaya maamulihii mar kale in uu halkiisii ku soo celiyo, waayo; qorshihii uu isku beegtay ayaa fashilmay.

Markii uu weydiiyay maamulihii shirkaddu waxa ku dhacay waxa uu ugu jawaabay: "Mudane: qorshihii aan dhigay ayaa iga fashilmay, oo xaaskaygii ayaa diidday in ay xaafaddoodii tagto, gurigii ayaana ay iska sii degganayd, aniguna halkii aan islahaa wax ayaa kaa kala fududaanaya, waxaba igu soo baxay laba biil, mid ii gaar ah aniga, iyo kii qoyska, taasina waxa ay igu keentay culays kale iyo in aan ku dhawaado iskubuuq!" Qisadaa ku dhacday saaxiibkay aan kaa weydiiyo dhawr su'aalood:

- Waxa ku dhacay Sayid ma isaga oo keliya ayay ku kooban tahay?
- Waa maxay sababta keentay waxa dhacay?
- Intaas oo dhanba waxa ka sii muhiimsan, sidee la isaga ilaalin karaa taas oo kale?

Waddada ugu habboon ee lagaga gaashaaman karo waxa ku dhacay Sayd, sidoo kalena, loogu noolaan karo nolol habboon, waa in aad fahanto, aqoonna aad u yeelato maamulka iyo maaraynta maaliyadda, si aad ugu socon karto qorshe hagaagsan.

Saaxiibkay Sayd waxa uu u malaynayay in uu guri yeeshaa in ay tahay hanti, waana sida dad badani ay u fekeraan, laakiin guri ma uu hantiyin e, waxa uu hantinayay deyn culays badan, si fududna aan ku dhammaanayn.

Dadka badankoodu waxa ay cuskadaan oo ay isku halleeyaan mushaharkooda ay qaataan weliba meel keliya oo wax kastaa ay ka iman karaan, iyaga oo aan isku dhibayn in ay sameeyaan ilo dhaqaale oo kale, iyaga oo aan kaba tagin shaqadooda rasmiga ah, isku hallaynta mushaharkuna waxa ay dhaxalsiisaa in aanay lahayn door kale oo aan ka ahayn in ay isku dhejiyaan shaqada, addoomana ay u ahaadaan mushaharka.

Nolol kasta oo adag oo uu qofku duldhigo naftiisa marka uu waayo meel kale oo uu baxo, aan ka ahayn shaqada uu ka qaato mushaharka, waa mid laga aqbali karo dadka qaar oo aan fursad u helin in ay waxbartaan, ama ay helaan xog ka maqan, laakiin adiga oo ay suuragal kuu tahay in aad siyaabo badan wax u barato, noloshaadana aad u beddesho, waa wax aan la aqbali karin, nusqaanna kugu ah.

In yar ka fikir oo jawaab waafi ah u hel weydiimahan:

Maxaad samayn lahayd haddii maanta lagaa jaro mushaharka aad qaadato, ama aanad lahayn ilo kale oo dhaqaale?

Wax fog ma aha in lagaa jaro mushaharka isla maantaba, sabab iyo sabab-la'aanba, sidee ayay u ekaanaysaa noloshaadu, dhaqaala-burburkii dunida ka dhacay sannadkii 2008dii, siina baahay 2009kii, waxa uu meesha ka saaray shaqooyin aad u badan, waxana ku shaqo beelay kumannaan dad ah oo soo oodmay.

Arrintani miyaanay xujo kuugu filnaan karin inaan la isku hallayn karin mushahar keliya? [5]

Dadku badanaaba waxa ay isku halleeyaan mushaharka soo gala, waxana dhacda sidoo kale in uu qofku hawlgabo sababo badan awadood, isaga oo aan filayn, maalin keliyana u fikirin qorshaha hawlgabkiisa iyo haddiiba uu shaqadan ka tago, hantina ma haysto, cimrigiina waa gabaabsi, xooggiina wuu gudhay, ka dibna waxa xaal uu iska noqdaa maahmaahda tidhaahda: kitaab galkiisa loo diiday sayax allaa baday.

Cilmi-baadhis lagu baahiyay dalka Maraykanka [6] ayaa tibaaxaysa in dadku ay u qaybsamaan marka laga eego sida ay dakhli iyo hanti u sameeyaan qaybahan soo socda:

- 96% muwaadiniinta ahi waxa ay 3% ka helaan wax soosaarka guud ee dalka.
- 3% muwaadiniinta ahi waxa ay 96% ka helaan wax soosaarka guud ee dalka.
- 1% muwaadiniinta ahi waxa uu 1% ka helaa wax soosaarka guud ee dalka.

[5] Sidoo kale; waxa aan inaga fogayn oo aan xasuustaada dib ugu celinayaa wixii dhacay bishii febraayo 2020kii, in uu dunida mar keliya ku baahay cudurkii dad badan sahayday ee COVID19, sababayna in la xidho socdaallada, waxbarashada, ganacsiga i.w.m, oo nolosha dad badanina ay cidhiidhi gashay markii shaqooyinkii joogsadeen.

(6) Qoraagu waxa uu u celiyay tixraac ahaan casharo uu bixiyay Mr Jim Rohn

Si aynnu fahanka u soo dhaweynno, waxa aynnu ka soo qaadaynaa in dadka Maraykanka ahi ay yihiin 100 qof oo keliya, waxsoosaarka guud ee dalkuna uu yahay $100 milyan, cilmibaadhistan micneheedu waxa aynoqonaysaa markaa, in:

- 96 qof ay helaan $3 milyan oo keliya, midkiibana ay ku soo hagaagayso $31,250 oo keliya.
- 3 qofna ay helaan $96 milyan, halka qofna waxa ku soo hagaagaya $32 milyan oo keliya.
- Halkii qofna uu helayo $1 milyan oo keliya.

Maxaa sababay qaab qaybsigaa qalloocan ee aan cadaalada ku dhisnayn?

Miyaanad isweydiinayn su'aalo dhawr ah oo ay ka mid yihiin:

Tolow; maxay ku kala muteen saamiga noocaas ah?

Maxay se tahay tilmaamaha qolo kasta oo dadkaa ka mid ahi ay leeyihiin?

Kooxda hore 96% oo muwaadiniinta ahi waa shaqaalaha u xaadira bishii mushahar go'an oo ay ka helaan meel cayiman oo ay ka shaqeeyaan, dhammaantood waxa ay mushaharka u qaataan waxa uu isku noqdaa 3% wax soosaarka guud ee dalka! Waa masaakiin kuwaasi!

Kooxda kale ee 3% ah waa maalqabeenka waaweyn ee kala ah ganacsato, warshadley, maalgashadayaal, iwm, waxa aanay helaan 96% wax soosaarka guud ee dalka, kuwaas oo si gaar ah u samaystay bangalooyin berkado biyo ah leh, qaarkoodna waxaba ay jeexdeen webiyo lacag ah oo ku aroora akoonnada ay bangiyada ku leeyihiin

sannad kasta, bil kasta, iyo saacad kasta, lacagaha ay maalgashiga ku sameeyeenna way u soo burqanayaan marka ay hurdaan iyo marka ay soo jeedaanba, iyaga oo shaqaynaya iyo iyaga oo fasax kumaqan labadaba.

Kooxda saddexaad waa 1% muwaadiniinta ah, waxa ay helaan 1% ka mid ah wax soo saarka guud ee ay dalka, kuwaasina waxa ay helaan hanti badan, sida ay ubadan yihiinna waa dadka hantida dhaxal ku hela ama bakhtiyaanasiib i.w.m.

Kuwaas badankooduna inta ay hantidaa dhigaan bangiyada ayay ku noolaadaan wixii faa'iido ah ee ay samayso hantidaasi.

Waxa waajib ah in ay ku baraarugaan dadka ku jira xaaladdaa saddexaad in ay halis ugu jiraan in ay ka baaba'do hantidaa ay dhaxleen ama ay heleen, sababta oo ah; sida la iska garanayo. Wax kasta oo aan lagu keenin dedaal qofeed ma sii jiraan. [7]

Ka dib intii aad soo ogaatay qisadi saaxiibkay Sayd ee aad sidoo kale soo dhugatay kooxahan saddexda ah, waa maxay waddada aad ugu biiri karto kooxdii labaad ee ahayd 3% dadka ka mid ah oo hela 96% wax soo saarka guud ee dalka.


Haddii aad dib u noqoto oo aad falanqayso sooyaalkaagii waxbarasho, waxa aad ogaanaysaa in aanay hal maaddo oo aad soo baratay ku saabsanayn arrimaha maaliyada iyo dhaqaalahaaga gaarka ah,

(7) Sidaa darteed ayay Soomaalida ugu maahmaahdaa, nin iyo xoolihii ma kala hadhaan. Turjumaha.

dhammaan maadooyinka aad soo qaadan jirtay waxa ay ku barayeen sidii aad u noqon lahayd shaqaale wanaagsan oo kobciya 3% ka mid ah bulshada oo hela 96% ka mid ah wax soo saarka guud ee dalka.

Badi aabayaashu waxa ay ku dedaalayaan oo ay carruurtooda ka doonayaan in ay ku dedaalaan waxbarashada, si ay hadhow ay u helaan shaqo wanaagsan, aad iyo aad ayuu u yar yahay waalid ilmihiisa ku dhiirrigelinaya ama ku beeraya in uu wax uu isagu leeyahay samaysto mustaqbalka ka dib marka uu si fiican wax u barto. Aad ayay u kala duwan tahay in aad shaqaale u ahaato dad kale, iyo in adiga laguu shaqeeyaa. Si aad si fiican ugu fahanto siyaasadda hantida iyo xisaabtankaaga gaarka ah, waxa aan kula wadaagayaa sawirrada iyo dhigaalladan soo socda: Sawirka muujinaya xisaabtanka sida ugu fudud:

B: Isu-dheelitirnaanta dakhligaaga iyo kharashaadkaaga:



Sawirkan (1aad): waxa uu muujinayaa miisaan ina tusinaya dheellitirnaan ka dhexaysa dakhliga ku soo gala iyo kharashaadka kaa baxa. Si aad ugu noolaato nolosha saxda ah dhaqaale ahaan, waxa lagama-maarmaan ah in uu dakhligu ka sareeyo kharashaadka kaa baxaya, laakiin haddii ay

kharashaadku ka bataan dakhligaaga, tusaale ahaan; haddii ay ku soo gasho bishii $1000 dakhli ahaan, kharashaadka kugu baxaanna ay yihiin $1,100 waddadaa aad ku socoto waxa waajib kugu ah in aad ka istaagto oo aanad sii wadin, waxana kula gudboon in aad dib u qaabayso noloshaada, oo aad qaadato go'aamo deg-deg ah oo waxku'ool ah, si aad uga sarraysiiso miisaanka dhanka dakhliga, dhinaca kharashaadka kugu baxayana uu uga weynaado.

Sirtu ma aha dakhliga soo gelaya qofka in uu badan yahay ama uu yar yahay, ee sirtu waxa ay ku jirtaa qaabka la isugu maaraynayo dakhliga iyo kharashaadka, sida uu qofku wax uga kaydsanayo kaydka laftiisa, iyo sida uu uga shaqaysiinayo.

Si kale haddii aynnu u dhigno, waxa la odhan karaa, “cadooyinkaaga adeegsiga hantida ayaa ka muhiimsan xaddiga lacageed ee ku soo gala.

Weedhani waxa ay mudan tahay in far waa-weyn lagu qoro oo ay goor kasta iyo goob kastaba xaadir ku ahaato maskaxdaada oo aad la noolaato noloshaada caadiga ah.

Kaalay aan wada eegno hadalkii uu yidhi madaxwynihii Maraykanka ee Abraham Lincoln oo la garanayo kaalinta iyo saamaynta uu ku lahaa dhaqaalaha dalkiisa, isaga oo ka hadlaya muhiimadda ay leedahay wax kaydsiga iyo in laga fogaado deynta ayuu yidhi:

- "Suuragal ma aha in aad barwaaqaysato haddii aad iska siibto dareenka kaydsiga.
- Suuragal ma aha in ammaan dhaqaale aad ka hesho deymaha.
- Mushkiladaha ma kala hadhaysaan mar kasta oo aad dhaafto dakhligaaga.

"Haddii uu qofku haleelo muhiimadda ay leedahay maamulka iyo maaraynta dhaqaalihiisa iyo ka fogaanshaha deymaha, waxna ay u soo hadhaan, waxa aan iyaduna ka muhiimad yarayn in uu hantidaa u dhigmay ka shaqaysiiyo, waayo; hanti ayaa hanti dhasha, sidaas ayayna isu dhashaa hantidu. Si aan maankaaga ugu sugo muhiimadda ay leedahay maaraynta maaliyaddaada gaarka ahi, kaalay aan kaaga waramo qof la yidhaahdo Mudane Axmed.

Aan ku weydiiyo kolka u horaysaba'e, maxaad ka filanaysaa nolosha Axmed ka dib marka aad ogaato:

Axmed waxa uu shahaado injineernimo ah ka haystaa mid ka mid ah jaamacadaha ugu heerka sarreeya Sucuudiga, waxa uuna ka shaqeeyaa mid ka mid ah shirkadaha ugu wanaagsan dalkaas. Wuu dallacay illaa uu ka mid noqday maamulka shirkadda.

Waxa ka daran intaas oo dhanba, in uu qaato mushahar aad u badan iyo gunnooyin heer sare ah sannadkiiba. Waxa uu ku qasbanaaday Axmed in uu iskaga tago shaqadii saddex sano ka hor da'dii hawlgabka oo ah 60 sano, waxana uu sidoo kale xaq ahaan u helayaa Axmed lacag aad u badan oo lagu qiyaasay shan milyan oo Riyaal oo loo geynayo mushaharka ay qaataan dadka hawlgabka ahi.

Sidoo kale; waxa ay wax ka soo gelayaan shirkadihii caysmiska ahaa ee qaabilsanaa caymiska hawlgabka.

Waxaas oo dhan marka la isku soo duubo, waxa shaki-la'aan ah in aad filanayso in uu Axmed ku nool yahay nolol barwaaqo ah oo nimco nimco ku sugayan. Laakiin xaqiiqadu sidaa waa ka duwan tahay gebi ahaanba! Axmed waxa uu dhex dabbaalanayaa badweyn oo deymo ah, iskamana bixin karo deymaha bangiyada iyo baabuurta wakaaladda ah ee uu qaatay.

Axmed waxa uu ku nool yahay waxa la yidhaahdo "deyn deyn ku debber" oo ah xaaladaha ugu adag ee aadka la isaga ilaaliyo dhaqaale ahaan.

Wacnaan lahaydaa haddii ay intaas uun tahay, ee Mudane Axmed waxa uu la xidhiidhaa hadba mid saaxiibadii iyo qaraabadiisa ah isaga oo ka dalbanaya kaalmo, taas oo ay ku tiirsan tahay noloshiisa badankeedu bil walba. Maxaad u malaynaysaa in ay sababtay arrintan?

Sababtu, waa arrimaha aan hore u soo tilmaanay oo ah in caadooyinka maaliyadeed ay ka muhiimsan yihiin xaddiga hantida aad haysato. Innaga oo ka dhinbiil qaadanayna tusaalahan, dad badan waxa soo gala dakhli badan, haddana waa caydh, ama wax aan dhaamin, waayo;

go'aamadooda maaliyadeed ayay ku dhiseen aragti dhow, halkii ay eegi lahaayeen qorshaha fog, taasina waxa ay ka dhalatay maqnaashaha fahanka maaraynta dhaqaalaha shakhsiga ah, waxana ay ka duulayaan halhayska ah "waxa aad cuni karaysaba cun ka wax bixiyaa waa Ilaahaye!" Nolosha kama laha wax qorshe maaliyadeed oo cad oo u muuqda iyo odoros dhanka maaliyadda ah.

Waxa uu ku yidhi Mr. Harv Eker buuggiisa "Secrets of the millionaire mind": "waxa keliya ee ay ku kala gaddisan yihiin guusha maaliyadda qofka iyo guuldarradeedu, waa hab-maamulka qofku uu u maamulo qaab saxan.

Way fududdahay si aad u maamuli karto hantidaada, oo waa in aad garato sida aad u kala maaraynayso hantida.

"In badan oo dadka ka mid ahi waxa ay yidhaadaan, "maba haysto lacag badan oo aan maamulo" laakiin dadkaasi waxa aanay ogayn maamulka iyo maarayntu inay ka bilaabantaba bilawga iyo Shilinka ugu horreeya ee ku soo gala, waxa sidoo kale aanay dhaaddanayn xaqiiqada odhanaysa: "marka aad ku bilawdo hantidaada aadka u yar maamul wanaagsan, markaas ayaad helaysaa hanti badan."

Hadalka ah: "marka aan hanti badan helo ayaan maamuli doonaa" waxa ay u eg tahay qof aad u cayilan oo leh, "marka aan caatoobo ayaan isa sii caatayn doonaa!" Xaqiiqadu waxa ay tahay, in ay waajib tahay in lagu bilaabo maaraynta hantida Shilinka u horreeya ee ina soo gala, ka dib ayay imanaysaa hanti badan oo la maamulaa. Isu-dheellitirka raasa-maalka, gashiga iyo kharashaadka:



Sawirkan labaad waxa aynnu ku baranaynaa halbeegga raasamaalka iyo gashiga.

Raasamaal: waa wax kasta oo uu qofku haysto oo ilo dhaqaale ah, taas oo leh qiimo la taaban karo ama mid aan la taaban karin labadaba.


Gashi: waxa looga jeedaa wax kasta oo xuquuq maaliyadeed oo lagugu leeyahay ah oo ah xuquuq lagaaga yeeshay alaab ama adeeg aad qaadato.

Xidhiidhka ka dhexeeya raasa-maalka iyo dakhligaaga joogtada ah ee ku soo gala, iyo xidhiidhka ka dhexeeya gashiga lagugu yeesho iyo kharashaadka joogtada ahi, Waa asaI weyn oo ay waajib tahay in la fahmaa. Sidaa darteed ayaynnu innaga oo si fudud u sheegaynna leenahay:

Raasamaalku, waa waxa ka soo dhex baxa dakhligaaga joogtada ah. Waa sida gacan lacag ah oo waraabinaysa akoonkaaga bangiga.

Gashi: waa wax kasta oo jeebkaaga ka saaraya hantidaada, kuna danbaynaya in uu dhammeeyo raasamaalkaaga.

Jaantus muujinaya ku-milanka raasamaalku uu ku milmo dakhliga joogtada ah, gashiguna uu ku milmo kharashaadka joogtada ah:



Jaantuska (4aad)

Jaantuskan kor ku xusani waxa uu muujinayaa in waxyaabaha ugu muhiimsan ee raasamaalka ka dhashaa ay yihiin dakhligaaga oo kobca, mar kasta oo dakhligu uu ka bato waxa baxayana, dakhligu wuu ururayaa, waxa uuna isu beddelayaa raasamaal.

Marka aad doonayso in aad hanti samayso, dakhliga kobci una rog raasamaal sida ganacsi shaqaynaya ama maguurto, saami i.w.m.

Akhrinta buugta ama barashada casharro maaraynta ku saabsani waa arrin aad u muhim ah, lakiin kaagama fillaanayso in aad u soo dhaadhacdo suuqa shaqada aad isku daydo in aad ficil u rogto wixii aad baratay, waana waddada ay mareen dhammaan dadka hanti-sameeyayaasha ah.

Tartanka Jiirka

Tartanka jirku waa eraybixin lagu muujinayo "dedaalka ay bixiyaan qof ama kooxi ee aan xaqiijinayn wax raad ah oo la taaban karo." Dedaalka ay bixinayaan uma beddelayo xaaladda ay ku jiraan mid ka wanaagsan, dhammaantoodna waxa ay ku jirayaan dedaal iska daba wareegaya oo isagu dib isu cunaya, sida jiirka dabinka galaa uu u wareego dabinka dhexdiisa, waana sida ay u nool yihiin dadka badankoodu.

Sidii hore aynnu u soo marnay dhacdadii Sayd, haddana waxa aynu dul istaagaynaa dhacdo kale oo ku saabsan nin la yidhaahdo Cammaar. Cammaar waxa uu haystaa shahaado injineernimo ah, waxana uu ka shaqeeyaa shirkad leh mushahar fiican iyo weliba qorshayaal kale oo ay wax ku siiso shaqaaleheeda.

Markii ugu horreysay ee uu Cammaar shaqada helayba waxa uu soo qaatay gaadhi deyn ah oo bil walba qaab hafto ah uu u bixiyo, waxana laga goosanayay mushaharkiisa. Sidoo kale; waxa uu maagganaa Cammaar in uu guursado. Muddo markii uu shaqaynayay wuu guursaday, waxana ay degeen guri kiro ah.

Shirkaddii uu ka shaqaynayay waxa ay soo bandhigtay barnaamij lagu helayo guryo. Sidaa darteed ayay Cammaar iyo xaaskiisii u go'aansadeen in ay dhistaan gurigii ay ku riyoonayeen. Waxa ay bilawday xaaskiisii in ay talada guriga lagu dhisayo qaybteeda ku darsato, waxana ay tidhi "gurigu waa in aanu ka yaraan oo aanu ka liidan guriga saaxiibadday heblaayo." Camaarna wuu ka yeelay, waxana ay dhiseen guri aad

uga tan badan dakhligooda qoys ahaaneed oo ku kaliftay in uu bangi ka soo qaato deyn, waxana uu Cammaar illawsanaa markaa maahmaahda tidhaahda: “deyntu waxa ay ooddaa albaabka arsaaqda.”

Lamaanihi isqabay waxa ay u guureen gurigoodii cusbaa, waxana isla markiiba ku soo bannaanaatay gogoshii iyo agabkii kale ee guriga cusubi uu u baahnaa, waxana ay mar kale qaateen deyn hor leh.

Xoogaa ka dib wuu kordhay mushaharkii Cammaar, laakiin waxa garab socday biilasha oo iyaguna kordhayay, waxana ku dhaboobay xeerka uu leeyahay Isaac Barrow[8] ee odhanayay: "mar kasta oo mushaharku uu kordho waxa la kordha kharashaadka biilasha.

"Way sii socotay xaaladdaa Cammaar ee indho la'aanta ahi, waxana uu marka muddo la joogaba deyn ku qaataa gaadhi cusub. Sidoo kale waxa uu deymo u galaa safarro dalxiis illaa uu goor danbe is'arkay isaga oo ku jira dabin la mid ah midka jiirka oo uu dhex wareegayo sida jiirku uu u dhex wareego dabinka, isaguna waxa uu dhex wareegayay mushaharkiisa oo ah isha dakhli ee keliya ee uu leeyahay, iyo deymaha hadba uu is dulrasaynayo.

[8] "(Isaac Newton)" Isxaaq nuyuutan (1643 - 1727) waxa uu ahaa aqoonyahan fisiigiska iyo xisaabaha ku xeel dheer, oo loo yaqaanay mid ka mid ah saynisyahannada ugu waaweyn taariikhda dunida, Waxyaabihii uu ku caan baxayna waxaa ka mid ahaa horumarinta aragtida caanka ah ee cuf-isjiidadka iyo daah-furka sharciyada dhaqdhaqaaqa jirka, marka laga soo tago kobcinta xisaabinta, si faahfaahsan waxa aad uga eegi kartaa.

1- "Isaac Newton" - The Royal Society, https://royalsociety.org/topics-policy/diversity-in-science/isaacnewton.
2- Westfall, Richard S. "Never at Rest: A Biography of Isaac Newton. "Cambridge University Press, 1980.

Cammaar kama duwana xaaladda in badan oo dadka ka mid ahi ay ku sugan yihiin ee feker iyo qorshe la'aanta ah. Waxa ay tilmaantay cilmibaadhisi in 2% ay fekeraan inta aanay hadal ka hor ama aanay wax qaban, halka 3% dadka ka mid ahi ay fekeraan, 95% aanay xataa fekerin. Haddiiba aad maqasho ama aad aragto waxa ay samaynayaan waxa aad ogaanaysaa hadii qofkaasi in yar uu fekeri lahaa in aanu yidhaahdeen waxa uu ku hadlayo, ama aannu faleen waxa uu hadda falayo.

"Haleelitaanka xoogaa mushahar ah ama lacag aad xilli heshaa ma furfuri karto dhibaatooyinka kugu xeeran ee qof iyo qoys ahaaneed, mushkiladahaaga dhaqaale waxa xallin karaya kasbashada aqoonta maaliyadeed iyo la-noolaanshaha fulineed ee soo noqnoqonaya. Sidaa darteed ayaan aad iyo aad ugu celcelinayaa muhiimadda ay leedahay yeelashada aqoon iyo fahan dhaqan-dhaqaale.

Si kale haddii aan idhaahdana, in aad qof ahaantaada isu dhisto aqoon ahaan, waayo; waxa la og yahay furaha horumarka dhinac waliba in uu ka yimaaddo marka uu qofku isagu ku horumaro degaanka uu ka shaqaynayo.

Dad badani waxa ay ku celceliyaan hadallo mahadho ah oo la kala dhaxlay iyada oo aan loo fiirsan dhibka ay ku leeyihiin qofka wax-qabsigiisa iyo sida ay u naafaynayaan, marar badanna aan sax ahayn, hadiiba ay sax yihiinna loo adeegsaday sidii ay ku saxnaayeen si aan ahayn. Waa hadallo badanaa dadku ay isku illawsiiyaan canaanta damiirkoodu uu canaananayo marka ay ka gaabiyaan dedaalkii la gudboonaa, sida: "hodantinimo waa ta nafta!", "Waxa aad hayso bixi wixii maqan ayaa iman'e!" "Lacagtu waa wasakh!" I.w.m.

Dadka sidaa lihi haddana dhammaantood waxa ay wada doonayaan in ay helaan guri wanaagsan, qaarkoodna waxaba ay ku darayaan gaadhi wanaagsan iyo xafiis qaboojiye leh, kumana fikirayaan inay nafta dhibaan, ee waxna ay isku dayaan.

Waxa ay ku fikirayaan in mushaharkoodu uu intaa ugu filnaan karo, wixii kale ee ay qabsan lahayeenna waxa ay nafta ku illawsiinayaan hadalladaa aanay saxnayn qaabka loo adeegsanayo, haddii xataa ay macne ahaan u saxan yihiin,

taasina waa natiijada ay soo saarteen manhajyada dugsiyada gaarka loo leeyahay ee ganacsiga ahi, iska dhaaf kuwa guud ee dawladdu ay leedahaye, kuwaas oo aan maalin keliya ardaygooda baraynin sidee ayuu u shaqaystaa?

Sidee ayuu u maareeyaa dhaqaalihiisa? I.w.m.

Helitaanka shaqo aamin ah oo mushahar fiican lihi, waa waxa ay ku haminayaan dhammaan dhallinyarada casrigani, iyada oo la soo dhaafay casrigii wershadaha iyo beeruhu saamaynta u xooggan dunida lahaayeen oo hadda loo gudbay casriga xogta iyo teknoolajiyadda, haddana caqliga dhallinyarada qarnigani waxa uu sii nool yahay qarnigii tegay iyo kii ka sii horreeyay, kaas oo ay hoggaaminaysay aragtida ah in aad waqtigaaga ku iibiso mushaharkaaga, oo aanay qofka meelna uga bannaanayn in uu isku dayo hal abuur iyo waxqabsi madax bannaan.

Hadda se waa in aad dhugataa oo aad fahantaa in aynnu joogno casrigii xogta iyo hal'abuurka, oo ay suuragal u tahay qof kasta ee hal'abuur wanaagsan la yimaadda, una dhabar-adayggaa in uu ku helayo hanti wanaagsan, waxana daliil iyo xujo kuugu filan, in aad eegto

hareerahaaga, meel kasta oo aad caalamka kaga nooshahay waxa aad arkaysaa dhallinyaro horumar ballaadhan ka samaynaya dhinacyada kala duwan ee nolosha, waqtigan ay nool yihiinna ku caawiyay in ay ku tartamaan hal'abuurka fikirka tolmoon iyo aqoonta, kumana ay gaabsan keliya in ay ku tartamaan helidda lacag keliya. Haddii uu qofku horumaro siyaabo badan ayuu ku heli karaa lacag iyo dakhli wanaagsan, muhiimadduna waxa weeye:

Qofku ma dhisan yahay aqoon ahaan?

Muxuu se ka dhisan yahay?

Waxa aad u kala duwan marka aad garoonka u soo gelayso in aad guuleysato iyo marka aad u soo gelayso garoonka keliya in aan lagaa badin. Marka aad u soo gelayso in aad guuleysato, waxa badanaya dhaqdhaqaaqaaga, fikirkaaga, isku-daygaaga, iyo ujeeddada sare ee aad u ordayso oo mudan in loo daalo.

Sidaa darteed; dedaalkaagu waxa uu noqonayaa labajibbaar ama ka badan, taas beddelkeeda, marka aad halganka u gelayso in aan lagaa badin, keliya waxa ku gelaya is-xakamayn, is'ilaalin, iyo welwel aad ka qabto in aad tallaababa hore u qaaddo.

Sidaa darteed ayuu dareenka shaqo aamin ahi u noqday hammiga guud ee bulshadu ay ku wada hamiyayso. Waxa aynnu aragnay weriye caan ah oo wargeys maalinle ah ku qoray:

"qofka ka shaqeeya shirkadda Aramco, waxa uu meel ugu tiiriyay naftiisa iyo qoyskiisaba nolol wanaagsan." Hadalka noocan oo kale ahi wax lala yaabo ma aha marka aad dhex joogto bulsho ay hoggaaminayso fikradda ah shaqo iyo mushahar aamin ahi. Marka aan sidaa ku leeyahay, waan

ogahay waxa aan ku hadlayo wax aamin ahi ma jiraan, raalli ahaanshaha Ilaahay aad ku guuleysato mooyaane. Muwaadin kastaaba waxa uu ku fikirayaa inay dawladdu waxbarto, ka dib shaqo ay u diyaariso, marka uu hawlgabana ay u qorshayso xaqii hawlgabka, noloshiisa oo dhanna uu la-hayste u noqdo fikraddaa dulinka ah iyo in uu cid kale ku dulnoolaado,

xataa haddii uu la kulmo fikrad ka xoraynaysa in uu cid kale ku dultiirsanaado, isla markiiba waxa ku soo maaxanaya fikradihii yaraantii bulshadiisu ay ku shubtay oo aan gali karin dood iyo wax-isweydiin, sida in noloshiisu ay ku xidhan tahay mushaharkiisa,

mushaharkiisuna uu ku xidhan yahay hadba waqtiga uu bixiyo, noloshiisuna in aanay dhaafi karin inta mushaharkiisu uu yahay, rejada keliya ee uu qabaana ay tahay in maamulka shaqada uga sarreeyaa ay dallacsiiyaan ama mushaharka loo kordhiyo, inta uu taas ka helayana nolosha uu iskaga wato deymo iyo isku- dabar.

Tolow; muxuu khasaarayaa haddii uu naftiisa u oggolaado keliya in ay ka fikirto sidee ayaad ku heli kartaa noloshan nolol ka duwan?!

Dhammaan waxaas aynnu soo xusnay waxa ay ka dhigeen qofka in uu ahaado mid ku xukuman u-hoggaansamidda waxa hareerihiisa ka socda,

halkii ay ka ahaan lahayd noloshiisu mid ku tiirsan waxa ka soo burqanaya dareenkiisa oo uu ku qaabeeyay maskaxdiisa, kuna socota qorshe uu naftiisa hore ugu dejiyay. Dhammaan mushkiladahan kala dhalanaya ee midiba ay mid dhashay waxa ay u noqonayaan aqoon la'aanta qofka ka haysata fahanka dhaqan-dhaqaalaha,

kalsooni-darrada, iyo ku-dayashada xaynta hareero joogta. Qof ahaantaada waxa kuugu waajib ah in aad qorshe u yeelato sidii aad u fahmi lahayd dhaqan-dhaqaalahaaga gaarka ah oo aanad uga tagin qorshahaaga hadba nasiib halka uu ku dhigo.

Mushahar Keliya

Mushahar keliya marka aad ku tiirsan tahay waxa aad ku sugan tahay halis dhaqaale, waxana kugu baxaya dawan ama jalaskii digniinta oo ku leh "si kalena wax isugu day". Hadiiba mushaharkaa wax yari ay kaaga soo hadhaan dadka kuwooda ugu garaadka badani waxa ay ku fikiraan guri dhiso ama iibso, laakiin guriga Waxa ka horreeya in aad iskaga baxsato halista ku-tirsanaanta mushaharka keliya oo aad samayso ilo dhaqaale oo kale, haddii ay doonaan haba noqdaan kuwo yaryar'e.

Marka aynnu il dhaqaale ku eegno midkee horraynaya in aad guri dhisato iyo in aad samayso ilo dhaqaale oo kale, gurigu waa: gashi ee ma aha

raasamaal, taas oo ka duwan sida dadka badankoodu ay u fikiraan, laakiin in aad samayso il dhaqaale oo ay wax kaa soo galaan ayaa raasamaal rasmiya ah.

Tusaale ahaan; hadii aad iibsato gaadhi wax soo saar leh oo bishii uu ku soo galiyo dhaqaale, waa raasamaal. Guriga aad dhisato ee aad deggan tahay jeebkaaga ayuu dib wax uga saarayaa ee waxba kuma soo biriinayo, hadii aanu ahayn mid kiraysan ama shaqayanaya.

Bal u fiirso guriga aad dhisataa waxa uu si joogto ah kaaga doonayo:

- Bixinta deyntii aad ku dhistay haddiiba wax lagaaga lahaa.
- Sidoo kale; kharashka dayactirka hadba wixii xumaada.
- Biilasha joogtada ah sida: laydhka, biyaha, taleefanka, iwm.

- Kharashaadka nadaafadda, cashuurta, i.w.m.

Dhammaan waxaas oo dhammi waa gashi jeebkaaga wax ka saaraya, sidaa darteed ayaa guriga aan shaqaynayn ee aan wax soo saarka lahayn loogu tiriyaa gashi oo aanu u ahayn raasamaal.

Taas macneheedu ma ahan guriba ha dhisan, waxa se lagu tusayaa goorma ayay habboon tahay in aad guri dhisataa, waana marka aad samayso il ama laba ilood oo dhaqaale uu kaa soo galo oo ka baxsan mushaharka ama isha dhaqaale ee aadku tiirsan tahay.

Tusaalayaasha iyo aragtiyaha aynnu kuwadaagaynno buuggan mar walba waxa ay inoo caddaynayaan in aanay muhim ahayn lacagta ku soo gelaysaa inta ay le'eg tahay, laakiin mar walba muhiimaddu ay tahay sidee ayaad u maaraynaysaa waxa ku soo gala.

Waa in aad mar walba maanka ku haysaa in kasbashada caadada maaraynta dhaqaalahaagu ay tahay tallaabada ugu horraysa ee aad u qaadayso dhinaca madax-bannaanida dhaqaale. Aan kuu soo bandhigo laba xeer oo ka mid ah xeerarka hodan tinimada sida ku sugan buugga "Secrets of the millionaire mind" ee T. Harv Eker [(9)]

- Xeerka hodan tinimada ee koowaad:

Illaa aad awood u yeelanayso maamulka iyo maaraynta waxa aad hayso wax hanti ah oo kugu soo kordhayaa ma jiraan.

[(9)] Waa tababare u dhashay dalka Canada waxa uuna qoray buug uu u bixiyay (sirta maanka milyaneerka - 2005) kaas oo dib u qaabayn uu ugu samaynayo qaab u fekerka dadka ee dhinaca maaliyada isla markaana waxa uu raacinayaa tallaabooyin cad oo loo qaadi karo maskax dhaqaale samayn karta buuggu waxa uu yeeshay shacbiyad ballaadhan oo heer caalami ah waxa aana loo turjumay luuqado kala duwan.

- Xeerka hodan tinimada ee labaad:

Caadooyinkaaga la-dhaqanka hantida ayaa ka muhiimsan xaddiga aad helayso ee hanti ah.

Innaga oo ka duulaynna labadaa xeer waxa waajib ah in aynnu kasbanno caadooyin aynnu ku maaraynno waxa yar ee inna soo gala ka hor inta aynaan gaadhin hanti badan oo aynnu maaraynno.

Hantida aad maaraysay ka-shaqaysiintiisu (maalgashi) waa waxa uu dhiirrigeliyay Islaamku, wax ka mid ahna waynnu tilmaamaynaa.

Qaabka aad u Nooshahay iyo Madax-bannaani Dhaqaale

U fiirso qaabka aad u nooshahay:

Maqaal uu qoray aqoonyahanka cilmi nafsiga iyo tababaraha reer-Maraykan ee Brian Trasy ayuu ku xusay sidan soo socota: "heerka dareen ee aad ku xakamayn karto noloshaada ayaa si weyn u jaangooya raaxadaada maskaxeed iyo fayaqabka maankaaga, farxaddaada iyo dhexgalkaaga dadka intaba.

Qaabka aad u nooshahay waxa waajib kugu ah in aanad uga tagin dabaylaha iyo duruufta, si ay marba meel ugu tuuraan oo ay xukumaan dhacdooyinka kugu xeeran adiga oo aan wax dedaal, jihayn iyo qorshe ah ku yeelan waxa aad doonayso in aad ku sugnaato maalmaha soo socda. Noloshaadu haddii ay qorshahaaga weydo waxa ay iska noqonaysaa sidii warqad dhex sabbaynaysa mawjadaha hawada oo aan la garan karin halka ay ku dambeyn doonto.

Mar walba waa in aad ogaataa, haddii aad ku guuldarraysato in aad wax qorshayso, waxa aad qorshaysay fashilkaaga (if you fail to plan, you planned to fail) arrintaasina waa mid ay habboon tahay in aad sidaa u garato si aad uga digtoonaato in aad ku dhacdo.

Si aad u haleesho muhiimadda fikirka iyo qorshaha, kaalay aan kula wadaago sheekadan macnaha weyn leh, marka ay arrimahaagu u muuqdaan in ay ka badan yihiin mid aad maamusho oo ay 24ka saacadaood ee maalintu kugu filnaan waayaan, waxa aad xasuusan doontaa nolosha milyaneerka iyo jalxadda ama ashuunka tusaalaha soo socda:

Waxa uu soo horjoogsaday ardaydiisii macallinka falsafadda iyada oo ay hortiisa tuuran yihiin alaabo yaryari, inta aanu hadal kaleba bilaabin ayuu soo qaaday jalxad weyn, waxana uu ku guray kubbado yaryar oo uu ka buuxiyay,waxana uu ardaydii weydiiyay:

Ma buuxdaa jalxaddu mise wax ayaa ka bannaan?'

Waxa ay ugu jawaabeen: 'way buuxdaa.'

Haddana waxa uu soo qaaday quruurux yaryar oo uu ku shubay illaa ay kala dhex gashay kubbadihii, oo uu ka buuxiyay jalxaddii. Waxa uu weydiiyay ardaydii: wax ma ka bannaan yihiin jalxadda mise way buuxdaa?

Waxa ay ugu jawaabeen: 'way buuxdaa!'Haddana waxa uu soo qaaday ciid niis ah, markaasuu ku shubay isla jalxaddii illaa ay ciiddii kala dhex gashay meelihii ka bannaanaa kubbadaha iyo dhagaxaanta quruuruxa ah dhexdooda, ka dib waxa uu weydiiyay ardaydii: 'wax ma ka bannaan yihiin jalxadda mise way buuxdaa?

'Waxa ay isku waafaqeen markan in ay buuxdo, meel kale oo wax la mariyaana aanay jirin. Macallinkii se waxa uu soo qaaday laba koob oo biyo ah, oo uu ku afrogay jalxaddii illaa ay biyiihii si fiican u dhex galeen jalxaddii, markaasay ardaydii ku qosleen iyaga oo yaabban.

Markii ardaydii ay qosol dhammaysteen, sanqadhuna ay go'day ayuu u caddeeyay ardaydii, in jalxaddan iyo kubbaduhu ay ka dhigan yihiin noloshiinna iyo shaqooyinka muhiimka ah ee maalinlaha ah, dadkuna ay qabtaan. Xidhiidhka aad la leedahay Ilaahay SWT, qoyskaaga,

asxaabtaada, iyo waxyaabaha aad danayso ee kuu gaarka ah waxa aad tahay mid ay noloshiisu ku buuxdo waxyaabo qiimo leh.

Waa maxay dulucda sheekadani?

Dulucda sheekadani waa in ay jiraan arrimo badan oo uu qofku wada qaban karo intii uu ka caban lahaa mashquul iyo waqti-yari, haddii uu sidaa u eego noloshana waxa u suuragalaya arrimo badan oo noloshiisa waxtar u leh. Waxa kuu muhim ah in aad ka dhigato caado joogto ah wax-isweydiinta iyo xisaabtanka, taas oo kuu noqon doonta ilayska kuu iftiimiya nolosha.

Ha ka joogsan in aad wax isweydiiso haba noqoto su'aalo iska fudud'e, waayo; wax-isweydiintu waa waddada ugu haboon ee aad ku helayso waxa kaa maqan, waana qaabka ugu fiican ee aad isu qiimaynayso.

Su'aalo Saamayn Kugu Leh

Waxa jira su'aalo ay muhiim tahay in aad isweydiiso oo aad xoogaa dul'istaagto aad jawaabo waafi ah ugu hesho,

waxana su’aalahaas ka mid ah:

- Waa maxay hadafka aad noloshaada doonayso in aad xaqiijisaa?
- Hantida dhabta ah ee aad leedahay noloshani waa maxay?
- Maxaad aroor walba u tagtaa shaqada?
- Maxaad u nooshahay?
- Yaad se u nooshahay?
- Maxay dadka qaar aad ugu horumaraan?
- Maxay dadka qaar u haystaan hanti ku filan?
- Maxay u helaan xilal sare oo ay ugu nool yihiin nolol wanaagsan?
- Maxay ugu nool yihiin noloshii ay doonayeen ee ay ugu raaxaystan xalaasha uu Ilaahay siiyay?
- Maxay arrimahaa dadka qaarna u heleen qaar kalena aanay u helin?
- Waxaas oo dhanna waxa ka muhiimsan, adigu kooxdee ayaad ku jirtaa?
- Kooxdee se ayaad doonaysaa in aad ka mid noqoto?

Waa su'aalo gundhig ah, saamayn badanna ay jawaabohoodu ku leeyihiin nolosha. Waa su'aalo jawaabohooda lugu kala duwan yahay, qof kastaana jawaabo gaar ah uu ka bixinayo. Muhiimaddu se waxa weeye, jawaabta aad adigu bixinayso, gaar ahaan qaybtee ayaad doonaysaa in aad ku biirto?

Haddiiba aad doonayso in aan ogaato jawaabtayda aniga, waxa aad ogaataa in uu jiro xeer la yidhaahdo Xeerka Sababta iyo Natiijada.

Xeerkani waxa uu leeyahay: "wax kasta oo noloshaada ka dhex dhacayaa waxa uu leeyahay sababtiisa. Miyaanay sidaa ahayn?"

Xeerkani waxa uu adkaynayaa in muuqaal kasta oo noloshaada ka dhex muuqdaa uu leeyahay sababtiisa qarsoon ee uu ka dhashay ama sababo badan oo isku tegay oo uu ka dhashay dartood.

Waxa ay noqon karaan sababo la garanayo, waxa kale oo ay noqon karaan sababo aan la garanayn, wax si iskii ah isaga dhaca sabab-la'aani ma jiro, sidaa darteed ayuu Ilaahay SWT Quraanka inoogu sheegay wax waliba in uu qorshe iyo nidaam ku socdo oo aanay jirin wax iska dhaca oo iska yimaaddaa.

﴿ إِنَّا كُلَّ شَيْءٍ خَلَقْنَاهُ بِقَدَرٍ﴾. [القَمَر: ٤٩]

Alle sarreeye waxa uu yidhi: (wax walba waxaanu ku abuurnay jaangooyo).

Dhammaadka noloshaada iyo sida ay ku danbaynaysaa waa doorasho noloshaadu ilaahayna waxa aad kula kulmaysaa jidkii aad dooratay inaad ku socoto noloshaadu, waxa ay ku danbaynaysaa natiijada wixii aad soo fali jirtay adigu.

Cidina iyada oo aanay ku qasbin ayaa lagu siiyay awoodda doorashada, in aad joogi karto, bixi karto, seexan karto, soo jeedi karto, wax baran karto, iskana deyn karto, dhammaantood waa doorasho.

﴿ الَّذِي خَلَقَ الْمَوْتَ وَالْحَيَاةَ لِيَبْلُوَكُمْ أَيُّكُمْ أَحْسَنُ عَمَلًا ۚ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْغَفُورُ ﴾ [المُلْكُ : ٢]

Alle sarreeye waxa uu yidhi: (Alle waa ka abuuray nolosha iyo geeridaba si uu idiinku imtixaamo kiina camal wanaagsan sameeya Alle ayaana ah Allaha awoodda badan ee danbi dhaafka badan).

Mustaqbalkaagu waxa uu ku dul-dhismaa doorashooyinka aad qaadanayso, naf walibana wixii ay shaqaysato ayuun baa horyaalla adduunka iyo aakhiraba.

Qisada Guulayste Ismaareeyay

Dhacdadii aan soo marnay ee ku saabsanayd Sayd iyo sida uu ugu guuldarraystay maaraynta dhaqaalihiisa isaga oo uu soo gali jiray mushahar wanaagsani, sidoo kalena haystay shahaadooyin sare, waxa ay ahayd dhacdo inoo noqon karta tusaale aynnu wax ku qaadanno, waana wax ay kugu habboon tahay inta aad wax ku qaadato in aad ka baydho waddadaa uu maray Sayd.

Qisada noloshaada ee aad qoraaga ka tahay waxa kugu waajib ah in aad ka dhigto mid lagu daydo oo aanay noqon mid loo weriyo si ku-cibraqaadasho ah, waxana hore loo yidhi, dadka waxa ugu caqli badan qofka wax ku qaata dadka kale.

Waxa aan kuugu baaqayaa in aad ku cibro qaadato adiga oo ku dayanaya qisadan hadda aan kuu werinayo. Waa nin aan wadan wax shahaado ah sidii Sayd oo kale, waxana la yidhaadaa Sacad.

Waxa uu ka shaqeeyaa isla shirkaddii uu ka shaqaynayay Sayd, weliba mushahar ka yar wax ku dhow kala badh kii uu ku shaqaynayay Sayd, laakiin Sacad waxa uu leeyahay dhaqanno wanaagsan oo ay ka mid tahay in uu ku daydo dadka uu wax bidayo in ay wax ku dhaamaan, sidoo kale waxa uu la saaxiibaa dadka uu isleeyahay wax ayaad ka faa'iidi kartaa,

horena waxa loo yidhi: "qofka la saaxiiba qolo tukataa isaguna wuu tukadaa, halka qofka la saaxiiba qolo heestaa isaguna uu heeso uun." Sidoo kale weeye fahanka dhaqan-dhaqaaluhu, oo haddii aad la saaxiibto dadka daneeya sida ay dhaqaalohooda u hagaajisan lahaayeen, adiguna waxa aad noqonaysaa mid la mid ah.

Waxa aynnu hore ugu soo marnay in shirkadda uu Sayd ka shaqayn jiray ay soo kordhisay barnaamij ay ku bixinayso guryo deyn ah oo ay ku caawinaysay shaqaaleheeda, Sacad waxa uu sameeyay qaab ka duwan sidii Sayd, waxana uu dalbaday gurigii, markii loo dhisayna isla markiiba waxa uu u soo bandhigay gurigii iib!

Waxana uu ku iibiyay lacag fiican maadaama uu gurigu cusbaa. Waxa uu iska guday deyntii uu shirkadda ka qaatay, baaqigii u soo hadhayna waxa uu ku aasaasay shirkad ka shaqaysa qandaraasyada, shirkaddii wuu ku dedaalay waana uu u dhabar'adaygay illaa ay si fiican u soo kacday.

Muddo shan sano gudeheed ah waxa u suuragashay in uu iibsado oo uu dhisto xarun ganacsi oo uu ka hirgeliyay suuq ganacsi oo fiican, isla markiibana waxa uu bilaabay dhismihiisii in uu soo geliyo dakhli wanaagsan oo sannadkii ka badan 400,000 oo Riyaalka Sucuudiga ah,

sidaas ayuuna Sacad ku hantiyay laba ilood oo dhaqaale, aadna u wanaagsan, mid ka soo gala dhismihiisa, iyo mid kale oo ka soo gala mashruucii uu aasaasay.

Sacad waxa uu fahansanaa 'sida dhaqaale loo sameeyo, waxana uu garanayay gurigu in aanu ahayn hanti dakhli soo gelinaysa, sidaa darteed ayuu ugu tallaabsaday laba arrimood oo muhim ah.

- In uu iibiyo, kuna beddelo hanti wax soo saar leh, waxana uu arrintan kaga duwanaa sida ay u fikiraan dadka badankoodu oo ah in ay hanti wax soo saar leh moodayaan dhismaha guryaha.
- Waxa uu ka fekeray in aanu wadaynin hal il oo dakhli ah, ee waa in uu sameeyaa ilo dakhli oo badan, sidaa darteed ayuu u abuuray isha labaadna.

Waxaas oo dhan waxa ka muhiimsan, Sacad iskuma uu hawlin in uu la jaanqaado qaabnololeedka naftiisu ay doonayso ama ay ku qalqaalinayso, dhawaaqyada ka baxaya hareerihiisa iyo bulshada uu la nool yahay.

Dhib ma laha markaa in uu hadda ku xarragoodo oo sida ku habboon uu u xarragoodo maadaama uu u samaystay laba ilood oo dhaqaale fiicani uu ka soo galo. Sacad waxa uu sii labanlaabay abuuridda ilo dhaqaale oo hor leh, waxana uu maalgashaday meelo kala duwan illaa uu dakhliga ka soo galaa labaatan jeer labalaabmay muddo toban sano gudohood ah.

Sacad markaas ayuu naftiisa ku abaalmariyay guri fillo oo aad u weyn uu ka dhisay dhul ballaadhan, waxana uu sidoo kale iibsaday baabuur noocyadii u danbeeyay ah, sidoo kale waxa uu carruurtiisii u diray waxbarasho dibedeed. Dhammaan waxaas oo dhan wax saamayn ah kuma ay yeelan hantidiisii in ay sii korodho mooyaane, hoosna uma ay dhicin.

Maxay Tahay Sirta ka Danbaysa Guushani?

Waxa ugu muhiimsan ee ay cuskanaysay guusha Sacad ayaa ah, in aanu Sacad u dheg raaricin waxa ay naftiisu u yeedhinayso ee ah qaab nololeedka ay naftiisu doonayso, taas oo in badan oo dadka ah duufsata sannadaha ugu horreeya ee ay shaqo helaan oo ay xarragada ka door bidaan in ay abuuraan ilo dhaqaale oo kale xarragada ka hor. Haddaba; adigu midkee ayaad ku dayanaysaa, ma dadka sidaa Sacad yeela, mise dadka sidii Sayd yeelay oo kale?!

Waxa kula gudboon in aad fahanto in aanay aqoon- darridu keenin khajilaad, qofkuna aanu ka khajilin wax- korodhsiga, laakiin waxa keena khajilaadda laga khajilo wax korodhsigu waa ka-jeedsiga laga jeesto in wax la korodhsadaba. Waxa suuragal ah qofku in uu wax ka barto

qisooyinka dadka guuleystay iyo dadka uu ku dayanayo ee wax ku dhaama. Arrinta bishaarada kuu reebaysa ayaa ah, in caado kasta oo xun oo aad leedahay aad ku beddelan karto mid wanaagsan, sida caadada wanaagsanba ay u beddelayso mid aan wanaagsanayni. Marka aad isbarbar dhigayso dadka kale, waa in aad u jeedaa keliya carinta nafta ee ku gayaysiinaysa horusocodka,

laakiin in aad dadka kale isu barbar dhigto tartan iyo xurguf-abuur dartood, waa mid aan saxnayn. Haddii aad cid la tartamayso adigu isla tartan, shalay iyo maanta, bishii hore iyo tan, sannadkii hore iyo kan, maxaa kuu kordhay oo aad ku kala duwan tahay?

Isla tartan oo isu fiirso adiga oo dedaalaya, awoodahaaga wanaagsanina ay kuu dahsoon yihiin.

Hantida Ayaa ka Horraysa Xarragada

Faallo ku Saabsan Sida loo Shaqaysto Shilinka

Fikradaha aynnu la kulanno aalaaba iyaga oo haddana iska kooban, waxa ay wataan dhismayaal ay dhex dhigayaan qofka iyo in uu isku dayo sidii uu wax u shaqaysan lahaa iyo hadba waxa yar ee uu helo in u ku kaaftoomo oo aanu isweydiin sidee ayaadku heli kartaa? wax kale,

Tusaale ahaan; marka ay bulshadeennu leeyihiin "lacag ayaa lacag dhasha" ama "ma iibsan karno waxaas" ama "lacagtu geed guriga iiga baxa ma aha" iyo "ciiddu dahab ii noqon mayso dee!"

Dhammaan erayadan iyo kuwa la midka ah waxa ay si qoto dheer ugu sugayaan caqligeenna in ay dhif iyo marla'arag tahay, iyo in aanay ahayn wax la heli karo, ama ay aad u adag tahay lacagta heliddeedu, dhammaan

fikradahaasina waxa ay ku dhaxalsiinayaan in aad foororsato oo aad u noolaato sida ay dad kale kula dooneen ee aanad u noolaan sida aad adigu doonaysay.Taas beddelkeeda adigu waxa aad nooshahay casrigii xogta iyo isgaadhsiinta, oo tilmaantiisa ugu mugga iyo miisaanka badani

ay tahay "fara badni" wax kasta oo caalamkaa dhex yaallaa wuu badan yahay, waana malaayiin, sida muuqaallada, sawirrada, buugta, iyo xataa hantida. Sidoo kalena Ilaahay SWT waxa uu kugu manaystay nicmada caqliga oo ay u adeegsadeen dad adiga kula mid ahi in ay ku sameeyaan hanti iyo horumar kaleba.

Haddii aad caqligaaga ku quudiso aqoonta iyo fahanka ay habboon tahay in aad u barato si aad u samayso xorriyad dhaqaale, waxa lagama-maarmaan ah in aad gaadhayso ujeeddadaada haddii uu Ilaahay idmo.

Xeerka sababta iyo natiijadu waa mid u bannaan dhammaan aadamaha oo dhan, haddii aad qaadato sababaha meel ku gaadhsiinaya ku kalsoonow in aad gaadhayso natiijada ay sababahaasi dhaliyaan.Tusaale haddii aan u soo qaadanno in aad leedahay beer yar, waxa kula gudboon in aad diyaariso beertaa xilliga falashada, si ay kuugu suuragasho in aad


goosato midhaha waqtiga ay midhuhu soo go'ayaan, arrintaasina waxa ay waafaqsan tahay maahmaahda odhanaysa, "beertaa intay ku siiso bahdaa kuma siiso", waxana aad ka raadinaysaa shaqadaa aad qabanayso deeqda Ilaahay iyo arsaaqdiisa. Wax kale inoogama baahna aan ka ahayn shaqo in aynnu qaadanno sababaha aynnu awoodi

karaynno qaadashadooda, si aynnu natiijo ugu goosanno. Suurayso oo ka fikir haddii Ilaahay SWT uu dusha inoo saari lahaa masuuliyada dhammaan waxa ay u baahan tahay beertaasi ee ah ilaalinta dalagga

daqiiqad kastaba, ilayskiisa, biyihiisa, iyo dhammaan waxa ka ilaalinaya dhibaatooyinka, in aanay waxbaba inoo suuragaleen.

Isla arrintaas lafteeda ayaa ku rumoobaysa kasbashada hantida noocyadiisa kala duwan, waxa aad samayn kartaa in aad maanta wax beerto adiga oo qorshe wanaagsan dejisanaya, qorshahaas oo isu beddelaya fikrad kaa dhex guuxda, fikraddaasina waxa ay isku beddelaysaa dareen ku shida oo ay ka dhalato ,

shaqo wax ku’ool ahi, sida aynnu ka arki karno jaantuskan soo socda.



Arrintani waxa ay sii adkaynaysaa kelmaddii uu tilmaamay Mr.Loral Langemeier ee ahayd: "inta aanu qofku joogtaynin tallaabada koowaad, ta labaad ma xaqiijin karo."Noloshaada berri waxa qaabaynaya waxa aad maanta samaynayso. Ilaahay SWT waxa uu ku siiyay awoodo aan tiro iyo xad toona lahayn, haddii aad xad u samayso adigu taasi waa gabbood-falkaaga.

Sidoo kale; waxa uu yidhi uu yidhi aqoonyahanka Cilmi-nafsiga ee Ralph Waldo Emerson: "waxa hortaada ka socda iyo waxa gadaashaada ka socdaaba aad ayay u yar yihiin marka loo eego waxa gudahaaga ka dhex soconaya."Innaga oo ka duulaynna labadaa hadal ee layaabka leh, waxa kula gudboon in aad ka bilawdo naftaada oo aad horumariso, horena waxa loo yidhi: "isku hawl oo ka horraysii horumarinta naftaada ka badan inta

aad horumarinayso shaqadaada." Waxa ay naftaadu ku sugnaan doonto ayaa ka muhiimsan in badan waxa aad heli doonto mansab ama hanti ah. Waxa aan aad ula yaabaa dad raalli ku noqday in yar oo ka mid ah wax badan oo deeqaha Ilaahay uu i noo diyaariyay ah.

Waxa ay raalli ku noqdeen in ku qancaan hanbada xeedhyaha ka daadaata in ay ku gaabsadaan! Waxa ay doorteen in ay tagaan badda si ay ugu'soo qarqoomaan uguna haftaan iyada, isla markaana dad kale ay u tagaan si ay uga soo darsadaan wax badan, waxa waajib ah in aad yeelato go'aan aan laalaabad lahayn oo aad ku baadi-goobayso sharaftaada iyo isku- filnaashahaaga nololeed. Gabyaagii waxa uu yidhi:

وَمَنْ يتهيب صُعُودَ الجِبَالِ يَعِش أَبَدَ الدَهرِ بَيْنَ الحُفر"

"qofka ka labalabeeya fanashada buuruhu, abidkiiba hogagga hoose ayuu ku noolaadaa."

Hammigaaga iyo himiladaadu waxa waajib ah in ay noqdaan kuwo waaweyn oo ku gaadhsiiya xiddigaha, iyada oo ay lugahaaguna dhulka si fiican ugu taagan yihiin, waxana mahuraan ah mar walba in aad maanka ku hayso in waxa lagu xisaabtami karaa uu yahay oo keliya waxa aad ficil iyo waxqabad u beddesho.

Riyada wanaagsan ee aad ku rejo weyn tahay in aad maalin uun gaadhi waxba kama beddelayso waaqica aad ku noohashay. Haddii aanad riyadaada u beddelin ficil iyo waxqabad muuqda, waxa waajib ah in uu hammigaagu aad iyo aad u weynaado illaa uu kuula muuqdo wax aan dhiciba karin. Miyaanad arkin nebi Saleebaan NKH'e hammiga weyn ee uu xanbaaray, kuna ducaystay.

﴿ قَالَ رَبِّ اغْفِرْ لِي وَهَبْ لِي مُلْكًا لَّا يَنبَغِي لِأَحَدٍ مِّن بَعْدِيۖ إِنَّكَ أَنتَ الْوَهَّابُ ﴾ [ص: ٣٥]

Alle sareeye waxa uu yidhi: (“waxa uu yidhi nabi Saleebaan rabbigayow ii hibee boqortooyo aan u haboonayn cid aniga iga danbaysa Allahayow adaa deeq baxshe”e).

Ducadaas oo kale iyo hammigaas oo kale waa ka habboon in aad xanbaarto oo aad dhabarka u ridato. Dadka badankoodu waxa ay doonayaan in ay helaan hanti ka badan tan ay haystaan, hase ahaato'e

waxa ay iskaga gaabsadaan wax ka yar waxa ay suuragal tahay in ay soo saaraan, marka ay xaqiiqadaa fahmaanna badanaa waa xilli waqtigii ay wax ku qabsan lahaayeen uu dhaafay, murugada iyo tiiraanyada waxa ku dhaafayna waqtiga waxba kama beddelo! Waxa aan kaaga sheekaynayaa sheeko kooban oo macne badani uu ku duugan yahay.

Waxa la sheegaa in shinbir yari uu dultaagnaa laanta geedka shimbirkaas oo si daran u ooyaya, isla markaana labadiisa baal mid ka mid ah ku qarinaya ishiisa. Waxa si kedis ah ugu soo degtay laantii guumays, illaa

laantii ay la dhaqaaqday shinbirkii oo uu ku sigtay in uu dhaco, waxa uuna kor u fidiyay labadiisii baal, guumaystii waxa ay aragtay in ishii uu shinbirku qarinayay ay tahay mid cawaran oo laga soo tuuray shinbirka, markaasay ku tidhi: "haa. Hadda ayaan gartay waxa aad ishaada u qarinaysay, illeen way ku cawaran tahay ishu oo sidaas ayaad u qarinaysaa, una ooyaysaa!"

Waxa uu ugu jawaabay shinbirkii: "kama ooyayo ishaydan cawarantay, ee waxa aan ka ooyayaa marka horeba waxa aan naftayda u dhigay meel ay isheeda ku beelayso!" Ujeeddada sheekadani waa mid iska cad. Waxa kugu dhacay ama kugu dhici doona waxa ka muhimsan in aad qaadato sababta ka-hortagga ah, inta awooddaada ah ka hor inta aanay waxaasi kugu dhicin. Waxa aad u qurux badnayd kelmad uu yidhi madaxweynihii hore ee Maraykanka ee John Kennedy: "muhiimaddayadu hadda ma aha in aannu canaananno wixii tegay, waxa se inoo yaalla in aynnu waddada mustaqbalka si fiican u diyaarsanno.

"Si aanad uga murugoon marka uu yimaaddo jiilaalka cimrigaagu ee aad da' gaadho xilli aanay waxba ku tarayn murugo, si wacan ugu fiirso xogtan kale ee aan soo wado, kuna saabsan fahanka dhaqan-dhaqaalahaaga.

Xilligii Wershadaha iyo Isbeddelka Nolosha

Ka hor intii aan laga helin shidaalka Sucuudiga tusaale ahaan, ee aan loo gudbin casriga wershadaynta, waxa ay ahayd noloshu mid isku wada mid ah guud ahaan, ama iswada shaabahda. Guryo yaryar oo isku wada muuqaal ah. Waxa la isku qaboojin jiray xilligaas waxa ay ahayd marwaxadaha yaryar ee sanqadha badan. Waxa haddana yara beddelay marawaxado yaryar oo dusha sare ee guriga laga soo laalaadin jiray, iyo fadhiyo yaryar oo barkimooyin kooban oo lagu tiirsadaa ay la socdeen.

Isla markii uu burqaday shidaalku ee uu qaaliyoobay, waxa ka dhashay in uu kordho waxsoosaarka dalku, taas oo ay ka dhalatay in uu si dhakhso leh u kordhay dakhliga qofka rayidka ahi. Arrintaasina waxa ay dhashay isbeddel weyn oo dadka ku dhacay.

Dhibaatooyinka ka dhashay kor-u-kacaa dhaqaalaha ee bulshada waxa ka mid ahaa, in uu mar keliya beddelay qaab nololeedkii bulshada, iyada oo aanay waxba ka fahansanayn maaraynta dhaqan- dhaqaalaha qofka iyo qoyska, taasina waxa ay sababtay dhibaatooyin badan oo dadkii ku soo noqday ka dib markii ay adkaatay noloshii.

Ka-daba-dhaca iyo daba-socodka qaab nololeedka dadka (lifestyle) ayaa seejiyay in badan oo bulshada ka mid ah in ay maareeyaan dhaqaalohooda oo ay ku dhisaan noloshooda dhabta ah, noloshoodiina waxa ay iska noqotay nolol dibedda laga hago.

Waxa ay noqdeen in badan oo dadka ka mid ahi kuwo ay noloshooda hagaan muuqaallada sare ee ku dhisan faanka beenta ah ee gudaha ka madhani, waxana bulshadii ka dhex samaysmay dabaqad la yidhaahdo Dabqada Hodantinimada Samayska ah.

Dabaqaddan astaantoodu waa xarrago been ah iyo istusnimo aan meel jirin. Noloshooda maanta waxa ay ku nool yihiin dakhligoodii berrito, noloshana waxa ay ku wadaan waxa la yidhaahdo deyn-deyn-ku-debber, muddo ka dibna waxa ay isu beddelaan dad qaamaysan!

Sheeko Xikmadaysan

Dabaqaddani waxa ay waafaqaysaa sheekadii dhex martay labadii nin ee waddada iskaga lug darsaday iyaga oo safar ku jira.

Midkood ayaa ku yidhi kii kale oo ahaa nin oday ah: "ma i sii qaadi?"Waxa uu ugu jawaabay: "sidee ayaan kuu qaadaa, labadeennuba gaadiid inoo gaar ah ayaynnu wadanaaye?!"

Ma jawaabin ninkii ee way iska sii wada socdeen illaa aysoo mareen beer si wanaagsan u baxday, markaasuu ninkii odaygii weydiiyay: "tolow beertaa miyaa la geedo jaray mise weli lama geedo jarin?!"

Markaasuu odaygii ugu jawaabay isaga oo yaabban: "side loo jaray sawdigaa arkaya in ay beerta midheheedii ku yaallaan?!"

Markii ay xoogaa socdeen ee ay soo gaadheen magaaladii ay u socdeen ayuu odaygii weydiiyay ninkii: "xaggee ayaad degaysaa?"

Ninkiina waxa uu ugu jawaabay: "waxa aan degayaa guriga guryaha ugu sarreeya?"

Ninkii odayga ahaa wuu macasalaameeyay ninkii isaga oo la yaabban ninkan iyo hadalladiisa, markii uu ninkii odayga ahaa ku hoyday gurigiisa ayuu qoyskiisii uga sheekeeyay isaga iyo ninkii ay jidwadaagta ahaayeen waxa dhex maray, waxaana uu yidhi: "waxa uu ahaa nin waalan!

"Gabadh uu dhalay odaygu oo caqli badnayd ayaa tidhi: "aabbo; ninku ma uu waallnayn ee wuu ku jirrabayay, waxana uu uga jeeday hadalladiisa marka uu kulahaa, ma isii qaadi mise waan ku sii qaadaa?'

Waxa uu u jeeday 'ma ii sheekayn mise waan kuu sheekeeyaa?' Waayo; sheekada safarka iyo jidwadaagtu waa sidii in aad qofka qaadday oo kale. Marka uu ku lahaa 'tolow beertaa ma la jaray mise waa welina?' Waxa uu u jeeday tolow dadkii beerta quruxdaa leh iska lahaa ma iyagaa midhahaa cunaya oo iska leh, mise waxa ay galeen deymo looga qaadanayo beerta sidaa u quruxda badan?"

Marka uu ku leeyahay waxa aan degayaa guriga guryaha u sarreeyana waxa uu u jeedaa masaajidka, waayo; waa guriga guryaha u sarreeya! "Odaygii waxa uu ku noqday ninkii, waxa uuna u furay hal-xidhaalayaashii uu u sii guntay. Ninkii waxa uu yidhi: "halxidhaalayaashaa adigu kama aadan jawaabin ee yaa ka jawaabay?!

"Odaygii waxa uu u sheegay in inantiisu ay furtay halxidhaalahaas. Ninkii ka dib markii uu arkay gabadhii, odayga waxa uu weydiistay inantii, waana la siiyay, markii uu inantii kula noqday reerohoodii ayay ku soo urureen xigtadii ninku iyaga oo weydiinaya su'aalo ay ku jirrabayaan, illaa ay ogaadeen gabadha iyo caqli- badnaanteeda, waxana ay yidhaahdeen maahmaahda caan baxday ee ahayd "Shanun waxa uu helay gabadha [10] Dabaqa oo ku haboon."

Waxa aanay noqotay maahmaah Carbeed oo mahadho ah.

[10] "Shanun" waa magaca ninka "dabaqana" waa magaca gabadha waana sheeko ku caana ah suugaanta afka carabiga.

Hadda se sheekada waxa aynnu uga dan leenahay waa beertaa dadkii lahaa ma iyagaa leh mise waxa ay dhaafsadeen deyn lagu leeyahay oo loo qaadanayo?

Aynnu isweydiinno, imisa ayaa mushahar la qaato la sii cunayba oo deyn lagu idleeyay intii aanu qaato qofka soo gaadhinba ka hor?

Taas oo qofka ka dhigaysa in uu dhex wareego meertada jiirka ee aan hore u soo marnay.

Muhiimaddu ma aha mushaharka badan ee qofka soo gala, ee muhiimaddu mar walba waa sida uu u maareeyo waxa soo gala.

Muxuu kala hadhaa oo uu ka kaydsadaa?

Muxuu se maalgalin ku sameeyaa si uu u soo saaro dakhli kale.

Mushkiladdu sidoo kale waxa ay ku jirtaa doorashada uu qofku dooranayo halka uu ku bixinayo lacagta soo gelaysa, arrintaasina badanaa waxa ay u noqotaa hadba inta ay gaadhsiisan tahay fahanka qofka ee siyaasadda dhaqan-dhaqaale, iyo sida uu isugu dheellitiraayo dakhliga soo gala iyo kharashaadka ka baxa, isaga oo ku celcelinaya "Ilaahay ayaa wax bixiya'e iska bixi" ka dibna waxa uu ku sii hoobtaa deyn iyo culaysyo kale!

Mar aniga oo ag fadhiya nin maamula bangi, waqtiguna uu ahaa xilligii fasaxyada la galayay ayuu u soo galay maamulihii bangiga nin aan ku qiyaasay afartan-ku-dhowaad. Wuu salaamay, waxana ka muuqday sheekada uu la wadaagayay mamulaha bangiga in uu dhowaan uun bangiga ka qaatay fasax si uu dibedda u aado, waxana uu ka maqlay saaxiibadii in la furo kaadh wax lagu iibsan karo oo aad mar danbena iska bixin karto, lacagta uu deynta kugu siiyo, waxana uu u sheegay

maamulihii bangiga in uu doonayo qaadashada kaadhkaas!

Maamulihii wuu dhoollacaddeeyay waxana uu u sharraxay noocyada kaadhadhka. Waxa uu ku wareejiyay shaqaalaha u xilsaaran bixinta kaadhadhka. Arrintani waxa ay ku tusinaysaa inta ay le'eg tahay dadka ka

haysata maaraynta aqoon-darrida dhaqaalohooda badanka dadkana waxa hagaya keliya in ay ka jawaabaan waxa ay naftoodu tabayso markaa iyaga oo aan eegaynin sidii ay isugu dheellitiri lahaayeen dakhliga iyo kharashaadka waxa aan shakiga lahaynina waa in caqliga noocaa u fikirayaa uu qofka ka xidhayo in uu dakhli cusub ku soo biiriyo noloshiisa, kaas oo qoortiisa ka xorayn lahaa addoon-nimada mushahar aan ku filnayn.

Aan kaaga warramo si kale'e, waxa meesha ka saaray qorshaha fahan ee dhaqan-dhaqaalaha iyo in aan la kala garanayn maxaa hanti ah maxaa se qaan ah?

Hantida ma guurtada ah ma adigaa leh mise waa kharash soo kordhay? Hore waxa aan u soo marnay qisadii Sayd iyo wixii ka dhashay ee deyn iyo dhib ahaa markii uu go'aansaday in uu guri dhisto. Haddaba; halkee ayay wax ka khaldameen?

Ma in uu Sayd go'aansaday in uu yeesho guri hanti ah?

Haddiiba ay sidaa tahay maxaa la gudboonaa in uu yeelo?

Waxa lagu soo daabacay wargeyska "Al yowm" qoraal uu qoray Cabdimajiid Faa'is - Abril 2007 dii oo ahaa: "waxa ay tilmaamayaan xog ururinta qaarkood, in 80% qoysaska ka mid ahi aanay haysan guryo hanti

Ah ay leeyihiin [11]. "Sababo uu ku xusay qoraagu awgood. Xogtaas uu tilmaamay qoraagu haddii ay sidaas u jirto, waa xaddi aad u sarraysa xaqiiqdii. Sidaa darteed; dood ku saabsan in la yeesho guri hanti ahi waa mid aad u hoosaysa, sababta oo ah; waxa aad ka doodaysaa waa wax ay keliya 20% bulshada ka mid ahi haystaan.

Iyada oo ay sidaas tahay; haddana ka-qaybqaadashada baahinta fahanka dhaqan-dhaqaalaha waxa aynnu halkan ku soo bandhigi doonnaa muhiimadda ay leedahay in la yeesho guri hanti ahi, waa se goorma?

Bal aynnu ku noqonno sheekadii Sayd mar kale, oo aynnu isweydiinno in uu Sayd guri yeeshaa ma qalad ayay ahayd?

Sayid in uu guri hanti ah yeeshaa sideeda qalad uma aanay ahayn, balse qaladku waxa uu ka dhacay xilliga uu guri hanti ah yeeshay Sayd, qaladkaasina waxa uu ka yimi laba dhinac.

Kan koowaad: waa maqnaashaha fahanka maaraynta iyo maamulka maaliyadda.

Kan labaadna: waa ku-dayashada dadka kale iyo u noolaashaha sida dadka kaleba ay u nool yihiin.

Haddii aynnu u fiirsanno go'aanka Sayd ee uu guriga ku deynsaday qiime qaali ah ee uu weliba ku daray deyn kale oo uu ku dhammaystiray agabka iyo qurxinta guriga isaga oo xaaladdaa ku jira waayihiisii ugu

[11] halka uu ka hadlayo qoraagu ee xog uruurintani ku saabsan tahay waa dalka sucuudiga oo ka mid ah wadamada ugu dhaqaalaha fiican caalamka, laakiin marka loo eego inaga dhulkeena soomaalidu leedahay badankoodu guryoba ma haystaan hadaynaan odhan 90% guryo ma laha halka 50% ama ka badanna aanay daganaynba guryo caadi ah oo roobka iyo dabaysha ka celiya ee ay ku dagan-yihiin guryo ka samaysan dhir, baco, iyo jiingad inta guryaha dhagaxa ah daganna badanaa ay dagan-yihiin oo keliya magaalooyinka.

horreeyay ee shaqo, waxa aynnu ogaanaynnaa in waqtigaas oo kale ay tahay culays xad'dhaaf ah. Waxa ku habboonayd Sayd in uu ka hawlgalo marka koowaad sidii uu u samayn lahaa il kale oo dakhli oo aan ahayn

tan keliya ee uu mushaharka ka helo, iyo in uu kobciyo ilaha dakhli ee kale, ka dibna uu markaa baadi doono ama in uu samaysto ilo kale oo dhaqaale oo ka bata guri dakhli ahaan kharashaadka ka baxa, sidii uu sameeyay Sacad sheekadu aynnu hore u soo marnay.

Go'aanka yeelashada guri hanti ah ka hor inta uuna samayn dakhli oo kale oo ka baxsan meesha mushaharku uu ka soo galaa waxa ay qofka u saamaynaysaa siyaabahan kala duwan.

- inay ku jihaystaan dhammaan hantidiisii rasmiga ahayd sida waqtigiisii iyo fikirkiisiiba sidii loo bixin lahaa deynta guriga lagaga yeeshay, taas oo ay ka dhalanayso in hantidiisii rasmiga ahayd ay ku dhiig baxayso deynbixin isaga oo aan dareensanayn.
- Isku-furidda gacan kale oo ku soo kordhiya ay weheliyaan kharashaad hor leh, iyada oo kharashaadkii hore ee gaarka u ahaa qofka noloshiisa maalinlaha ahi, sidoo kale waxa isaguna taagan dayactirka uu ku samaynayo gurigii uu deynta ku dhisay marka in muddo ah la joogaba.
- Ku-dhicida shabagga deynta oo gayaysiinaysa fikir joogto ah sidii uu deynta iska gudi lahaa. Taasina waxa ay dhaafinaysaa sidii uu ugu fikiri lahaa, una baran lahaa maalgashi iyo horusocod kale.

In uu qofku ka gawsqabsado sannadaha u horreeya shaqadiisa in uu guri yeesho, oo uu u jihaysto maalgashi

iyo abuuridda ilo dhaqaale oo kale, waxa ay u sahlaysaa in uu sameeyo gacanno kala duwan oo ay wax ka soo galaan, taas oo u kaga maarmi karo mushaharka, kuna xaqijin karo hodantinnimada uu doonayo, uuna ku helikaro guryaha uu doonayo.

Sidaa darteed; waxa aannu kugu adkaynaynaa in ay kula gudboon tahay in aad yeelato ilo dhaqaale ku soo geliya ka hor inta aanad yeelan guri.

Marka aad barato ee aad fahanto arrimhaaga dhaqaale oo aad si wacan u kala saari karto, waxa wax ku soo gelinaya iyo waxa jeebkaaga dib wax uga saaraya, ka dibna aad ka shaqayso kobcinta hantida wax ku soo gelinaysa, ka dibna iyada ayaa si iskeed ah u kobcaysa si tartib tartib ah, waana taas waddada loo maro madax-bannaanida dhaqaale.

Halbeegga Hodantinimadaada

Hore waxa loo yidhi: "macaashka ayaa ka wacan mushaharka." Aragtidaasina waa mid ka muuqata nolosheenna caadiga ah waxa kuu wanaagsan in aad ka hesho dhaqaalahaaga macaash ku soo gala intii aad qof kale ka sugi lahayd mushahar bisha aakhirkeeda ku soo gala.

Dadka kale u daa ha noolaadaan nolol iska caadi ahe. Dadka kale u daa ha isku haystaan wax aan macno lahayn oo aanay dani ugu jirin'e. Dadka kale u daa ha ku halleeyaan mustaqbalkooda cid kale'e. Laakiin adigu maya! Waayo; waa in hammigaaga iyo himiladaadu aanay yeelanin wax saqaf ah oo soo xidha. Maxaad ugu raalli noqonaysaa in aad ku noolaato hambada ka daadata xeedhada dadka?

Iyada oo qayrkaana ay haystaan wax ay bixiyaan xilliga ay doonaan oo ay siiyaan cidda ay doonaan. Adigu waxa aad haysataa waxyaabaha guusha keena oo dhan, ee maxaa keenay taag-darrada?

Waxa waajib ah in aad garato halkee ayaad joogtaa adigu hadda?

Waa maxay qadderka hantidaadu?

Waa maxay qeexitaanka hodantinimadu?

Waxaas oo dhanna waxa ka muhiimsan in aad garato adigu halkee ayaad kaga sugan tahay dariiqaa?

Qeexitaanka hodantinimadu sida uu xusay Mr. Larbi D. Frank, waxa uu ku qeexay hodantinimadu in ay tahay: "qadderka hanti ee aad u haysato qaab-nololeedkaaga caadiga ah marka aad ka joogsato shaqada."

Si kale haddii aynnu u dhignana, waa intee ayaad awoodi kartaa in aad sii noolaato maalmaha iyo sannadaha kugu soo aaddan haddii aad shaqada joojiso.

Qaab-xisaabeed haddii aynnu udhignana, haddii aad bixiso 3% hantidaada kaydka guud ahaan, waxa ay ku idlaanaysaa kuna dhammaanaysaa 3.33 sano kharash ahaan, jaantuskan soo socdaana waxa uu inoo caddaynayaa xidhiidhka ka dhexeeya isticmaalka kharashka iyo tirada sannadaha ay ku dhammaan karto hantidaadu.

Hantida kaydka ah	Inta laga isticmaalay	Tirada sanadada ay ku dhammaanayso hantidu
100 xidhmo	3%	33.33
100 xidhmo	4%	25
100 xidhmo	5%	20
100 xidhmo	8%	12.5

Sidaa kasoo-horjeedkeeda waxa uu caddaynayaa jaantuskan soo socdaa qadderka baahida sannadkii iyo waxa ay habboon tahay in la kaydiyo iyada oo lagu dheellitirayo baahiyaha sannadkii.

Kharashka sanadkii (dollar/shilin/riyaal) hadba lacagtaada.	Qadarka laga saarayo kaydka(dollar/shilin /riyaal) hadba lacagtaada.	Qadarka ay tahay in la kaydiyo si loo bixiyo kharashka sanadlaha.
40,000	4%	1,000,000
40,000	5%	8,000,000
40,000	8%	5,000,000

Waxa suuragal ah in aynnu jadwalkan u dhigno qaab qaaciido ah, innaga oo odhanaynna:

Kharashaadka sannadkii = S

Kaydka waajibka ah = K

Qadderka isticmaalka % = I

Marka aan isla fahanno afgarashadaas, qaaciidaddu waxa ay noqonaysaa sidan:

$$S = \frac{k}{i} = \qquad Dollar/shilin/riyaal$$

Sidaas oo kale ayay noqonaysaa tirada sannadaha ay ku filnaanayso wixii la kaydiyay marka hadba laga bixinayo qadder tilmaaman qaabkan soo socda:

Kaydka waajibka ah = K

Kharashaadka sannadkii = S

Tirada sannadaha = T

Markaasna qaaciidadu waxa ay noqonaysaa sidan:

$$T = \frac{K}{T} = \text{———————} \qquad Sannadood$$

Si aad u ogaato halka aad taagan tahay adigu dhaqaale ahaan, aynnu isla eegno casharka muhiimka ah ee uu Robert Kiyosaki uu ku qoray buuggiisa Aabbe Hodan ah Aabbe Sabool ah, isaga oo qeexaya sidoo kale hodantinimadana, waxa uu ku qeexay: "hodantinimadu waa: imisa maalmood oo soo socda ayay kuugu filnaanaysaa nolol ahaan waxa aad haysataa hadii aanad shaqo tegin?"

Anigu dhinacayga haddii aan kugu soo tuuro su'aal: imisa maalmood ama bilood ama sannadood ayay suuragal kuu tahay in ay kugu sii filnaadaan wixii aad kaydsatay haddii aad shaqada ka tagto?

Waa su'aal muhim ah oo mustaqbalkaaga si weyn u taabanaysa, hadba qaabka aad uga jawaabtaana waxa ay ku fahansiinaysaa sida ay daruuriga u tahay in aad dib u'eegis ku samayso xisaabahaaga iyo qaab nololeedkaaga. Caadooyinka qofku uu u sameeyo si maalinle ah ayaa qaabeeya noloshiisa mustaqbal.

Lacag badan in aad heshaa keliya kuuguma filna in aad ku noolaato nolol sugan! Dhaqaale ahaan, waxa daruuri ah in aad yeelato awood fahan dhaqan-dhaqaale ah, iyo in la iska fogeeyo caadooyinka nololeed ee keena in uu qofku maanta ku sii noolaado xisaabtii berri, isaga oo isku hallaynaya odhaahyada dadku ay iska yidhaahdaan iyaga oo aan dhaaddanaayn "jeebka waxa ku jira bixi waxa kuu iman waxa Ilaahay xaggiisa kumaqan'e." "Cirku ma darrooro dahab."

Sidoo kale; waain aad iska jirtaa dhayalsiga iyo xisaabtan-la'aanta sida ninkii Carbeed ee gabyaaga ahaa ee Imru'ul Qays markii aabbihii la dilay uu yidhi: "maantana khamri ayaan cabbi, berrina arrin ayaa yaalla!"

Taas oo seejisay hantidii iyo boqornimadii aabbihii. Tuugada wax musuq-maasuqda, dadka dhaqaalaha fahansan, iyo kuwa hodanka ahiba, waxa ay ka shaqeeyaan sidii ay u samayn lahaayeen hanti sugan oo soo gelisa dakhli sugan oo ku burqanaya akoonnadooda.

Sidaa darteed ayaa lagu qiyaasaa hantidooda qadderka dhaqaale ee uga soo hoyda ilohooda dhaqaale oo ay ku noolaan karaan inta loo gadderay in ay sii noolaadaan si nabad ah, iyaga oo aanka cabsanayn wax saboolnimo ah.

Haddii aynnu si fudud u sheegno fahanka iyo qeexidda hodantinimada ee aan ku soo sheegnay tirada maalmaha uu kugu filnaan karo kaydkaagu, waxa aad ka soo qaaddaa qof waxa soo gala hantidiisu ay tahay $2,000 bishiina kharashaadka ku baxaa ay tahay qiyaas ahaan $4,000, waa maxay qadderka hodantinimo ee u haysto qofkaasi?

Innaga oo eegaynna qeexitaankii hore ee aynnu ka bixinnay hodantinimada qofkaasi, waxa uu dakhligiisaa soo gala oo ah $2,000 ku noolaan karaa uun 15 cisho oo bisha ka mid ah, waayo; isticmaalka uu u baahan yahay waxa uu ku labanlaaban yahay waxa soo gala, qaab-xisaabeedka dakhligiisuna waxa uu noqonayaa, dakhliga ka soo gala hantidiisa oo loo qaybiyay kharashaadka uu isticmaalo bishii, waxana ay noqonaysaa sidan:

$$= \frac{Dakhliga\ kasoo\ gala\ hantidiisa\ bishii}{Kharashaadka\ ku\ baxa\ bishii}$$

$$= \frac{2{,}000}{} \quad Bil\ ama\ shan\ iyo\ toban\ cisho$$

Halkaas innaga oo ka anbaqaadaynna, mar kasta oo uu kordho dhaqaalaha guud ee ka soo baxaya hantidu, waxa kordhaya tirada maalmaha ay ku sii filnaan karto qofka.

Marka uu gaadho dakhliga ka imanaya raasamaalku $4,000, sida tusaalaha aan hore ugu soo sheegnay, markaasuu qofku heli karaa wax ka mid ah madaxbannaaninada dhaqale, in kasta oo ay isku sargo'an yihiin dakhligiisa iyo kharashaadkiisu, oo ay fiican tahay in dakhligu mar walba uu wax dheeraado kharashaadka.

In aad ku guuleysato, in dhinaca dakhligu uu ka xoog bato dhinaca kharashaadku, mar walba waa waddada aad u marayso madax-bannaani dhaqaale. Haddaba, mar kasta oo aad ka shaqayso in aad kharashaadkaaga ka hoos mariso dakhliga, waxa aad korodhsanaysaa hodantinimo, sidaas ayayna ku abuurmayaan ilahaaga dhaqaale oo aad

ka hesho dhaqaale, adiga oo aan dhex taagnayn, kana shaqaynayn. Intaas inoo soo horumartay waxa aynnu ku soo sheegnay in, maalqabeenku (qofka fahansan dhaqan- dhaqaalihiisu) uu iibsado hanti iyo ilo dhaqaale, halka uu qofka aan waxba fahansayni (saboolku) iibsado wax kharashaad ku soo kordhiya oo jeebkiisa dib wax uga doona.

Sidoo kale; Dabaqadda Dhexe waa shaqaalaha waaweyn ee qaata mushaharrada fiican. Waxa ay iibsadaan qaan iyo gashi ay moodayaan hanti, laakiin kharashaadkoodu uu iyaga iyo mushaharkooda fuulayo.

Sidaa darteed; akhri oo baro wax badan oo ku saabsan fahankaaga dhaqan-dhaqaale, taas oo aad iyada ka astayn karto, kana goosan karto midhaha xorriyaddaada maaliyadeed oo aad si ballaadhan ugu hawo qaadato xornimadaada dhaqaale, ugana xorowdo addoonimada mushaharka.

Jidka Maalintaada Xorriyadda Dhaqaale

Waa kalagoys kala leexinaya noloshaadii hore iyo tan maalintaa kuu billaabmaysa waana muuqaal dheer oo muhiim u ah noloshaada maalinta aad gaadhi doonto xornimadaada dhaqaale. Filo oo falanqee sidee ayaad ugu noolaan lahayd nolosha sida aad adigu doonto ma aha sida ay dadka kale kula doonayaan?

Maalinta xorriyaddaada maaliyadeed waa riyo aad u qurux badan oo macneheedu uu yahay in aad cadceedda isu dhigayso adiga oo fadhiya mid ka mid ah xeebaha aad u dalxiistay si aad ugu nasato. Waa adiga oo dhex wareegaya Maka iyo Madiina oo qaadanaya mid ka mid ah jawiyada ugu quruxda badan ee rooxaaniyadda leh.

Waxa aad maalintaa gaadhaysaa meelo badan oo ay kaa xannibtay gaadhitaankooda duruufta kugu xeerani, si ugu gaar yeesho waqti dheer oo aad Ilaahay SWT la xidhiidho.

Maalintaasi waxa ay kaaga dhigan tahay in aad ku raaxaysato in aad akhrido wax ku anfacaya, adiga oo ka raysanaya arrimo badan oo aad u daba carari jirtay si aad u soo gaadho maalintan.

In aad soo gaadho maalintani waxa ay kaaga baahan tahay in aad si weyn ugu kalsoonaato naftaada oo aad yeelato qorshe cad, aad yeelato fikir toolmoon

oo ku salaysan fahan dhaqan-dhaqaale oo xoojinaya, taageerayana madax bannaanidaada dhaqaale. Aan ku weydiiyo'e; waa maxay xorriyaddaada dhaqaale?

Ama waa maxay maalintaada madax-bannaanida dhaqaale?

Maalintaada madaxbannaanida dhaqaale waa maalinta aad hanti ahaan u haysato wax kuugu filan in aad u noolaato qaabka aad doonayso in aad u noolaato, adiga oo aan u baahan in aad shaqo tagto si aad lacag u soo shaqaysato. Ku kalsoonow in haddii aad doonayso in aad beddesho nolosha dadka kugu xeeran, ay lagama- maarmaan tahay marka hore in aad beddesho noloshaada.

Hadii aad doonayso nolol wanaagsan, waxa lagama-maarmaan ah marka hore in aad adigu tahay qof wanaagsan. Waxa kaa horreeyaa iyo waxa kaa danbeeya muhiim uma aha sida ay muhiimka u tahay waxa adiga naftaada ka imanaya ee go'aan iyo dedaal ahi. In badan oo dadka ka mid ahi waxa ay canaan dusha uga ridaan oo ay ka cawdaan cirka iyo dhulka, waxa ay eedeeyaan jawiga kulayl iyo qabow midka uu yahay tusaale ahaan, amaba maamulihiisa shaqada.

Mararka qaar waxa uu ku marmarsoodaa in uu ka dhashay qoys sabool ah, mar kalena aanu cid caawisa lahayn. Dhammaan waxyaabahaasi waa cudurdaarro aan waxba ka beddeli karin noloshiisa si kasta oo uu ugu

celceliyaba, waana xeerka aynnu ka baranaynno hadalka uu Ilaahay SWT ku yidhi:

﴿ إِنَّ اللَّهَ لَا يُغَيِّرُ مَا بِقَوْمٍ حَتَّىٰ يُغَيِّرُوا مَا بِأَنفُسِهِمْ ﴾ [الرعد : ١١]

Alle sarreeye waxa uu yidhi: (Alle ma beddelo golana illaa ay iyagu beddelayaan waxa nafohooga ku sugan).

Aayaddu waxa ay tilmaamaysaa in aanu Ilaahay SWT cidna beddelin illaa ay iyagu qaataan go'aanka isbeddelka. Marka ay noqdaan isbedel-doon ayuu Ilaahay SWT waafajinayaa waddada isbeddelka. Waxa ugu muhiimsan marka aad doonayso in aad horumartaa, waa in aad maalgashato naftaada ugu horrayn, oo aad iyada dhisto dhinac walba. Dhammaan dadka sameeyay hanti iyo isku-filnaansho iskood ahi, waa dad ka bilaabay horumarinta naftooda inta aanay wax kale isku hawlin. Waxa ay dadkaasi ka siman yihiin in ay wax akhriyaan, ama ay wax ka bartaan dadka ka aqoonta iyo khibradda badan.

Adigana waxa kula gudboon si aad u gaadho isku- filnaasho iskaa ahi, waa in aad waqtigaaga ugu badan ku qaadato horumarinta naftaada illaa aad noloshaada ka weydo waqti aad ku bixiso falanqaynta dadka kale. Naftaada waxa aad u diyaarisaa in ay xog badan ka hesho hantida, ganacsiga iyo maalgashiga. Mustaqbalkaaga u jeex barnaamij aad fuliso.

Haddii aad sidaa yeesho waxa aad si hubaal ah ugu kalsoonaataa in tagtadaada ay ka fiicnaanayso timaaddadaada, sannad walbana aad noqonayso mid ugu aqoon badan dhinacyada maaliyadda iyo horumarka sannadaha soo socda.

Innaga oo sii wadi doonna hab-fahanka dhaqan dhaqaalaha tolmoon oo qaabaynaysa noloshaada dhaqaale, aan isla eegno qodobbadan soo socda oo si guud iyo si gaar ahba saamayn weyn ugu leh noloshaada dhaqaale.

Qodobbo Muhiim kuu ah:

(A) Muhiimadda Ficilka iyo Waxqabadka

Waddada ugu habboon ee aynnu u mari karno qaabaynta nolosheennu waa in aynnu ka shaqaysiinno nafteenna oo aynnu meesha ka saarno fadhi ku dirirka iyo raaxo-jacaylka. Kala-duwanaashiyaha ka muuqda

natiijooyinka dadku ay ka helayaan shaqooyinka ay qabanayaan waxa ay ka dhalanayaan kala-duwanaashaha qaabka ay u qabteen shaqada hortooda taalla, marka la isbarbar dhigo sida aad u shaqaynayso iyo sida ay u shaqaynayaan dadka sida hawlkarka leh u shaqeeyaa.

Dulucda weedhu waa in aynnu xakamaynno ficilladeenna joogtada ah marka aan doonaynno in aynnu hoggaanka u qabano nolosheenna.

Waa maxay weedha adduunyada dhaqaajisaa?

Waxa laga yaabaa in aad la yaabto su'aashan, laakiin haddii aad garato jawaabta su'aashan, waxa aad haleelaysaa qiimaha ay leedahay kelmaddan dhaqaajinaysa adduunyadu, waana shaqo, ama waxqabad (action). Ammaanta loo jeedinayo dadka shaqaynaya ee wax gabanayaa waxa ay ku sugan tahay Quraanka kariimka ah.

Ilaahay Weyne SWT waxa uu yidhi:

﴿ وَقُلِ اعْمَلُوا فَسَيَرَى اللَّهُ عَمَلَكُمْ وَرَسُولُهُ وَالْمُؤْمِنُونَ ﴾ [التوبة: ١٠٥]

Alle sarreeye waxa uu yidhi: (Shaqeeya Ilaahay, rasuulkiisa ﷺ iyo muuminiintuba way arkayaan shaqadiinna'e.)

Hadalka aan wadanin wax ficil ahi waxba kama beddelo xaaladda nololeed ee lagu jiro, hadii aan lagu darin ficil iyo waxqabad. Himilada iyo riyooyinka quruxda badan ee qofka u muuqdaa waxa ay iska ahaadaan

dhalanteed iyo muuqaallo ku kaydsan maskaxda oo aan u soo bixin iftiinka shaqada iyo waxqabadka inta aan loo rogin waxqabad la taaban karo. Ilaahay Weyne wuu dhalleeceeyay gabyaaga, waayo; waxa ay ku tiraabaan wax aanay fulinayn oo aanay qabanayn.

﴿ وَأَنَّهُمْ يَقُولُونَ مَا لَا يَفْعَلُونَ ﴾ [الشُّعَرَاء : ٢٢٦]

Alle sarreeye waxa uu yidhi: (gabyaagu waxay yidhaahdaan wax aanay samaynayn).

Riyooyinka aanay la socon waxqabad iyo halgan waa himilada dadka saboolka ka ah nolol wanaagsan. Ninkii isdhigtaa dhashiisuu gadaa. Labalabaynta iyo go'aan-la'aantu waa labada caado ee dila fursad kasta oo ugub ah. Imisa fursadood ayaa kugu soo maray noloshaada oo aad walaac ka muujisay u-kicitaankooda iyo ka-faa'iidaysigooda, ka dibna aad raacday hirarka dabaylaha ee kala duwan?

Miyaanad arkaynin in badan oo dadka ka mid ah, waxaba laga yaabaa in uu yahay aabbahaa ama adeerkaa amaba isla adigaba, waxa uu xasuusanayaa waayo waayo, waxa uuna leeyahay:

"wallee dhulka jagooyinkiisa iyo boosaskiisu waxa ay ahaayeen mid aad u jaban, lacagna waan haystay waagaa, haddii aan berigaa iibsan lahaa waxa aan maanta noqon lahaa dadka malaayiinta haysta!"

Hadalkaasi waa sax ! in isbadalka noocaas ahi yimaadana waxa u sal ahaa laba arimood:

- In aanay jirin wax kalsooni maalgashi ah oo ku saabsanaa maalgashiga dhulka.
- Tan kalena waa dib udhigga, werwerka, walbahaarka, iyo in aanay jirin qorshayaal cadcad oo maaliyadeed oo qofkaasi uu lahaa.

Miyaanad xasuusan in aan hore u soo marnay in 2% keliya oo dadka ka mid ahi ay fikiraan, fuliyaanna wixii ay ka fikirayeen, halka ay 3% moodayaan in ay fikiraan, waxba se aanay samayn ama aanay isku dayin fulinta wixii ay ku fikirayeen, halka 95% ay ka doorbidayaan fikirka in ay dhintaan! haddaba, adigu qaybtee ayaad ku jirtaa?

Weli se hore ma u maqashay maahmaahda ah dameeri dhaan raacday?" waa maahmaah dulucdeedu ay tahay in dadka badankiisu ay iska raacaan xaaladda hadba inta ku xeerani ay iskaga jirto, isaga oo aan tiisa gaarka ah qiimaynayn, una fikirayn. Haddaba waxaas oo caddaymo ah dabadeed, haddii aad doonayso guul waxku-ool ah, hadalkaaga iyo fikirkaagaba ku xidh ficil iyo waxqabad, iskana jir dibudhigga iyo

meermeerka, waa labada shay ee dila furasadaha rejada muuqata. Waxa aynnu ku daraynaa intaas, in saamayn weyn

ay ku yeelan doonto waxqabadkaaga hadba inta aad joogtayso ee aad caado uga dhigato sannadaha soo socda ee noloshaada. sidaa darteed ayaynu wax uga tilmaami doonnaa muhiimadda ay caadooyinkaagu kugu leeyihiin marka aad ku socoto waddada xorriyadda dhaqaale.

(B) Mudnaanta Caadooyinka

Dadku waxa ay noqdaan hadba sida ay caadadoodu tahay, caadooyinka qofka ayaana badanaa jaangooya nooca uu u ekaanayo mustaqbalkiisa danbe. Weedhaha la falgelaya noloshaada maanta iyo berriba waa natiijada ururkii ka soo uruuray sooyaalkaagii nololeed maalintii aad dhalatay illaa maanta oo aad joogto.

Weedhaha wanaagsan ee dhiirrigelinta leh ama aan wanaagsanayn ee aad kala kulantay waalidkaagii iyo intii kugu xeernayd, muddo ka dib waxa ay noqonayaan qayb ka mid ah waxyaabaha aad ka aaminsan tahay dadka iyo nolosha.

Buugaagta aad akhrido, muuqaallada aad daawato, dadka aad la falgasho badanaa, iyo degaanka aad isku xeertaa hadba waxa ay qaabeeyaan caadooyinkaaga nololeed oo ay ka samaysanto noloshaada dhabta ahi. Waxa markhaati-ma-doon ah in aad ka aaminsan tahay qof dadka ka mid ahi in aanu noqon karin qof dhaqaale ahaan madaxbannaan marka la eego dhaqamadiisa shakhsiga ah, sida haddiiba uu yahay mid waqtigiisa ku lumiya waxa aanay faa'iido uga soo laabanayn, ama uu yahay qof ku mamay oo ku nool deymaha iyo shaxaadka, iyo haddii uu yahay dadka qadderka sida qaldan u daliishada

ee yidhaahda "wixii Ilaahay keeno ayaa imanaya" isla markaana daadaadiya hantida diintu ay fartay in la ilaaliyo ama uu yahay qof waxaaan waxbaba ka kaydsan waxa soo gala haba yaraato'e. Sidaa darteed waxa la yidhaahdaa: "haddii aad doonayso mustaqbalka qof in aad eegto, waxa keliya aad u fiirsataa caadooyinkiisa, marka aad eegto caadooyinkiisa kuu suuragalaya in aad odorosto mustaqbalkiisa."

Sidaa darteed ayaa loo yidhaahdaa: "wanaagga midhaha waxa laga gartaa biqilkooda hore." Caadooyinkaaga iyaga ayaa qaabeeya mustaqbalkaaga. Haddii aad doonayso in aad yeelato mustaqbal

iftiimaya ee aad u hanqaltaagayso oo aad doonayso, samee liis aad ku qorayso dhammaan caadooyinkaaga maalin laha ah, ka dib kobci caadooyinkaaga kuwooda wanaagsan, halka aad ku dedaalayso in aad meesha ka saarto caadooyin kasta oo dib kuu dhigaya.

Haddii aad doonayso in aad ku noolaato mustaqbalka aad doonayso in aad ku noolaato nolosha aad ku riyoonayso, waa in aad jebisaa muraayadda aad ka dhex aragto caadooyinkaaga aan wanaagsanayn ee kula hadhaya, taasina waxa ay ka dhigan tahay in aad qaadatay go'aan

xawaarihiisu uu yahay 180 KM, si aad u beddesho dhammaan caadooyin kaaga liita. Mar kale waa in aad ogaataa in shaqooyinkaaga maalinlaha ahi ay aayar aayar u qaabeeyaan dhismaha qofnimadaada iyo nooca aad noqonayso maalmaha soo socda, waxana hore looga cabbiray weedha odhanaysa:

- Marka aad fikrad beertaba waxa aad goosanaysaa shaqo.

- Marka aad shaqo goosatana waxa ka dhalanaya shaqadaas aad qabato caado.
- Marka aad caado beeratana waxa aad goosanaysaa shakhsiyad.
- Marka aad shakhsiyad goosatana waxa aad beeranaysaa mustaqbalkaagii. Warka oo koobanina, waa caadooyinkaaga ayaa qaabeeya mustaqbalkaaga.

Caadooyinka Guuleystayaasha

Dadka guuleysta dhaqamadooda waxaa ka mid ah, in ay sameeyaan marar badan wax aanay jeclayn. Muxuu yahay macnaha ku jira weedhani? Dulucda weedhani waxa ay inoo tilmaamaysaa in aynnu ka shaqaynno waxa aynnu ku gaadhi lahayn yoolka aynnu rabno, haba ahaado jidka aan u sii maraynno yoolkeennaasi mid aynaan jeclayn'e.

Yoolkaa aynnu hiigsanaynaa waxa uu inooga baahan yahay in aynnu joogtaynno waddada ina gaadhsiinaysa, haba noqoto waddo aanay naftu jeclaysanayn'e. Tusaale ahaan; dadka guuleysta ee soo jabay waxa ay dhinac walba kaga duwan yihiin dadka kale, marka laga eego sida ay ula dhaqmaan waqtiga, lacagta iyo nolosha qaybeheeda kaleba. Dadka

guuleystaa waxa ay asteeyaan oo ay tilmaamaan ujeeddooyin iyo yoolal ay rabaan in ay gaadhaan, waxana ay qorshe u dhigaan sidii ay halkaa kugaadhi lahaayeen. Dadka guusha nolosha ka sameeyay waxa noloshooda ka mid ah in ay maalin walba wax akhriyaan, dhammaan aqoonta qaybaha kala duwan, gaar ahaan aqoonta ka caawinaysa ujeeddooyinka ay rabaan gaadhiddooda. Dadka guuleystaa waxa ay isweydiiyaan su'aalo ay ka mid tahay, waa maxay waxa ay habboon tahay in aan ku noqdo foolaad dadka kale kaga horreeya, si aan ugu gaadhi karo yoolalka aan nolosha ka hiigsanayaa?

Dadka guuleystaa waxa ay leeyihiin hammi iyo go'aan aad u sarreeya iyo kalsooni ay naftooda ka qabaan, taas oo ka kaxaynaysa habfikirka

wanaagsan ee kelida ah, taas oo u beddelaysa go'aan iyo dhaqaaq, kana kaxaynaysa xiisaha keliya oo u kaxanaysa waxqabad lataaban karo. Dadka dhaqaale ahaan u guuleysta waxa ku lammaan aqoon ka soo burqanaysa naftooda oo ka dhigaysa kuwo la halgami kara culaysyada

nolosha kaga imanaya. Haddii uu khasaaro lacag ama mashruuc sabab keentayba waxa uu leeyahay dhabar'adayg iyo fahan dhaqan-dhaqaale oo uu kaga gudbi karo dhibaatooyinka, oo inta uu eber ka soo bilaabo uu

tallaababa tallaabo u soo gaadho halkii uu hore u joogay iyo meel ka sii wanaagsanba. Waxa ay u arkaan guuldarrooyinka nolosha kaga imanaya mid ka dhalanaysa aqoon ka maqnayd, waxana ay isku dayaan in ay wax

ka bartaan wixii ka qaldamay, waxana ay u noqotaa sallaan ay si degdeg leh ugu fuulaan waddada guusha. Waa kuwaas dadka nolosha guusha ka gaadha. Adigu haddaba maxaad samaynaysaa si aad uga mid noqoto dadka nolosha ku guuleystay?

Dadka guuleystay waxa ay tixgeliyaan waqtiga. Haddaba aan isla eegno muhiimadda waqtiga.

(B) Mudnaanta Waqtiga

Muxuu kaaga dhigan yahay waqtigu adiga? Waxa uu yidhi nabigeennii suubbanaa (S.C.W). "ka hordhaqaaqi maayaan labada lugood ee qofku maalinta qiyaame Ilaahay hortiisa ilaa la weydiiyo afar arrimood: jidhkiisii cusbaa waxa uu ku soo gaboojiyay, da'diisii waxa uu kusoo dhameeyay, xoolihiisii halka uu ka soo shaqaystay iyo halka uu ku bixiyay, iyo cilmigii uu bartay waxa uu kaga dhaqmay" Ma u diyaarsatay su'aal kasta oo ka mid ah su'aalahaas wax jawaab ah?!

Halkan waxa aynnu isyara dultaagi doonnaa waa cimrigaagii maxaad ku soo dhammaysay?

Waa maxay da'du?

Waa maxay waqtigu?

Waa maxay se noloshu guud ahaan?

دَقَّاتُ قَلب المَرءِ قائِلَةٌ لَهُ إِنَّ الحَياةَ دَقَائِقٌ وَثَواني

فَارفَع لِنَفْسِكَ بَعدَ مَوتِكَ ذِكرَها فَالذِكرُ لِلإِنسانِ عُمرٌ ثاني

"Garaaca wadnuhu waxa uu qofka u sheegaa in noloshu ay tahay daqiiqado iyo ilbidhiqsiyo, ee waari mayside war ha kaa hadho, warkaasi waa cimri labaad'e.”

"Cimrigaagu waa tirada daqiiqadaha, saacadaha, maalmaha, iyo sannadaha aad soo noolayd. Waxa halbeeg u ah cimrigaaga oo dhammi waa wadarta guud ee daqiiqadaha aad soo noolayd. Haddaba, ma wanaajisay qaabka aad uga faa'iideysatay?

Maxay kaa dhibtaa haddii lumitaanka waqtigu uu ku kooban yahay keliya wixii ku dhaafay noloshan gaaban.

Waxa danbeeya ayaa ah in ay danbayso maalin carruurtu ay ciroobi doonto oo lagaa warsan doono "daqiiqadihii cimrigaaga maxaad ku soo dhammaysay?" Waana arrin mudnaanteeda leh oo weyn. Waqtiyada qofka Muslinka ah waxa buuxdhaafiyay ilbidhiqsiyada xasuusinaya mudnaanta waqtiga. Bal eeg salaadaha shanta ah ee nidaaminaya waqtiyada habeenkii iyo maalintii. Bal eeg bisha Ramadaan, iyo xajka iyo ciidohooga, dhammaantood waa xilliyo ku tusinaya mudnaanta waqtiga iyo soo-dhammaadka maalmo iyo sannado kala duwan. Waxa jira xaqiiqooyin xidhiidh la leh waqtiga oo ay muhiim tahay in aad ogaato, xaqiiqooyinkaasna waxa ka mid ah:

- Adiga ayaa xaddidi kara qaabka aad uga faa'iideysan karto waqtiga noloshaada kugu soo mara.
- Adigu waxa aad ku caddaysaa mabda'yadaada nolosha iyo waxyaabaha aad ku qanacsan tahay hadba sida aad waqtigaaga u qaadato iyo waxa aad ku qaadato ama aad la qaadato waqtiga.
- Isku-soo-wareegga waqtiga noloshaada waxa aad qaadataa silsilad heshiisyo ah oo kala duwan oo si toos ah ugu soo noqonaysa noloshaada.
- Waqtigaagu waa hantidaada ugu qaalisan, isla markaana aan marnaba la kaydin karin. Waqtiga waa la bixiyaa keliya ee lama kaydiyo.

Sidaa darteed adigaa ka masuul ah waqtigaaga, isla waqtigaaga ayuun baadna ku samaynaysaa mustaqbalkaaga. Isla aragtidan aniga oo dhex mushaaxaya waxa aad ii cajab-geliyay weedh wanaagsan oo odhanaysa: Daqiiqaddiiba tasbiix beero, Daqiiqaddiiba fikrad beero,

Saacaddiina shaqo beero. Innaga oo ka hadlayna hantida, waqtigu waa waxa ugu muhiimsan, waana hantida ugu qaalisan ee aad haysato si aad u qiyaasi karto kor-u-kaca noloshaada.

Dad badani waxa ay isticmaalaan kelmadda "maamulka waqtiga" iyada oo xaqiiqadu ay tahay in waqtiga aan la maamuli karin. Dhab ahaan waxa la maamulayaa waa waxa aynnu awoodi karno in aynnu u jihaynno sida

aynnu doonno. Ogaalka aynnu ognahay in waqtigu uu socdo, habeenka iyo maalintuna ay soconayaan, ma jiro waqti aynnu maamulnaa, waayo; waqtigu wuu ka baxsan yahay awooddeenna. Haddaba, maxaad samayn kartaa?!


Waxa aad samayn kartaa waa in aad maarayso dhacdooyinka iyo waxyaabaha waqtiga dhexdiisa dhacaya. Waxa aad awood u leedahay in aad odorosto oo aad qiyaasi karto mustaqbalka qofka marka aad u fiirsato hadba qaabka iyo meesha uu kaga faa'iideysto.

Dheerida waqtiga iyo gaabnaantiisu muhiim uma aha sida ay muhiimka u yihiin waxyaabaha aad qabanayso waqtiga aad haysato. Dadka nolosha ku guuleystay waxa ay u arkaan waqtigu in uu yahay hantida ugu mudan ee ay haystaan, markaasay u jeestaan ilaalinta saddex arrimood oo muhim ah si ay uga faa'iideeyaan waqtiga faa'iido mug leh:

Waxa ay ilaaliyaan waqtiyadooda, umana oggolaadaan in ay sinaba ugu bixiyaan wax aan waxtar u lahayn waqtigooda.

Waxa ay ka ilaaliyaan waqtiyadooda in ay soo dhex galaan dadyowga kale, isla markaana waxa ay udhaqaaqaan in ay ku dhex shaqeeyaan

waqtiga iyada oo ay u muuqato yoolka ay doonayaan in ay ku xaqiijiyaan shaqadaasi. Waxa ay ogsoon yihiin in fikraduhu ay dhaliyaan dareen, dareenkuna uu dhaliyo ficil iyo waxqabad, ficilladuna ay dhaliyaan natiijooyin kala duwan, waxana loo dhigi karaa aragtidaas sidan:



Guuleystayaashu waxa ay kaga faa'ideystaan waqtiyadooda kala duwan shaqooyinka maalinlaha, iyaga oo hadba u kala horraysiinaya sida ay mahuraanka ah u kala yihiin, illaa ay ka dhammaadaan shaqooyinka u yaalla oo dhammi. Waxa ay dareensan yihiin in dib u-dhigga shaqada

maanta iyo meermeerintu ay tahay tuugga dhabta ah ee kaa xadaya fursadaha. Waqtigu waa hantida ugu muhiimsan ee noloshooda. Waxaba la odhan karaa, shayga nolosha ugu qaalisani waa waqtiga. Haddaba; maxaad adigu samaynaysaa si aad uga dhigto hantidaas mid u adeegaysa dantaada gaarka ah?

(C) Dadaalkaagu Muhiimadda uu u Leedahay Naftaada

Noloshaadu waxa ay soo bilaabantay waqti aanad adigu wax door ah ku lahayn, waxana laguugu abtiriyay labada waalid ee ku dhalay, waxana laguu bixiyay magac aanad adigu wax door ah ku lahayn.

Illaa intee ayaad ku sii soconaysaa jidka nolosha aanad adigu wax kelmad ah ku lahayn, ee aanad wax aragti ah ku lahayn waxa

noloshaada dhexdeeda ka dhacaya?

Noloshaadu waxa ay bilaabantay waqti, ma ku dulsugan tahay waddada saxan?

Noloshaadu qaabka ay u socotaa ma waafaqsanyahay sidii aad ka doonaysay nolosha?

Maalin kasta oo cusubi waxa ay fursad cusub kuu siiyaa sidii aad u bilaaban lahayd nolol cusub oo u qaabaysan sida, aad doonayso. Haddaba; maxaad uga tegaysaa ee aad u dayacaysaa fursadda ku jirta maalinka cusub ee kuu dhalanaya?

Waxa kula gudboon in aad ogaato in qaabka noloshaadu ay noqonaysaa uu ka muhiimsan yahay in badan waxa aad heli doonto ee ah hanti ama maamuus. Sidaas darteed; su'aasha ay mudan tahay in aad isweydiiso ayaa ah, maxaad noqonaysaa adigu mustaqbalka dhow?

Waayo; waxa aad noqonayso ayaa saamayn ku leh waxa aad heli doonto. Waxa kula gudboon in aad ogaato, si aad u beddesho waxa kugu xeeran oo dhan, in ay waajib tahay in aad beddesho waxa gudahaaga ka oogan, sida fikradahaaga iyo dhaqankaaga. Haddii aad raacdaynayso horumar dhab ah, waxa kugu waajib ah in aad inta aad geliso shaqadaada.

Si aad u hesho waxa aad haysato wax ka badan, waxa waajib ah in aad naftaada ka dhigto mid ka sarraysa halka ay taagan tahay hadda. Ma akhriday weli xeerka Isxaac Newton ee falka iyo falcelinta, oo dhigaya in fal kastaaba uu leeyahay fal celin le'eg hadba inta uu le'eg yahay qadderkiisu, isla markaana uu kaga duwan yahay jihadiisa. Taasi waa cilmiga Fiisigiska, laakiin dhanka noloshaada gaarka ah iyo nolosha qof kastaba, waxa suuragal ah in loo dhigo qaab kale oo ah, fal waliba waxa uu leeyahay cidhib danbeedkiisa.

Innaga oo ka anbaqaadaynna taas, weli ma maqashay waxa ay dhigayso qaaciidada kale ee odhanaysa, 90%/10%, oo dulucdeedu ay tahay in 10% waxa ku soo biraya noloshaadu ay ka yimaadaan dhinaca dadka kale, halka 90% waxa noloshaada ku soo biirayaa uu ka yimaaddo waxa aad adigu qabato hadhka labadiisa galin ee aanay cid kale waxba kaaga iman.

Taasi maxay ka dhigan tahay?

Waxa ay ka dhigan tahay, in aanad maamuli karin adigu 10% waxa ku soo biraya noloshaada ee arrimo kala duwan ah. Tusaale ahaan; adigu ma awoodi kartid in aad maamusho in uu kugu soo gaadho isla ballankii aad qabsateen saaxiibkaa oo kaa soo habsaamay, adiguna aad sugaysay. Sidoo kale; adigu ma astayn kartid waqtiga geeridaada iyo noloshaada, iwm. Sidaa liddigeeda; waxa aad awooddaa 90% falcelintaada, waxana aad maamuli kartaa waxa kugu dhacaya noloshaada.

Tusaale ahaan; marka uu saaxiibkaa ka soo habsaamay ballanka aad la lahayd, waxa aad samayn kartaa in aad iska sugto oo waqtiga wax kale aad kaga sii faa'ideyso. Waxa kale oo aad awooddaa in aad ballankaba baajiso oo aanad qaabilin, maadaama uu ballankii ka dib dhacay. Sidoo kale; geeridaada ma maamuli kartid, laakiin maanta waxa aad u shaqaysan kartaa sidii mid berritoole dhimanaya oo kale. Dhimashadu ma aha mid la doorto, ee waa mid aad ku xukuman tahay, sida noloshaba aad ugu xukuman tahay. Ilaahay SWT waxa uu yidhi;

﴿ كُلُّ نَفْسٍ ذَائِقَةُ الْمَوْتِ ﴾ [آل عِمْرَان : ١٨٥]

Alle sarreeye waxa uu yidhi: (naf kastaaba way dhadhamin geerida).

Booska aad ka taagan tahay nolosha oo aad geerida kula kulmi doontaa muhiim uma aha sida ay muhim u tahay in geeridu ay kuu timaaddo adiga oo dariiqa saxda ah cagta ku haya. Sidaa darteed; waxa kula gudboon inaad naftaada weydiiso su'aalahan soo socda:

Booska aad ka taagan tahay nolosha oo aad geerida kula kulmi doontaa muhiim uma aha sida ay muhim u tahay in geeridu ay kuu timaaddo adiga oo dariiqa saxda ah cagta ku haya. Sidaa darteed; waxa kula gudboon inaad naftaada weydiiso su'aalahan soo socda:

- Kuma ayaan ahay anigu?
- Qof noocee ah ayay habboon tahay in aan noqdaa siaan u fuliyo waxa aan doonayo?
- Booskee ayaan taaganahay maanta?
- Booska aan taaganahay maxaan u taaganahay?
- Halkee ayaan u socdaa?
- Maxaan naftayda ka rabaa oo aan naftayda u rabaa?
- Ma ku suganahay jidka saxan?
- Waa maxay ujeeddada aan ka leeyahay nolosho?
- Ma u dhigay naftayda ujeeddooyin xaddidan?
- Waa maxay ujeeddooyinkaygu?
- Intee in le'eg ayaan ka fuliyay ujeeddooyin kaygaas?
- Ma u horumariyaa naftayda si joogto ah si aan u gaadho yoolkayga?
- Intee in le'eg iyo qaab noocee ah ayaan uga falceliyaa waxa igu dhacaya noloshayda?

Si joogto ah waa in aad uga shaqaysaa naftaada sidii aad u horumarin lahayd, illaa aad ka weydo waqti aad ku bixiso dadka kale noloshooda iyo wax ka sheegoodaba. Waxa aad ka ka helayso xaqiijinta yoolashaada nololeed aad ayay uga yar yihiin waxa ay dhab ahaan ku sugnaanayso noloshaadu, noloshaada ayaana ah tan muhiimka ah.

Waxa jirta weedh aad ii saamaysay oo in badan aan ka fekeray oo aan jecelahay in aan adigana kula qaybsado, waxa ayna leedahay: "shakhsiyaddaada u hagaaji aniga dartay, si aan aniguna kuugu hagaajiyo shakhsiyaddayda adiga dartaa" Sidaa waxa kugu tidhaahda naftaada.

U fiirso weedhan oo xasuusnow halka aad ka taagan tahay nolosha marka aad la kulmayso geerida,muhiim ma aha maadaama aad ku sugan tahay waddada saxda ah,waqtigaaga oo dhan iyo qaybaha noloshaada oo dhan. Xasuusnow hadalka Ilaahay SWT ee ah:

﴿ كُلُّ نَفْسٍ بِمَا كَسَبَتْ رَهِينَةٌ ﴾ [المُدَّثِر : ٣٨]

Alle sarreeye waxa uu yidhi :(naf kastaaba waxay fashay ayaa loo haystaa qiyaamaha)

Naftaadu waxa ay kugu leedahay xaq, Rabbigaana waxa uu kugu leeyahay xaq, xaqa uu Rabbigaa kugu leeyahay waa in aad u caabuddo si cilmi ku dhisan inta geeridu ay kaaga imanayso. Xaqa ay kugu leedahay naftaadu waa hadiyadda ugu qaalisan dunida in aad u hadyayso, oo ah in aad naftaada ugu roonaato danteeda wixii adduun iyo aakhiro anfacaya, oo aad ka xorayso addoonnimada maaddada qaab ay ahaataba, oo aad u baxdo addoonnimada dhabta ah ee aad addoon u tahay Allaha Rabbiga u ah caalamka oo dhan. Si aad u gaadho ujeeddadaas, waa in aad astaysaa maalinta xorriyaddaada dhaqaale, waana in aad samaysataa qorshihii aad ku gaadhi lahayd halkaas, si aad u noolaato adiga oo xor ka ah culaysyada nolosha iyo addoonsiga mushaharka, adiga keligaa ayay ku saaran tahay masuuliyadda gaadhidda hammigaaga ama la

Noolaan shaha wahsiga iyo isdhiibiddu. U fiirso hadda hadalka Ilaahay SWT:

قال تعالي: ﴿وَيَزِيدُ اللَّهُ الَّذِينَ اهْتَدَوْا هُدًى ﴾ [مَرْيَم : ٧٦]

وكذالك قوله تعالى : ﴿فَلَمَّا زَاغُواْ أَزَاغَ اللَّهُ قُلُوبَهُمْ ﴾ [الصف : ٥]

Alle sarreeye waxa uu yidhi: (Alle wuxuu u kordhinayaa kuwa hanuuna hanuun kale). waxa kale oo Alle sarreeye yidhi: (markii ay leexdeen ayaa Ilaahayna qalbiyadooda leexiyay).

Labada aayadood waxa ay kala tilmaamayaan in qolada horena ay doorteen hanuunka oo waddadiisa ay mareen, ka dibna Ilaahay uu hanuuniyay kuwa kalena ay leexdeen, Ilaahayna uu quluubtooda leexiyay.

Labada aayadoodba waxa ay tilmaamayaan in abaalmarintu ay ka dhalatay qofka iyo waxa uu kaga jawaabo xornimada uu Ilaahay siiyay ee aanu khasbin. Kaalay hadda ila dhugo sheekadan inagu boorrinaysa muhiimadda ay leedahay joogtaynta horumarinta naftaadu, sheekadaas oo ku xusan buugga “You Have to Win” ee Shiv Khera [12]: "Tafaxaydo, guntigana dhiisha iskaga dhig. Waxa uu ka shaqaynayay John shirkad muddo shan sano ah isaga oo ka shaqayn jiray jarjaridda looxa, laakiin ma aanu helin wax mushahar-kordhin ahoo dhan.

([12]) Shiv khera waa qoraa hindi ah oo can ah waxa uu ku caan baxay arrimaha dhiirrigalinta. waxa uu ku dhashay 1961 dii magaalada Delhi ee wadanka Hindiya. Shiv Khera waa mid kamid ah shakhsiyaadka hormuudka ka ah horumarinta shakhsiyad ahaaneed iyo dhiirrigalinta ee hindiya iyo adduunka ahoo dhan. Shiv Khera waxa uu caan ku yahay buugaagtiisa iyo muxaadarooyinka sida buugiisa: "You Can Win," kaas oo gaadhay guulo waaweyn oo noqday mid ka buugaagta loogu iibsiga badan yahay Hindiya. Waxa kale oo uu qoray buugaag kale oo badan oo diiradda saaraya arrimaha horumarka shakhsi ahaaneed iyo guusha nolosha.

ama horusocod ah marnaba. Shirkaddu waxa ay soo shaqo galisay nin kale oo lagu magacaabo Bell oo isla markiiba loo kordhiyay mushaharradii sannad gudihiiba. Arrintani waxa ay feker iyo u-qaadan waa ku dhalisay john waxana uu u tegay maamulihii shirkadda oo weydiinaya sida ay ku dhacday arrintani.

Waxa uu ku yidhi maamulihii: 'shaqadaadu ma laha wax horusocod ah, oo shanta sano ee aad shirkaddan ka shaqaynaysay waxa aad goysaa looxa isla intii, waxna ma soo kordhisid, shirkaddayaduna waxa ay qiimaysaa oo ay wax ku kodhisaa waa hadba inta uu le'eg yahay wax soo saarka qofku."

John waxa uu ku noqday shaqadiisii, waxana uu isku deyay in uu dedaal kordhiyo. Saacado badan oo uu dedaalayay haddana waxba uma aanay kordhin! John waxa uu ku noqday maamulkii shirkaddiisa, waxana uu uga warramay mushkiladdiisa. Maamulihiina waxa uu kula taliyay in uu la tashado ninka kale ee Bell, “laga yaabaa in uu og yahay ninkaasi wax aynaan ogayn adiga iyo aniga midkeenna'e!"

Waxa uu weydiiyay John ninkii Bell, sida uu u gooyay geedahan badan ee uu gooyay?

Bell waxa uu ugu jawaabay: "mar kasta oo aan jaro geed waan yara nastaa oo gudintayda ayaan afaystaa, ee adigu goorma ayaa kuugu danbaysay in aad afayso gudintaada?!"

Waxa uu ogaaday John in aanu in muddo ah afaynin gudintiisa, mushkiladdiisuna ay tahay cusboonaysiin-la'aan.

Haddaba; adiga aan ku weydiiyo'e, sidee ayaad isku tihiin cusboonaysiinta?

- Ma is cusboonaysiisaa?
- Muxuu ahaa buuggii u danbeeyay ee aad akhriday?

- Maxay ahayd muxaadaradii u danbaysay ee aad kafaa'ideysatay?
- Buugaagta noocee ayaad jeceshahay?Maxay ahayd dawradii ama tababarkii u danbeeyay eaad qaadatay?
- Waa kee buugga aad hadda doonayso in aad akhriday?

Su'aalahani waa kuwo lafdhabar u ah horumakaaga. Inta aanay jawaabahaagu ahayn kuwo qumman oo dhanka horumarka kuu dhoweynaya, waxa aad u baahan tahay sidii aad hore ugu socon lahayd.

Maalinta Xornimadaada Dhaqaale

Dhab makaa tahay xaqiijinta maalinta xorriyaddaada dhaqaale? Markii aan isku habaynayay xogta buuggan, waxa aan soo xusay buugaag tiro badan oo saamayn wanaagsan ku yeeshay koboca aragtiyahayga maaliyadeed iyo is beddelka waxyaabo badan oo aan ka aaminsanaa lacagta, hantida iyo qaabnololeedka.

Aan ku weydiiyo su'aalo dhawr ah:

Ma kaydsatay mid ka mid ah buugtii aan soo xusay?

Weli se ma ku fikirtay in aad kaydsato?

Haddii aad su'aasha hore kaga jawaabtay "haa", dhab ahaan waxa aad tahay qof dedaal leh, waxana aad leedahay tilmaamaha isbeddel-doonka, waxana aad xaqiijin doontaa mar uun xaqiijinta xorriyaddaada maaliyeed marka aad riyadaadaas ficil ku darto.

Haddii se aanad weli soo qaadan hal buug oo ka mid ah kuwa aan soo sheegnay ama wax la jaad ah, waxa aad u baahan tahay isla xisaabtan dhab ah oo aad naftaada la yeelato, waa haddii ay kaa go'an tahay in aad maalin uun gaadho xorriyad dhaqaale'e.

Xaqiiqada dhabta ahi waxa ay tahay, in aanay waxba ku kala duwanayn qofka wax u bartay si uu wax u akhriyo haddana aan akhriyin, iyo qof aan waxba baran oo aan waxbaba akhrin karin markiisa horeba, labadaba natiijadoodu waa in aanay waxba akhriyin.

Ilaahay SWT waxa uu abuuray aadamaha, waxana uu kaga soocay noolaha kale ee uu uumay waa caqliga,

waxana uu ugu daray nimcada caqliga xornimada iyo in ay waxa ay doonaan kala dooran karaan. Qof kasta oo aadame ah waxa la siiyay noloshiisa laba doorasho. Labada doorasho tan hore waa in aad gaadho halka ugu sokaysa ee aad gaadhi karto, in aad hesho waxa ugu yar ee aad shaqaysan karto, ku noolaato inta ugu yar, akhrido inta ugu kooban,

fekerto inta ugu yar, oo' aad doorato joogtayn-la'aanta, aad u leexato caajisnimada iyo dibudhaca, aad raalli kaga noqoto wax yar waxa badan ee Ilaahay uu uumay, in aad iska riyooto ficil- la'aan, in aad Ilaahay SWT ku yididiilooto yididiilo madhan.

Dhammaan doorashooyinkaas oo idili waxa ay ku gaadhsiin doonaa nolol madhan oo haawanaysa oo ka madhan in aad tahasho oo aad doonto sida asaaggaa ay u dooneen nolol sare oo sharaf leh. Raalli ma ku tahay doorashada nolosha noocan ah?!

Doorashada labaadna, waa in aad noqoto kasoo- horjeedka dhammaan doorashooyinka aan ku soo sheegnay doorashada koowaad oo aad noqoto wax kasta oo ay suuragal tahay in aad noqoto. In aad si joogto ah

wax u akhrido oo aad kobciso aqoontaada maaliyadeed, in aad shaqaysato qadderka ugu badan wax kasta oo aad shaqaysan karto, in aad siiso ka hor inta aanad adigu qaadan, in aad wadaajiso dadka kale waxa aad helayso, in aanad u noolaan naftaada oo keliya, iyo in aad dedaasho oo waxsoosaarkaagu uu noqdo wax kasta oo aad soo saari karto. In aad shaqayso ama aanad shaqayn, in aad ahaato ama aanad ahaan, in aad noqoto xagga sare ama xagga hoose,

taasi waxa ay ku xidhan tahay doorashadaada Ilaahay uu ku siiyay, ee adigu maxaad dooran?

Si aad u gaadho maalinta xorriyaddaada maaliyadeed, ma ka tegaysaa shaqadaada?

Sooyaalka dadka xorta ah weligii laguma xardhin wax la yidhaahdo "kedis" iyo "kusoo-booddo", ee waxa lagu xardhay in ay ku gaadheen waxa ay gaadheen rabitaankooda.

Buuggan dhexdiisa waxa aan ku soo xusnay wixii dhex maray saaxiibbo shaqo-wadaag ah, gaar ahaan su'aasha mid kasta oo ka mid ah la weydiiyay oo ahayd, goorma ayaad ka tegaysaa shaqadaada aad hayso hadda?

Ama se, goorma ayaad gaadhaysaa xorriyaddaada dhaqaale ee aad ka xoroobaysaa addoonnimada mushaharka?

Jawaabtoodu waxa ay ku kulantay in mid kasta oo ka mid ahi uu ku jawaabay in aanu ka tegayn shaqadiisa ee uu iska sii haysanayo mushaharkiisa kooban ee uu addoonka u yahay, illaa inta uu ka gaadhayo da'da hawlgabka, waa 60 jirka'e! Haddaba, Maxay ka Dhigan tahay Arrintani?

Waxa ay ka dhigan tahay in inta uu qofku ka gaadhayo hawlgabka uu ku qanacsanaado xaaladdiisaa uu ku jiro. Waxa uu ka imanayaa in aanu haysan wax riixa oo noqon kara laba arrimood midkood, ama labadaba oo si wadajir ah u kulma, waana: In aanu jirin wax yool ah oo uu nolosha ka leeyahay qofkaasi.Iyo dareenka cabsida ah ee maganta uu uga yahay shaqada uu hadda hayo.

Laakiin aan ku weydiiyo'e, waa maxay dammaanadda aad u haysato in aad joogtayso shaqadaada, si aad isugu dhejiso illaa inta aad ka gaadhayso hawlgabkaaga?

Jawaabta iska muuqata ee aad bixin kartaa waa "hubanti-la'aan", in aanad wax dammaanad ah oo lagu kalsoonaan karo u haysan in aad sii wadayso shaqadan.

Sidaa liddigeeda, go'aanka ah in aad sii haynayso shaqadani waa ku-nasiibin aan sinaba loo hubin, gaar ahaan dadka ku tiirsan mushaharka keliya, si ay ugu maareeyaan baahiyohooga kala duwan ee nolosha.

Waxa kale oo la weydiiyay saaxiibada shaqadu ay ka dhexaysay su'aashan kale ee odhanaysa: "hadiiba aad uga tagto shaqadaada sabab uun, waxa ay doonto ha ahaato'e, imisa maalmood ama sannadood ayay kugu fillaanaysaa waxa aad kaydsatay, si aad u maarayso baahiyaha noloshaada ee kala duwan?

Jawaabtoodu se waxa ay noqotay mid kala duwan, midkoodna uma ay caddayn in uu naftiisa weydiiyay su'aashan, ama uu wax qorshe ah haba yaraato'e uga fikiray waxa dhici kara maalinta berri ah!

Aniguna waykan. Waxa aan ku weydiinayaa isla su'aassha lafteeda. Haddii aad shaqada uga joogsato sabab uun, intee ayay ku sii wadi karayaan waxa aad haysataa?

Waxa aan kugula talinayaa in aad soo qaadato warqad iyo qalin oo aad isku xisaabiso imisa maalmood ama bilood ayay ku sii wadaysaa waxa aad haysaa?

Haddaba; aynnu isla eegno sida uu ugu noolaan karo qof shaqaale ahi waxa uu haysto ee hanti ah, illaa imisa bilood ugu badnaan. Ka soo qaad in Faarax uu noolaanayo 45 sano oo u dhiganta 540 bilood Waxa uu

kayd ahaan uhaystaana ay tahay 100,000 oo Riyaal. Sidoo kalena uuleeyahay guri, marka la eego bishi 5,000 oo Riyaal. Bilaha ay ku noolaan karaan Faarax iyo qoyskiisu kaydkoodu waa qadderka lacageed ee uu haysto oo dhan 100,000.

Ma u jeeddaa in 20 bilood ay tahay muddada a fillaan karto. Faarax iyo qoyskiisa waxa uu waqtigaa dheer ka soo shaqaynayay waana muddo aad u yar marka loo eego da'diisa iyo waqtigii uu ku soo bixiyay shaqadiisa, jaantuskan mala'awaalka ah ee aan ku tusaalaynay nolosha Faarax waxa ujeeddadiisu ay tahay, in aynnu muujinno muhiimadda ay leedahay caadada kaydsiga iyo abuuridda ilo dhaqaale oo ku sii wadi kara illaa mudo, waxana ay waafaqsan tahay weedha ka caan baxday Xasan Albasri [13] Ilaahay ha u naxariisto'e ee ahayd:

"aakhiradaada ugu shaqayso sidii qof berri dhimanaya, adduunyadaadana ugu shaqayso sidii qof weligiiba noolanaya.

Aan isweydiinno'e, waa maxay qeexitaanka maalinta xornimadaada dhaqaale?

Tallaabada ugu horraysa ee lagu xalliyo dhibaato jirtaa waa in marka hore la asteeyo xaqiiqada dhibta jirta. Sidaa darteed; maalinta xorriyaddaada dhaqaale waa maalinta aad awood u yeelato in aad ku noolaan karto dakhliga kaa soo gala hantidaada si waafaqsan qaabnololeedka adigu aad doonayso adiga oo aan u baahan in aad shaqo tagto.

[13] “Xasan al basri" waa caalim weyn oo ka mid ah culimada islaamka waxa uu dhashay 21 H waxa uuna ka mid ahaa kuwa ugu saamaynta badan culimada islaamka, aqoonyahanka qaarkood waxa ay yidhaahdeen xasan al basri hadalkiisu waxa uu u egyahay hadalka nabiyada.

Miyaanu mudnayn yoolkaasi mid loo halgamo?

Mashruuc kasta ama yool kasta oo nolosha laga leeyahay waxa uu ka bilaabmaa fikrad dhex wareegtay maanka, ka dibna isu beddeshay dareen, dareenkaasina uu dhaliyay waxqabad muuqda, sida aan ka arki karno jaantuskan hoose.



Marar badan waxa aad maqli doontaa dad ku odhanaya, lacagtu ma aha waxa ugu muhiimsan ee nolosha jira, waana weedh saxan oo waxyaabo badan oo kale oo muhiim ah ayaa nolosheenna ku jira, lacagtuna aanay goynin, sida diinta, caafimaadka, ubadka, xorriyadda, iwm, dhammaan waxyaabahaas aan xusnay iyo kuwo kaleba haddii aad haysato lacag badan, waxa aad diyaar u tahay in aad u hurto haddii looga maarmi waayo, sida indhahaaga, lugahaaga iwm.Iyada oo ay sidaa tahay, haddana lacagtu waa mid ka mid ah waxyaabaha ugu waaweyn ee saamaynta weyn ku leh qaybaha nolosheenna ee kala duwan.

Si aan ucariyo fikirkaaga iyo kobocaaga saamaynta hantida ee caqligaaga iyo garashadaada, waxa aan kula wadaagayaa su'aalahan dhawrka ah oo ay mudan tahay in aad ka jawaabto:

Waa maxay dakhligaaga imiku?

Waa maxay dakhliga aad haysato imika?

Waa imisa dakhliga aad u malaynayso in uu kuugu filnaado nolosha aad jeclaan lahayd in aad ku noolaato?

Xaqijinta maalintaada xorriyadda maaliyadeed waxa ay keensanaysaa faydista daahyo kugu gedaaman oo ka dhalatay oo dulrasaysan caqligaaga,taas maandhufaanka ay kugu samaysay bulshada aad ku soo dhex noolayd waqtiga dheer, taasina waxa ay keensanaysaa in aad si joogto ah u akhrido buugta dhisaya maankaaga ee kobcinaya aqoontaada.

Sidoo kalena, aad ka qayb noqoto casharrada iyo tababarrada aad heli karto ee ku kobcinaya, kuna fahansiinaya dhaqaalaha iyo tabaha maalgashiga.

Waxa kula gudboon in aad beddesho garaadka ku dhisan iska dhici iyo daba'orodka oo aad ku beddelato garaadka hal'abuurka tolmoon, si aad u gaadho jidka hodantinimada.

Kor-u-kaca dakhligaagu waxa uu kor u qaadayaa in uu kor u koco milgaha iyo maamuuskaaga nafeed, waxana uu kugu dhallinayaa kalsooni nafeed oo ku dhaxalsiisa in aad soo jiidato degaan wanaagsan oo kugu xeeran.

Filo oo suurayso haddii si kedis, ah uu dakhligaaga sannadlaha ahi u noqdo dakhligaaga billaha ah. Sidee ayay noqon lahayd noloshaadu?

Maxaad ka shaqayn lahayd?

Halkee se ayaad u jihaysan lahayd?Su'aalahani waxa ay maankaaga ku dhallinayaan muhiimadda ay leedahay in maanka lagu cariyo muhiimadda ay leedahay fahankaaga arrimaha dhaqaalaha iyo tabaabushaha aad ka yeelanayso horusocodkaaga dhaqaale.

Si aynnu u muujinno muhiimadda ay kuu leedahay in aad samaysato qorshe-qofeed dhaqaale oo aad ku astaynayso maalintaada madax-bannaanida dhaqaale, isla markaana aad ka shaqaynayso sidii aad u fulin lahayd qorshahaas. Bal ila dhugo tusaalahan.

Haddii aad soo gasho meherad ganacsi si aad wax uga soo iibsato, ma u malaynaysaa in qofka wax kaa iibinayaa uu iska garan karo waxa aad doonaysay iyo qiimihiisa?

Waxa aan filayaa in aad tidhi: "jawaabtu waa maya!" Sidaas oo kale; haddii aanad ku socon qorshahaaga iyo jeebkaaga oo aanad la gorgortamin qofka wax kaa iibinaya, waxa aad ku soconaysaa qorshe kale oo aan kuu oollin. Tusaalahani waxa uu kuu soo dhoweynayaa mudnaanta ay mudan tahay in aad astayso qorshe kuu cad, isagana aad ku dulsocoto sidii aad uga gungaadhi lahayd. Astaynta maalinta xorriyaddaada dhaqaale sida aad u qorshaysatay adigu waxa ay ku siinaysaa in aad si xor ah u kala doorato go'aamada noloshaada.

Yeelo qorshe ama laba ama saddex qorshe oo haddii midi uu dhici sooboba aad ka kale u guuri karto. Ma u aragtaa in ay kuu wanaagsan tahay in aad yeelato hal ama laba ama saddex qorshe?

In aad yeelato qorshayaal tiro ah ayaa ka fiican midka kaliya, waayo qorshaha keliya waxa uu kugu khasbi karaa in aad la kulanto caqabado badan oo kaa dhiciseeya qorshahaagii. Sidoo kale; mar walba qorshaha kelida ahi waxa uu kugu riixayaa in aad ahaato falceliye ka dhursuga hadba waxa ku soo kordhaya noloshiisa.

Waxa kale oo uu qorshaha kelida ahi kugu soo uruurinayaa doorashooyinka, iyada oo uu kugu riixayo doorasho keliya oo aan mid labaad lahayn, waxana laga yaabaa in uu doorkaagii dad kaleba siiyo qorshahaas kelida ahi.

Waad gaadhay xaqiijinta qorshahaaga maaliyadeed sida aad u dhigatay qorshihii noloshaada. Markaa ma kula gudboon tahay in aad iskaga tagto shaqadii aad soo haysay muddada badan ee aad soo naawilaysay in aad maalin uun ka madax bannaanaan doonto?

Maanta adiga ayaa isu madax ah, go'aankaaguna waxa uu ku jiraa gacantaada 100%. Haddii aad doonto waad sii wadi kartaa shaqadaada waa haddii aad jeceshahay sidaas, ma se aha maanta haddiiba aad sii waddo shaqadaada in ay kugu qasabtay duruufta bulsho ee kugu xeerani, laakiin waa in aad adigu jeceshahay.

Mar kale aan ku weydiiyo'e, miyaanu mudnayn doorkaasi in dedaal loo huro?

Dhab ahaan wuu mudan yahay in dedaal lagu bixiyo. Wacnaan lahaydaa haddii uu mid kasta oo inaga mid ahi heli lahaa fursaddaas waqti hore oo noloshiisa ka mid ah!

Gaadhitaanka maalintaada xorriyada dhaqaale iyo ka-xorowga addoonimada mushaharku waxa ay u baahan tahay horumarin nafeed oo dhab ah, gaar ahaan horumarin fahan iyo barasho dhaqaale, taasina waa waxa aynnu sii falanqayn doonno.

Xaruntaada Dhaqaale

Waxa laga yaabaa in maankaaga ay ku soo boodday isla markii aad aragtay ciwaankan u dhigan (Xaruntaada Dhaqaale) in uu ku kooban yahay keliya arrimaha dhaqaalaha, laakiin ujeeddadu way ka gudo ballaadhan tahay intaas keliya.

Naftaada sida aad u qaabaysaa waa halbeegga rasmiga ah ee mustaqbalkaaga, ha noqdo dhinaca dhaqaalaha ama dhinacyada kale ee kugu xeeranba'e, sida aqoontaada, qoyskaaga, saaxiibadaa iyo bulshada kaleba. Dhammaan dhinacyadaas aan soo sheegnay sida aad ula falgelayso ee aad u maaraynaysaa waxa ay ka imanaysaa hadba inta ay tahay aqoontaada iyo ilbaxnimadaada aad ka heshay waalidkaa,

dugsigaagii iyo degaankii aad ku soo barbaartay, taas ayaadna qof ahaan wax ku saamaynaysaa, kuna saamoobaysaa. Halkaas innaga oo ka anbaqaadayna aan isku dayno in aynnu cabbirno aqoonta heerkaaga aqoon iyo ilbaxnimo, innaga oo ku cabbiraynna 1 - 10, intee ayaad siin lahayd naftaada marka aad qiimayso, ma 2/10 mise 4, 5, 8 ama intee in le'eg?


U qor naftaada inta ay mudan tahay derejo ahaan, iyo waxa ay ka haysato ilbaxnimada iyo aqoonta looga baahan yahay gaadhitaanka madaxbannaani dhaqaale.

Ka soo qaad haddiiba aad hesho 4/10, waxa aad u baahan tahay in aad kor u qaaddo heerka aqoontaada illaa 8/10 ugu yaraan, su'aashuna waxa ay imanaysaa markaas, maxaad u baahan tahay aqoon iyo xirfado si aad kor iskugu qaaddo ugu yaraan ilaa 8/10?

Si aad u hesho jawaabahaaga aan ku weydiiyo su'aalo dhawr ah:

- Wax ma akhridaa?
- Maxaad akhridaa?
- Weli ma qaadatay casharro ku saabsan kobcinta dhaqaalahaaga?
- Muxuu ahaa buugii u danbeeyay ee aad akhriday?
- Muxuuse ku saabsanaa?
- Weli ma gashay tobabar dhaqaale?

Dhammaan su'aalahaasi waxa ay kugu caawinayaan in aad garato oo aad qiimayso naftaada. Waxa kale oo ay kuu muujinayaan waddada ay haboon tahay in aad qaaddo si aad kor ugu kacdo. Si aad ugu socoto jidkan, waa in aad naftaada ka qiimaysaa dhammaan qaybaha nololeed ee ku sugan jaantuskan hoose:



Dabagalka iyo qiimaynta joogtada ah ee aad ku samaynayso naftaada aarimahan kor ku xusan, waxa loo tixgeliyaa qodob lafdhabar u ah halka aad ka taagan tahay horumarkaaga gaarka ahi waa halkee?

Inta aanad xaqiijinin booskaaga iyo xaaladdaada gaarka kuu ah, suuragal kuuma aha in aad garato halka aad u jihaysanayso kama-danbaystaada.Ka soo qaad in uu qof mar keliya ku war helay isaga oo ku dhex lumay dhul bahgooyo ah oo lamadegaan ah,isla markaana aan wadan wax jiheeye ah oo uu wax ku kala garto. Ma u aragtaa in uu awoodi karo in uu gaadho jihada uu u socdo?

Jawaabta cid waliba ay garan kartaa waa "maya". Sidaa darteed ayuu u noqonayaa qodob mahuraan ah in aad garan karto halka aad taagan tahay hadda oo aad eeg'eegayso hareerahaaga, si aad ugu dhaqaaqdo jihada aad doonayso in ay ku gaadhsiiso mustaqbalka aad ku sawiratay maankaaga dhexdiisa ee aad ku riyoonayso adiga oo soo jeeda, isla markaana waxa ka dhex muuqda maankaaga la gaadh warqad oo ku astee hadaf cad tiro ahaan, waqti ahaan, iyo shaqo ahaanba.

Sida horeba loo yidhina, in mushkiladda la asteeyo oo la tilmaamaa waxa ay qayb weyn ka tahay sidii loogu heli lahaa xalka ku habboon, taas lafteeduna waxa ay kaaga baahan tahay sidii aad ku gaadhi lahayd qorshe iyo hadaf aad daba socoto.

Haddii aynnu u noqonno booskaaga maaliyadeed, in badan oo ka mid ah dadku waxa ay rejaynayaan in ay helaan hanti badan. Waxa aynnu odhan karnaaba shaqadooda u badani waxa ay ku baxdaaba waa raadcaynta

hanti badan, haddana waxa ay xaaladdoodu ku sugan tahay in ay helaan waxa ugu yar inta ay heli karaan.

Aragtida uu kaa bixiyo hantidaadu waa tilmaanta isu-dheellitirnaanta noloshaada. In badan oo dadka kamid ahna waxa suuragal ah in aad ka maqasho iyaga oo ku tiraabaya "lacagtu ma aha waxa ugu muhiimsan ee nolosha." Weedhani waa sax 100%, mana qarsoona, laakiin taas liddigeeda, waxa aynnu arki karnaa in lacagta iyo hantidu ay yihiin hubanti ahaan shayga ugu saamaynta badan noloshaada illaa uu ka saamaynayo diintaada oo ah waxa ugu weyn ee aynnu haysanno.

Si aynnu u sii muujinno qodobkan, waxa aad ila eegtaa oo aad ka jawaabtaa su'aalahan adiga oo ku salaynaya naftaada:

Waa maxay isugeynta dakhligaagu?

.....

Waa maxay ilaha dhaqaale ee dakhli uu kaa soo galaa?

A. Mushahar.....

B. Ganacsi .....

C. Hanti maguurto ah .....

D. Wershad .....

E. Xuquuq hal'abuur .....

Imisa ayuu ahaa dakhligii ugu badnaa ee aad samaysaa waqti ka mid ah noloshaada?

.....

Waa imisa dakhliga aad u baahan tahay si aad u noolaato nolosha aad naawilaysaa?

.....

Dakhligaagu ma mushahar keliya ayuu kaa soo galaa?

.....

Miyuu kaa go'aa mushaharku inta aanay bishu dhammaan?

.....

Miyaad ugu nooshahay cidhiidhi dhaqaale si joogto ah?

.....

Ma leedahay caadooyin lacagta kaa dhammeeya oo aad jeceshahay in aad beddesho?

.....

Maxaad jeclaan lahayd in aad samayso? .....

Maxay se tahay tallaabada aad qaadaysaa?

.....

Ma waxa aad sugaysaa inta uu adiga si gaar ah kuugu soo degayo waxyi samada ka yimi oo kuu sheegaya in aad beddesho noloshaada, caadooyinkaaga, iyo habdhaqankaaga. Marka loo eego waxa hortaada yaalla iyo waxa kaa danbeeya, waa wax aad u yar marka loo eego waxa naftaada ku dhex jira. In aad garato xaaladdaada oo aad si qumman ugu fiirsataa waa waxa ugu weyn ee ku gaadhsiin kara waxa aad jeceshahay in aad gaadho.

Waxa jira eraybixin loo yaqaanno Dhiirrigelinta Farqiga (gap incentive), oo macneheedu uu yahay, in masaafada u dhexaysa xaaladda aad hadda ku sugan tahay iyo in yoolka aad hiigsanayso ee aad doonayso in aad gaadho uu u dhexeeyo xoogaa farqi ah oo ay mudan tahay in la sawiran karaa. In aad astayso halka aad taagan tahay hadda iyo halka aad u socoto mustaqbalka waxa ay kaa caawinaysaa in aad u heli karto hammi aad ku marto farqiga muddo ee u dhexeeya labada dhinac.

Sidaa darteed; waxa lagama-maarmaan ah in aad astayso halka aad hadda taagan tahay iyo halka aad u socoto. Haddaba; si aad isu qiyaasi karto waa in aad u tirikoobtaa waxa aad haysato ee hanti ah, hanti la taaban karo iyo mid aan la taaban karin labadaba, iskuna geyso dhammaan waxa ay isku wada noqonayso, waxa isku mid ah qiimaha waxaa aad haysataa ha hooseeyo ama ha sareeyo'e.

sida hanti ma guurta ah oo kale ama ha yaraato qiimeheedu amaba ha sareeyo'e, Ka dib waxaaad sidoo kale qortaa yoolalka iyo hadafyada aad nolosha ka leedahay oo dhan, qiimee oo kharashaadka aad ugu baahan tahayna qor adiga oo aan isku yaraynayn ilaah ayaa Deeqbaxshe ah,

oo sida uu qayrkaa u siiyay adigana kuu siinaya haddii aad la timaaddo waxa ay la yimaaddeene. Si aan tusaale ugu caddayno waxa noloshiisa qiimayn ku sameeyay Axmed.

Axmed maanta oo ay taariikhdu tahay : / / waxa uu ka shaqeeyaa mid ka mid ah shirkadaha dalka. Waxa mushahar ahaan u soo gala $600. Sidoo kale; Axmed waa xaasle leh saddex carruur ah. Waxa uu ku jiraa guri kiro ah. Sidoo kale; waxa culays ku haya maaraynta nolosha ku xeeran qaybeheeda kala duwan. Axmed waxa u raaca in lagu leeyahay deyn meel uu ka bixiyo aanu garanayn.

Axmed cidina uma maqna ceelna uma qodna! Waxa laga yaabaa in adiga akhriste noloshaadu ay la mid tahay ama ay ku dhowdahay tan Axmed. Xalka adiga iyo Axmed idiin yaallaa ma aha in aad cabataan, ee waa in idinka oo Ilaahay kaashanaya, aad marka hore qiimaysaan waxa aad u baahan tihiin ee kharash ah ee idinka saaraya culaysyada idinku xeeran,

ka dibna aad isku daydaan in aad qortaan kharashkaas aad u baahan tihiin iyo muddada aad u astayseen in aad heshaan oo aad u dhaqaaqdaan sidii aad ku keeni lahaydeen idinka oo u maraya dhawr tallaabo oo kala ah:

1.Shaqo tag oo ka kac caajisnimada iyo wahsiga.

2.Haddii aanad haysan shaqo raadi shaqo oo shaqo raadinta ka dhigo shaqo.

3.Haddii aad haysato shaqo oo aanay kugu filnayn kukordhi shaqo kale.

4.Isku day in aad dhisto naftaada oo aad barato xirfado qiimahaaga kor u qaada.

5.Isku day in aad samayso ilo ay wax kaa soo galaan haba yaraadaane.

Maskaxdaada tuuji oo seedahaaga daali, hana sugin in ay cidi gacanta ku qabato oo ay sida indhoolka oo kale kuu hagto!

Waa in aad mar walba maanka ku haysaa in inta aanad joogtayn ee aanad go'aansan in aad qaaddo tallaabada koowaad, aanay tan labaad kuu suuragalayn.

Barashada Macaash iyo Khashaare

Si aynnu u dhammaystirno hayaanka aad ugu jirto in aad gaadho madaxbannaanida dhaqaale ee aad tahlayso, waxa aynnu isla gorfayn doonnaa barashada macaashka iyo khasaaraha, ama garashada dakhliga saafiga ah. Marka aad si cad oo habaysan u qorto dakhliga ku soo gala iyo halka uu ku kala baxo, waxa aad ogaanaysaa in ay wax kuu soo

hadhaan iyo in aad adiguba ku jirto hoos-u-dhac oo lacagaha kaa baxayaa ay ka badan yihiin dakhligaaga, isla marka aad intaas ogaato waxa kuu fududaanaysa sidii aad u qaadi lahayd tallaabooyin waxku'ool ah iyo go'aamo saamayn togan ku leh kobocaaga dhaqaale.

Waxa ay waajibka kugu tahay in aad yeelataa waa laba diiwaan oo kala madaxbannaan oo midina aad ku qorto waxa ku soo gala mid kale oo madaxbannaanna aad ku qorto waxyaabaha kaa baxa. Tallaabadani ay si dhow kuugu muujinaysaa in aad garan karto halka uu kaaga jiro khalkhalka aad hore u dhaadi weyday ee kaa baabi'inaya waxa ku soo galaaba.

Waxa aan isku deyi doonaa in aan fikrad kaa siiyo oo aan kuu soo dhoweeyo waxyaabaha aad ku qori karto dhinaca waxyaabaha ku soo gala iyo waxyaabaha kaa baxa, sida tusaalaha hoos ku xusan. Waxa uu noqon karaa dakhliga ku soo galaa waxyaabo kala duwan sida:

Dakhliga ku soo gala (Income).

Mushahar.

Kirada hanti maguurto ah.

Faa'iido maalgashi.

Faa'iido ganacsi.

Faa'iido xuquuq hal'abuur.

Midkee ayaa ka mid ah qodobbadan aan soo xusnay meelaha ay wax kaa soo galaan adiga?

Mise keliya waxa aad tahay dadka aan nolosha ka aqoon mushahar mooyaane wax kale oo dakhli laga samayn karo?

Ka kaalay taas. Mudnaantu waxa ay tahay waxa aad adigu samaynayso ka dib marka aad ogaato wixii kaa maqnaa!

Waxa ka mid ah dhaqamada joogtada ah ee dadkii kaa horreeyay ay guul kaga gaadheen himiladoodii, wax ka fiirsi xeel dheer, nidaam wanaagsan, iyo joogtayn nafhumimo leh. Sidaa darteed ayay muhiim kuugu tahay inta aanad samayn miisaaniyaddaada gaarka ah in aad u kala habayso waraaqahaaga dhaqaale qaabkan soo socda.

Qaabka loo Habeeyo Waraaqahaaga Maaliyadeed

Waqtigu waa sida seefta oo kale, haddii aanad jarinna isaga ayaa ku jaraya. Imisa jeer ayaad aragtay cabashooyin dad iyo shirkado ka cabanaya in ay waayeen waraaqo iyo faylal muhiim u ahaa?

Maxay kaaga dhigan tahay adiga cabashooyinka dadkaasi ay ka cabanayeen?

Maxaa se keenaya dhibaatada ka iman karta lumitaanka waraaqaha iyo faylalka muhiimka kuu ah ee aad goor danbe muruq iyo maalba ku baadi goobayso haddiiba aad weydo.

Sidaa darteed; waxa aan kuugu baaqayaa in aad iska nidaamiso waraaqahaaga maaliyadeed oo aad u habayso qaab heer sarreeya. Ku bilaw in aad isu keento dhammaan waraaqaha kuu muhiimka ah, ka dib kala sooc adiga oo qayb-qaybinaya.

Qaybta isku midka ahba ku xidh fayl u gaar ah adiga oo ku qoraya ciwaan weyn oo muuqda. Gaar uga saar waraaqaha sii muhiimka ah sida:

baasaboorrada, jeegagga, waraaqaha caymiska, shatiyada baabuurta iyo ganacsiga, iwm. Haddii aad awoodi karto ku rid waxyaabahaas sii muhiimka ah khasnadaha, gaar ahaan nooca aanu dabku karin.

Si ay kuugu fududaato halka aad ugu hagaagayso mid walba, waxa aan kuu bidhaaminayaa qaabka loo qayb-qaybiyo faylasha.

Diiwaanka Bangiyada

- Buugga jeegga bangiga.
- Xisaabta kaydka.
- Xogta ammaanada ah.
- Xogta xisaabxidhka.
- Furayaasha ammaanada bangiga la dhigo.

Biilasha

- Adeegyada gaarka ah.
- Laydh iyo biyo.
- Tilifoonka iyo internetka.
- Biilka boosta iyo isgaadhsiinta.

Arrimaha sharciga

- Wakaaladaha.
- Biilasha latalinta sharciga.
- Heshiisyada saamiyada.
- Dardaaranka.

Waraaqaha caymiska

- Caymiska shatiga.
- Caymiska gaadhiga.

- Caymiska nolosha.
- Caymiska hawlgabka.
- Caymiska dabka.
- Caymiska ganacsiga.

Diiwaanka Maalgashiga

- Caddaymaha macaashka iyo khasaaraha.
- Caddaymaha miisaaniyadaha.
- Shahaadooyinka saamiyada.
- Shahaadooyinka dammaanadda.

Sekada iyo cashuuraha

- Waraaqaha sekada hantida guud.
- Mashruucyada khayriga ah.
- Waraaqaha cashuurta.

Hantida maguurtada ah:

- Ilaalin iyo dayactir.
- Deynta lagaaga leeyahay hantida.
- Miisaaniyadda ku-talagalka dayactirka.

Waraaqo guud oo muhiim ah

- Shahaadada dhalashada (qoyska).
- Shahaadada waxbarashada.
- Warqadda guurka.

Intaa waxa la raacinayaa in aad diyaariso laba qaybood oo ah nidaamka maaliyadeed. Ta koowaad waa diyaarinta macaashka iyo khasaaraha. Qaybta labaadna waa diyaarinta miisaaniyaddaada gaarka ah.

Hagaag. Imikana aan eegno qaabka aynnu u qorikarno kharashaadka.

Kharashaad (Expenses):

- Adeegga biilka.
- Dharka.
- Laydhka.
- Biyaha.
- Kirada.
- Basraaca.
- Waxbarashada.
- Madadaalada (xaaska iyo carruurta).
- Martisoor.
- Kedis.

Diwaangelinta dhammaan waxa ku soo gala ee ah dakhli iyo masaariifi waxa waajib ah in uu yahay mid sax ah oo dhammaystiran, iyada oo aan laga tegayn wax yar iyo wax badan midna, taasina waxa ay kaa caawinaysaa in aad dibu-eegis ku samayn karto arrimaha noloshaada,

isla markaana aad hagaajin karto wixii kaa baylahsan adiga oo meesha ka saaraya waxa aan loo baahnayn ee ay wax kaaga baxaan ama soo uruurinaya waxa aan loo baahnayn oo dhanba.

Marka aad kala ogaato dakhligaaga iyo waxa kaa baxa, waxa aad gudagashaa dejinta nidaamka xisaabinta macaash iyo khasaare oo aan kaaga baahnayn wax weynba, ee loo xisaabiyo sida caadiga ah ee la isla yaqaanno.

Warbixinta macaashka iyo khasaaraha gaarka ah:

Dakhliga		**Kharashaadka**	
Hawsha	Qadderka	Hawsha	Qadderka
Mushaharka	$1,500	Biilka qoyska	$500
Kirada maguurtada	$1,000	Dharka	$100
Faa'iidada saamiga	$500	Laydhka&Taleefan	$150
Faa'iido ganacsi	**.....**	Kiro	$300
Faa'iido wershad	**.....**	Gaadiid	$100
Faa'iido hal'abuur	**.....**	Waxbarasho	$100
		Kedis	$500
		Madadaalo	$100
		Martisoor	$200
		Kharashka	$200
		dayactirka	
Total	$3,000	Total	$2,250

Hagaag. Innaga oo ka anbaqaadayna xogta ku sugan jaantuskan kor ku xusan, waxa aan u xisaabinaynaa guud ahaan hantideenna sida ay kala tahay waxa ina soo gala iyo waxa inaga baxa, sidan:

Dakhli - kharashaad = hantida hadhaaga ah

$3,000 - $2,250 = $750

Qoraalkan kooban iyo qaabayntan aynnu ku samaynay dakhligeenna iyo kharashaadkeenna waxa aynnu ku garan karnaa:

- Waxa ina soo gala oo cad.
- Waxa inaga baxa.
- Sida ay u kala baxaan.
- Halka ugubadan ee ay ku baxaan.
- Halka ugu badan ee ay wax inaga soo galaan.
- Isugeynta waxa inoo soo hadhaa waxa uu yahay.

Marka intaas aad si cad u ogaato, shaqada xigta ee kuu taallaa waa sidii aad u yarayn lahayd kharashaadkaaga, korna aad ugu qaadi lahayd ilahaaga dakhli ee aad haysato iyo kuwa aad hiigsanayso in aad samayso. Sidoo kale; haddii aad leedahay xafiis ama meherad shaqaysa, waxa aad ku samayn kartaa baadhitaan aad ugu kuurgelayso xaaladdeeda dhabta ah adiga oo u maraya qaabkaa aynnu soo sharraxnay oo kale.

Warbixinta Macaashka iyo Khasaaraha Ganacsigaaga Waxyaabaha qaar ayay ku kala duwanaanayaan xogta maaliyadeed ee gaarka ah iyo tan ganacsigaagu Waxyaabaha shaqadaada ku bixi karaa waxa ka mid ah:

- Kiro xafiis.
- Kharash nadaafadeed.
- Biyo iyo taleefan.

- Laydh iyo internet.
- Suuqgeyn.
- Mushqaayadda safarka.
- Cunno iyo cabbitaan.
- Shidaal iyo saliid.
- Caymiska xafiiska.
- Agabka shaqada iyo waraaqaha xafiiska.
- Tababarro.
- Mushaharro.

Liiskan waxa aynnu u xusnay keliya si aynnu u muujinno kala-duwanaashaha u dhexeeya dakhliga qofka ee gaarka ah iyo kan xafiisyada iyo shaqadu in ay ku kala-duwanaanayaan meelaha qaarkood

Jaantuska Ogaalka Macaashka iyo Khasaaraha shaqada.

Dakhliga	**Kharashaadka**

Hawsha	Qadderka	Hawsha	Qadderka
Dakhli kirooyin	$3,000	Kirada xafiiska	$800
Faa'iido iibin	$1,500	Kirada bakhaarka	$300
Faa'iido dillaal	$1,000	hawlqabad taleefan	$200
Faa'iido la talin	$2,000	net	$100
Faa'iido iibin sheer	$1,500	suuqgayn	$200
		Safarro	$600

		Shidaal iyo saliid	$500
		Caymiska xafiiska	$800
		Agab shaqo	$600
		Tababarro	$500
		Mushaharaad	$1,500
		Dayactirka	$400
Total	$9,000	Wadarta guud	$6,500

Waxyaabaha muhiimka ah marka aad diyaarinayso macaashka iyo khasaarahaagu, waa in aad ugu baraarug sanaataa qodobbadan soo socda:

Aad ugu xeel dheerow oo ku dhowow xaqiiqada xisaabeed ee jirta. Marnaba ha dhayalsan xisaabta, haba yaraato'e waxa dakhliga ah ama kharashayada ee meel kaaga baxa waxba ha ka tegin. Si ay xog-raadintaadu sax u noqoto, ka dheerow in aad ku gaabsato malaha iyo mala'awaalka adiga oo ku dhisaya waxyaabo suuragal noqon kara.

Marka aad dhammayso xog-ururintaada, waxa aad si qoto dheer u falanqaysaa dib u habaynta maaliyaddaada, haddii aad awoodi karto ama adiga oo kaashanaya shaqaalahaaga ama cid si gaar ah la-talin kaaga siin karta qorshahaaga maaliyadeed.

Falanqayntani waxa ay ku gaadhsiinaysaa in aad si qoto dheer u fahanto arrimahaaga dhaqaale, waxana ay xoojinaysaa in ay kaa caawiso sidii aad u gaadhi lahayd halka aad doonayso in aad gaadho.

Eray bixinno dhawr ah oo ay muhiim tahay in aad maanka ku hayso marka aad dhammayso falanqaynta ee aad doonayso in aad tallaabo cusub qaaddo, eray bixinadaasna waxa ka mid ah:

Dakhliga Taban (Passive Income), waxana loo jeedaa dakhliga kaa soo gala maalgashi ama mashruuc aad leedahay adiga oo aan shaqaale ka ahayn. Deyn Taban (Bad Debt) waana deynta loo qaato si loogu isticmaalo kharashaadka sida biilasha, safarrada, kharashaadka hawl socod-siinta, iwm.

Arrimhaas oo badanaa loo isticmaalo qaab nololeedka qofka iyo shaqadiisa (lifestyle) oo aan ahayn wax habboon.

Deynka Togan (Good Debt) deynta wanaagsani waa deynta uu qofku geliyo hantida dib wax ugu soo celinaysa, sida dhulka, mashruuc si fiican u shaqaynaya,iwm. Noocan danbe oo deynta ka mid ahi waa mid aad u baahanayso in aad wax ku dhisto mar kasta oo hantidaadu ay koritaan samaynayso.

Shaqadaadu waa xeeladda keliya ee aad haysato, taas oo aad ku qaadato mushaharkaaga hadda ay noloshaada oo dhammi ku tiirsan tahay, waajibna ay tahay in aad maalin uun ka xorowdo.

Dheelitirka Miisaaniyadda

Marka aad soo saarto natiijada gebagebada ah ee macaashka iyo khasaaraha, waxa ku xigaya tallaabada ah in aad isu dheellitirto dakhligaaga iyo kharashaadkaaga oo aad u samayso qorshe aad ku hagto, waana waxa loo yaqaanno dejinta iyo dheellitirka miisaaniyadda.

Miisaaniyad in aad samaysaa waxa ay ku tusaysaa qiimaha dhabta ah ee aad ka haysato hantida iyo fahankeeda. Sidoo kale; waxa uu isbeddel togan ku samaynayaa caadooyinkaagii maaliyadeed ee aan wanaagsanayn ee aad hore ugu maarayn jirtay dhaqaalahaaga, dejinta miisaaniyad kuu gaar ahi waxa ay kuu muujinaysaa halka aad hiigsanayso iyo halka aad hadda taagan tahay. Sidoo kalena; waxa uu kugu

caawinayaa in aad garan karto xaquuqda cid kale ay kugu leedahay iyo qaabka aad isaga gudaysaba. Dejinta miisaaniyaddu waxa ay ka kooban tahay laba tiir. Mid ahaan waxa aad ku qoraysaa hantidaada. Ka labaadna kharashaadka oo aan hore usoo faahfaahinnay qaabka loo xisaabinayo. Marka la kala jaro raasamaalkaaga iyo kharashaadka, waxa kuu soo hadhaa waxa uu noqonayaa raasamaalkaaga saafiga ah (net worth).

Hadafka (Yoolka) Maaliyadda

Marka aad ogaato halka aad taagan tahay dhaqaale ahaan hadda adiga oo u marayaa ogaansheheeda qaabka aan hore u soo faahfaahinnay, waxa iyaduna mahuraan ah in aad garato halka aad u socotaa waa halkee?

Waxa ay noqonaysaa mid fudud, in aad xaddiddo halka aad doonayso in aad gaadhaa, weliba adiga oo u xaddidaya qaab cad oo aanu hummaag ku jirin. Waa mid waajib ah si ay suuragal u noqon karto in la dhiso xeelad qorshaysan oo lagu gaadhayo halka loo socdaa, sidoo kalena lagaga baydhayo caqabadaha iman kara.

Samaynta yool maaliyadeed oo aad beegsanaysaa waxa ay kuu fududaynaysaa in aad gaadho maalinta xorriyaddaada dhaqaale oo ay kaa xorayso addoonnimada mushaharka.

Si aad u astayso, una tilmaanto yoolka aad doonayso, waa in aad si cad oo aad tiro ku cabbirayso uga jawaabtaa su'aalahan:

Imisa ayaad doonaysaa in uu gaadho dakhligaagu bishii?

.....

Imisa ayaad doonaysaa in ay noqoto hantidaada sooca ahi?

.....

Goorma iyo adiga oo da'dee ku jira ayaad doonaysaa inaad gaadho?

.....

Maalintee, bishee iyo sannadkee? .....

Waxa aynnu ku soo marnay su'aalo muhim ahaa ciwaankii u dhignaa xaruntaada [14] dhaqaale.

Haddii aad ku noqoto oo aad caddayso waxa aad garan kartaa kala-duwanashaaha u dhexeeyaa inta uu le'eg yahay. Ku soo celi jawaabahaagii, ama mar kaleba ka jawaab halka aad hadda marayso dhaqaale ahaan adigaoo raacaya tusaalahan:

Aniga oo ah: _____ waxa aan haystaa hanti

gaadhaysa _____ maanta oo ay taariikhdu tahay: / / Hadafka ama yoolka aan doonayo in aan gaadhaana waa: _____

taariikhdu marka ay noqoto: / / haddii uu Ilaahay idmo.

Marka aad isla eegto labada xaaladood ee aad midna ku sugan tahay midna aad ku socoto, waxa aad ogaanaysaa kala-duwanaashaha baaxadda leh ee u dhexeeya labada xaaladood. Si ay si xeel dheer kuugu muuqato waxa aad nolosha ka doonayso iyo in aad garanayso waxa aad

(14) Waxa aan ku soo marnay bogga "97"

doonaysaba waxa aan kaa codsanayaa in aad si miyir leh uga jawaabto su'aalahan soo socda:

Goorma ayaad bilawday in aad doorato nolosha aad Xaaladdaada dhaqaale ee hadda ma adiga ayaa doortay imika ku nooshahay?

mise waa mid ku timid si kedis ah?

Goorma ayaad xulatay oo aad dooratay xirfadda aad hadda ku shaqayso?

Ma waafaqsan tahay xirfadda aad hadda ku shaqaysaa sidii aad doonaysay ama aad jeclaan lahayd?

Ma adiga ayaa go'aamiyay oo ka masuul ah xaaladahaa kala duwan ee aad hadda ku jirto?

Haddii ay jawaabtaadu tahay "haa", waana sida ay tahay ee habboon'e, oo ay isugu kaa beegan tahay sida aad nolosha la doonaysay iyo sida ay kuu tahay, waa arrin wanaagsan oo bogaadin mudan. Haddii se ay jawaabtaadu tahay "maya". Anigu masuul kama ihi noloshayda, sidii

habboonaydna isuguma beegna noloshayda iyo sidii aan doonayay." Aan kuu sheego in aan noloshaada cid kale gacmaha u gelisay oo aanad wax go'aan ah adigu ku lahayn, ama waxyaabaha qaarkoodna aad go'aan ku lahayd, badanka noloshaadana laguu hagayay, adiguna aad daawade uun ka ahayd!

Waxa habboon in aad ogaato in Ilaahay SWT uu ku siyay awoodo aad u yaab badan. Ha ka dhigin awoodahaas mid gudahaaga uun ku dahsoon, haddii aad ku baraarugto awoodaha Ilaahay SWT uu ku siiyay oo aad kobciso, ugana faa'ideysato sida ugu habboon, waxa hubaal ah in noloshaada gabi ahaanteedaba isbeddel weyni uu hadhaynayo.

Ma og tahay in sirta guusha ee ugu muhiimsan ee ay ka siman yihiin dhammaan dadka guuleystay ay tahay, in aad awooddo in aad naftaada u taliso oo aad u samayso waxa loo yaqaanno basarka ama anshaxa wanaagsan, sidoo kalena aad nafta ka xakamayso (discipline), oo ah in aad joogtayso caadooyinka dhaqamada aan wanaagsanayn.

Nolosha wax kuu hagaagayaa ma jiraan inta aanad naftaada ka adkaan. Ma jirtaa qaybo ka mid ah noloshaada oo aad jeceshahay inaad wanaajisaa?

Tusaale ahaan; ma jeclaan lahayd in aad hagaajiso dhinaca dhaqaalaha, ama sida aad ku heli lahayd shaqo fiican. Waxa laga yaabaa in xidhiidhkaaga qoyska iyo qaraabadu aanu fiicnayn oo aad jeclaan lahayd in aad iyo aad u wanaajiso. Haddaba; in aad dib uhabayn ku samayso noloshaada oo aad xakamayso naftaadu waa waddada aad u mari karto barbilawga waxyaabaha aad doonayso in aad hagaajiso oo dhan, sidaasina waa sida uu ina baray rasuulkeenii suubbana ﷺ ee uu yidhi: "geesigu waa qofka naftiisa xisaabiya ee geerida dabadeedna u shaqaysta, wahsi-badanuhuna waa kan hawada naftiisa raacraaca ee Ilaahayna ku yididiilooda yididiilo madhan." Xadiis [15].

Gaadhitaanka ujeeddooyinkaagu kuma yimaaddaan xiisaha iyo laab-la-kaca aanay wax shaqo iyo hawl ahi la socon. Gaadhitaanka yoolkaagu waxa uu u baahan yahay iimaan iyo go'aan si aad uga dhabayso

[15] Waa xadiis sugan, waxa weriyaya Tirmidi (2459)

ujeeddadaadana,waxa aad u baahan tahay arrimo dhawr ah in aad xog ka hesho waxana ka mid ah:

Horumarinta Nafta

Weli ma aragtay qof imtixaan ku baasay isaga oo aan waxba ka garanayn waxa lagu imtixaamayo, ama aan diyaargarow ka sii samayn? Jawaabta aan iska wada garan karnaa waa "maya". Sidaas oo kale; in aad ku guuleysato yoolalkaaga noloshu waxa ay u baahan tahay diyaargaraw iyo xog-ogaalnimo.

Waxa ay naftaadu guud ahaan ku dul sugnaan doonto maalmaha soo socda ayaa ka muhiimsan in badan waxa ay heli doonto ee lacag ah. Noloshu lacag keliya ma aha. Si aad ugu noolaato nolol wanaagsan, waa in aad dhistaa dhammaan dhinacyada noloshaada oo aad geysaa meel ka wanaagsan meesha ay haatan taagan tahay.

Inta aanad samayn isbeddel nafeed oo togan, waxa aad heli doontaa keliya wixii aad awalba heli jirtay, waayo; mid ka mid ah qeexitaannada waallida iyo xanuunnada dhimirka ku dhaca ayaa ah, in waallidu ay tahay in aad samayso waxyaabo aad horeba u samayn jirtay, isla markaana aad sugto in ay kuu soo baxdo natiijo ka geddisan tii hore kuugu soo bixi jirtay.Waxaa jirta falsafad iyo aragti odhanaysa: "haddii aad ka soo uruuriso dhaqaalaha dhammaan dadka maalqabeenka ah ee caalamka ku nool, ka dibna aad si isle'eg ugu qaybiso lacagtaas dadka oo dhan, muddo yar ka dib waxa ay hantidii ku noqonaysaa jeebkii aad ka

soo saartay, dadkii saboolka ahaana noqonayaan saboolnimadoodii!"

Laakiin ma isweydiisay waayo? Waa maxay sababtu?

Jawaabta waxa aad ka dhex helaysaa marka aad garato, maxay samayn lahaayeen dadku marka lacagta loo qaybiyo?

Waxa aad og tahay in ay badankoodu orod ku tegi lahaayeen goobaha ganacsiga iyaga oo soo iibsanaya waxyaabo badan oo kala duwan oo xidhiidh la leh qaab- nololeedkooda (lifestyle).

Waa su'aal kale'e, yaa iska leh meheradaha ganacsiga ee suuqa ku yaalla? Dabcan waxa iska leh maalqabeenkii aynnu xoolohooda ka soo faramaroojinay! Waa su'aal kale'e, waa maxay sababta ay lacagtu wareegga noocan ah u samaynaysaa?

Jawaabtu waxa weeye, aad iyo aad ayay u adag tahay in la ilaaliyo wax kasta oo dhalanteed iyo si kedis ah ku yimi, oo aan ka dhalan horumar iyo dhisme loo soo dhabar'adaygay.

Xirfado

Weli ma isweydiisay, maxay u kala mushahar badan yihiin shirkaduhu?

Ama shirkadda keliya dhexdeeda dadka ka shaqeeyaa ay u kala mushahar badan yihiin iyaguna?

Tusaale ahaan; muxuu Axmed ugu shaqeeyaa mushahar gaadhaya $800, Cumar oo isla shirkadda kala shaqeeyaana uu ugu shaqeeyaa $200? Waayo?

Kala-duwaanashiyuhu waxa uu ka imanayaa xagga waqtiga iyo shaqada la qabanayo oo kala waxtar badan. Ma awoodi kartid in aad waqti dheer oo kale bixisid si laguugu kordhiyo mushaharka, haddiiba aad

awooddana waa mid aanad sii wadi karin waqti dheer,waayo; oo waa mid ka go'an naftaada, caafimaadkaaga iyo qoyskaaga. Waxa jira farsamooyin muhiim ah oo door mahuraan ah ka ciyaara in uu jaangooyo qiimaha kor-u- kaca mushaharkaaga adiga oo aan wax waqti ah kordhinin, waana in aad yeelato xirfado iyo khibrad aad barato oo aanad ku gaabsan waxbarashada nidaamiga ah oo keliya.

Waxa waajib ah in aad ogaato in qarniga 21aad uu yahay qarnigii xirfadaha kala duwan qofku uu u baahnaa. Si aad xorriyad uga qaadato addoonnimada mushaharka, waa in aad barataa waqtiga ugu kooban waxa aad baran karayso ee xirfad iyo aqoon ah.

Waxa aad awoodi kartaa in aad aqoontaada iyo xirfaddaada kor u qaaddo, si aad qiimo sare suuqa uga yeelato, lakiin ma awoodi kartid in aad waqti kale shaqada ku dartid, haddii aad ku dartidna waa mid kaa daba imanaya oo kaa go'an haddii aanad iska gaadhin. Qiimaha aad suuqa ka joogtaa waa hadba inta aad xirfad korodhsato.

Haddii aad eegto mushaharka macallimiinta jaamacadaha, waxa ay ku shaqeeyaan wax aad uga hooseeya waxa ay ugu shaqeeyaan injineerrada shirkadaha qaarkood! Haddaba; waa maxay sababtu?

Arrintani waxa ay u noqonaysaa in aanu dhaqaalaha caalamku hadda u qiimaynin cilmiga cilmi ahaantiisa, ee loo qiimeeyo cilmigu muxuu tarayaa?

Nolosha dadkana muxuu ku soo kordhinayaa?

Dhaqaaluhuna hadda waxa uu noqday mid daba socda waxtarka iyo xirfadaha. In aad yeelato xirfado kala duwan oo tayo lihi waa tallaabada ugu muhiimsan ee aad kor ugu qaadayso qiimahaaga suuqa, halkaas aayaana aad ka soo saaraysaa dhagaxa ugu horreeya ee aad ka aasaasayso maalgashiga mashruucaaga mustaqbal ee kuu gaarka ah.

In badan oo shirkadaha ka mid ahi waxa ay u diyaariyaan shaqaalohooga barnaamijyo lagu horumarinayo shaqaalaha. Sidoo kale; casrigan internetka waxa aad heli kartaa barnaamijyo badan oo aad ku

horumariso naftaada, Haddii aad doonayso in aad noloshan macno ku yeelato oo aad xor noqoto, ha dayicin fursad aad wax ku korodhsato! Waxa la taagan yahay xilligii aad garawsan lahayd in aanay cidina kuu danaynayn sida aad adigu naftaada u danayso oo kale.

Waxa kula gudboon in aad qorshe horumarineed ka yeelato naftaada iyo sida aad u horumarin lahayd aqoon ahaan iyo xirfad ahaanba.

Qorshahaaga horumarinta xirfadahaagu waa in uu koobsadaa qorshe sannadeed ama shan ama saddex sano ah, waddada keliya ee aad ku noqon karto qof dhisani waa in taagantaadu ay ka wanaagsan tahay tagtadaadii.

Ha raadinin in arrimuhu ay fududaadaan, ee raadi in aad adigu noqoto mid ka wanaagsan kana aqoon badan sidii aad shalay ahayd, si aad si fudud ugu maarayn karto wax dad kale ay ku dhibban yihiin. Ha raadin caqabado yaryar, ee raadi in aad sii noqoto qof xikmad badan oo tayo badan.

Dadku waxa ay jecel yihiin in ay si bilaa dhib ah ku gaadhaan himiladooda, taasina waa dhalanteed aanu wax isbeddel ahi ka soo muuqan. Ka soo qaad haddii nin milyaneer ahi dadka ku yidhaahdo: "waxa aan akhriyay buugga hebel oo aan sababtiisa milyaneer ku noqday ee soo akhrista." Intee in le'eg ayaad filaysaa in soo akhriyayaan buuggaas?

Tiro aad iyo aad u yar ayaa soo akhriyaysa, waana mid ka mid ah hal-xidhaalayaasha nolosha. Waxa aan kugu dhiirrigelinayaa in aad naftaada dhisto oo aad marto waddada ay maraan dadka intooda yari, mar walbana xasuusnow in Ilaahay SWT uu ku siiyay awoodo kugu dahsoon, waxa keliya ee aad u baahan tahayna waa in aad awoodahaas soo saarto, kana faa'iidaysato.

Qaaciidada 30% - 70%

Aan kuugu celiyo qeexitaanka waa kuma saboolku. Saboolku waa qofka u isticmaala mushaharka uu helo danihiisa u gaarka ah, una maareeya hadba sida uu noqdo, markaa ka dib haddii ay wax u soo hadhaan ayuu kaydsadaa, haddii kalena wuu iska faro madhan yahay.

Qofka hodanka ahina, waa qofka ku talo gala qayb ka mid ah dakhliga soo gala in uu kaydsan karo, maalgashina uu ku samayn karo ka hor inta

aanu isticmaalin, wixii u soo hadhana u isticmaala dantiisa gaarka ah. Waxa dhici karta in qofkaa hodanka ah iyo kaa saboolka ahiba ay ka wada shaqeeyaan isla meel keliya oo weliba ay qaataan isla mushahar keliya oo isle'eg, waxa se kala duwan falsafaddooda ay ku maareeyaan dhaqaalahooda.

Ka soo qaad in labadooduba ay shaqaynayeen muddo 20 sano ah, mid kastaana uu ku shaqaynayay $500, mid kastaana uu helayay gunnooyinka iyo waxyaabo kale oo u soo dhacdhaca. Midkood falsafaddiisu waxa weey: "horraysii kaydka iyo maalgashiga, ka dibna isticmaal waxa kuu soo hadha."

Midka kalena falsafaddiisu waa: "isticmaal wixii ku soo gala, ka dib haddii ay wax soo hadhaan kaydso oo maalgasho." Waxa aan shaki lahayn in 20 sano ka dib aad arkayso iyaga oo isu jira cirka iyo dhulka, sababtuna waa labada waddo ee ay kala qaadeen.

Kaydsiga iyo ka-shaqaysiinta lacagtu haba yaraato'e, waa sida wax kasta oo la dhaqayo, waxa uu u baahan yahay waqtigiisa iyo ilaalintiisa. Si fudud luguma dareemi karo midhaha kaydka iyo maalgashiga, lagumana garan karo maalin, bil ama sannad, waxaa se si fiican midheheedu ay u muuqdaan muddo shan sano ama toban sano ah ka dib oo la joogteeyo shaqo iyo ilaalin.

Hagaag! Aan isla eegno qisada nebi Saleebaan NKH'e iyo qudhaanjada, si aynnu uga baranno xikmad cajiib ah oo ku saabsan dhigaalka. Waxaa la weriyaa in nebi Saleebaan NKH'e uu la yaabay dedaalka nafhurka ah ee ay samaynayso qudhaanjadu si ay u kaydsato midhaha oo ay ugu noolaato waqtiga soo socda.

Waxa uu weydiiyay nebigu: "imisa xabbo oo midho ah ayaa kugu filan sannadkii?"

Waxa ay ugu jawaabtay: "waxa igu filan laba xabbo oo midho ah. " Wuu qaaday nebigu qudhaanjadii, waxa uuna ku dhex riday quraarad

isaga oo ugu riday quraaraddii, labadii xabbo ee midhaha ahaa wuu xidhay, ka dibna wuu iskaga tegay. Sannad ka dib ayuu nebigii ku soo noqday, Waxa uuna arkay qudhaanjadii oo xabadna cuntay, xabadna kayd u dhigatay!

waxa uu weydiiyay nebigii: "maxaad u cuni weyday labada xabbadood ee midhaha ahba?

"Waxa ay ugu jawaabtay jawaab cajab badan oo ah: "oo maxaan ka ogahay in aad i soo xasuusan doonto oo aanad i illoobayn sannad ka dib!" Hadiiba ay qudhaajo qaabkaa u qorshaynayso nolosheeda mustaqbal oo ay sidaa u maaraynayso khatarta ku iman karta, miyaanay kugu habboonayn, sidoo kalena qof walba aanay ku habboonayn in uu sidaa u maareeyo noloshiisa?!

Aan kula wadaago cilmibaadhis ku saabsan dadka iyo hantida xilliga hawlgabka. Cilmi-baadhistaas oo tibaaxaysa in dadka soo gaadhay da'da hawlgabku ay ku nool yihiin sidan:

56% waxa ay la nool yihiin caruurtooda ama waxa ay ku nool yihiin caymiska.

13% waa caydh iyo sabool deymeysan.

26% way dhintaan oo ma soo gaadhaan hawlgabka.

4% waxa ay iskaga nool yihiin xaalad dhaqaale oo wanaagsan.

1% waa dad hodan ah.

Haddaba, maxaad kala soo baxaysaa cilmibaadhistan. 1% waa hodan, halka 4% na ay yihiin xaalad dhaqaale oo iska wacan.

Waa maxay sababta aad u malaynaysaa? Sababta ugu horraysa, uguna mudani, waa in dadku uu sabool ka yahay maanka, gaar ahaan

fahanka dhaqan-dhaqaale ee noloshooda. Sida aan hore u soo tibaaxnay, dadka badankiisu waxba ma bartaan, ama waxa ay bartaan keliya waxbarashada aan tayada lahayn. Qaar kale oo wax bartay waxa ay dugsadaan wahsiga iyo camal-la'aanta, waana ta keentay in dadku

13% ay noqdaan caydh,56% na ay ku dul noolyihiin cid kale. Haddaba; adigu iska warran?

Sidee ayaad jeceshahay in aad noqoto mustaqbalka haddii Ilaahay SWT uu cimri ku siiyo?

Maxaad se ka baratay qisada nebi Saleebaan NKH'e iyo qudhaanjada? Maxay se naftaada ku dhalisay cilmibaadhistani oo su'aalo aad isweydiisay ah? Ma tahay qof ku cibro qaadanaya?

Labadaa kooxood se kee ayaad doonaysaa in aad ka mid noqoto?

Muhiim ma aha hadda halka aad taagan tahay, ee waxa muhiimadda ah waa halkee ayaad u socotaa?

Waxa jira maahmaah ay iska leeyihiin qabillada Qaamid [16] oo odhanaysa: "nasiib badanaa qofka u fiirsada tijaabada dadka kale oo wax kala baxaa!" Maahmaahdani farriinta ugu muhiimsan ee ay adiga kuu xanbaarsan tahay waa in noloshaadu ay noqoto mid ku- dayasho mudan oo aanay noqon mid lagu cibro qaato. Qofka leh ujeeddo ee xanbaarsan himilo, ma waayo waddo uu u maro. Xasuusnow oo maanka ku hay

xikmadda Ingriisiga ah ee tidhaahda: " A good start makes a good end - bilawga wanaagsani waxa uu sameeyaa dhammaad wanaagsan."

Marka aad doonayso in aad noqoto qof hodan ah, daruuri ma aha in aad noqoto marka aad lixdan jirsato,

[16] waa qabiilo dagta koonfurta dalka sucuudiga.

laakiin waa in aad ku tashataa in aad noqoto maalinta aad u qorshaysay in aad gaadho xorriyaddaada dhaqaale, haba noqoto tusaale ahaan marka aad jirto 45 sano'e. Xasuusnow, haddii aad doonayso in aad qaadato madaxbannaani dhaqaale, in aanay suuragal ahayn inaad isku halleyso mushaharkaaga oo keliya.

Ogsoonow in dadka maalqabeenka ah ee gaadhay xornimada dhaqaale aanu ku jirin mid malaayiin ka sameeyay mushaharka uu qaato, haddii aanu ahayn mid khiyaameeyay ammaanadii loo dhiibtay,

taasna waan kaaga tudhayaa in aad ka mid noqoto qoladaas oo aad danbiile noqoto. Deeqda Ilaahay SWT waa mid aan lahayn xuduud ay ku dhammaato, ee ma tahay adigu midka u bixinaya dedaal ee ula imanaya sabab sidii aad ugu darsan lahayd deeqda Ilaahay ee bilaa xuduudda ah?

Waxa aan doonayo in aan ku soo gaadhsiiyaa, waa in fahanka iyo dhismaha garaadkaaga dhaqan-dhaqaale uu yahay seeska ugu horeeya ee aad u dhigayso maalinta xorriyaddaada dhaqaale.

Sekada iyo Sadaqadda

Su'aal aan ku weydiiyo'e, maxay ahayd ujeeddada Ilaahay SWT uu u soo diray nebigeennii suubbanaa? ﷺkugu wareerin maayo jawaab-u-helidda weydiintan, o waxa si cad uga jawaabay rasuulka , ﷺwaxana uu yidhi: "waxa la ii soo diray si aan udhammaystiro anshaxa suubban. [17]"

Sekada iyo sadaqadda laga qaadayo dadku ma aha cashuur iyo qaan lagu cuslaynayo, waa se beeritaan bulshada la isugu beerayo dareenka naxariista, wadajirka iyo wax-isa-siinta, iyo in bulshada qaybeheeda kala duwani ay ku walaaloobaa. Ujeeddada ka danbaysa seko-bixintu waa nadiifinta nafta iyo denbi dhaafid xagga Ilaahay SWT ka ahaatay.

﴿ خُذْ مِنْ أَمْوَالِهِمْ صَدَقَةً تُطَهِّرُهُمْ وَتُزَكِّيهِم بِهَا وَصَلِّ عَلَيْهِمْ ﴾ [التَّوْبَة : ١٠٣]

Alle sarreeye waxa uu yidhi: (xoolohooda ka qaad sadago aad ku nadiifinayso oo aad ku hufayso una ducee ducadaadu waxay u tahay xasilooni).

Cibaadooyinka lagu sharciyeeyay Islaamku waxa ay nafta ku hagayaan milgaha, dhaqanka wanaagsan, iyo sarraynta inta uu ka noqonayo wanaaggu qayb ka mid ah nafteenna, sidaa ayaana ay ku dhaboobayaan caafimaadka nafta iyo jidhkuba. Ma doonaysaa in aad noqoto qof Ilaahay agtiisa ku weyn?

[17] waxa wariyay Imaamu Axmed, Musnadka (8939).

Ma doonaysaa in aad noqoto qof ay ixtiraamaan oo qaddariyaan bulshada uu la noolyahay?

Noqo mid wax bixin badan oo deeqsi ah.

Ma maqashay weli xeerka deeqsiga?

Xeerkaasi waxa uu sheegayaa: "mar kasta oo aad wax bixiso adiga oo aan ku doonayn wax-dhaafsi, waxa ay kugu soo celisaa wax-bixintaasi hanti kale oo kugu soo gasha qaab aanad garanayn."

Tusaalena waxa inoogu filan deeqsinimadii rasuulkii Ilaahay (S.C.W),

Anas Ibnu Maalik waxa uu weriyay [18], in rasuulkii Ilaahay uu u yimid nin reer-miyi ahi, ka dibna uu siiyay rasuulku ﷺ adhi badan oo laba buurood dhex jooga. Ninkii inta uu tolkii ku noqday ayuu yidhi: "tolkayow; islaama! Maxamed waxa uu bixinayaa deeqda sidii qof aan weligii baahi ka baqayn'e!"

Wax-bixintu keliya kuma gaar aha lacagta, ee waxa jira wax badan oo la bixiyo iyo siyaabo badan oo wax loo bixin karo. Waxa aad bixin kartaa cilmi, cunto, talo, iyo taakulo kaleba, dhammaantoodna waa mid adiga ay faa'iido kaaga soo laabanayso, waxyaabaha aad ka faa'iidayso wax-bixintana waxa ka mid ah:

Waxa aad ku noolaanaysaa ammaan sida Ilaahay uu ballan ku qaaday. Gacantaadu waa tan sarraynaysa. Waxa aad ka mid noqonaysaa kuwa liibaana. Waxa kuu laban-laabmaya wixii aad bixisay, denbi-dhaafna way kuu noqonaysaa. Waxa aad kaga badbaadaysaa belaayada iyo baaska oo dhan. Sadaqadda waxa lagu daweeyaa xanuunnada.

[18] waxa wariyay Imaamu Muslim (2312)

Xisaabta Hodantinimada

10% ugu yaraan u gaar yeel in aad u dhigato kayd ahaan marka aad bilaabayso tallaabadaada ugu horraysa ee aad ku dhisayso hantidaada. Socodka kunka mayl ahi waxa uu ka bilaabmaa hal tallaabo,

Ujeeddooyin kaagana waxa ka mid ah kuwa ugu mudan in aad gaadho maalintaada xornimadaada dhaqaale.

In aad ka xorowdo addoonimada mushaharku waxa ay si toos ah ugu xidhan tahay in aad wax uun dhaqaale ah heli karto haba yaraado'e.

Fursadaha lagu gaadhi karo hodantinimo maanta way ka badan yihiin waqti kasta oo hore oo tegay, casrigan aqoonta iyo teknoolajiyaddu waxa uu abuuray fursado tiro beel ah oo laga faa'iidaysan karo.

Haddii aynnu u soo noqono kaydka 10%, waxa laga yaabaa in ay kula badato, masuuliyadahaaga maaliyadeedna ay ka badan yihiin in ay wax kuu dhigmaan. Laakiin aan ku weydiiyo'e, haddii intaa kaydka ahi 10% aanay ku jirin mushaharkaaga, miyaanad noolaateen oo aanad noloshaada maarayseen?

Jawaabta iska caadiga ahi waa "haa". Sidaas oo kale; u maaree noloshaada oo kayd yeelo, ugu yaraan 10%.

Waa Maxay Xisaabta Hodantinimadu?

Xisaabta hodantinimadu waa akoon aad ka furanayso mid ka mid ah bangiyada adiga oo ugu talo galaya in ay ka dhex dhacaan keliya tallaabooyinka horusocodka ah ee gaadhitaanka hodantinimada, sida iibsiga hantida maguurtada ah iyo aasaaska mashruucyada ganacsi, maalgashiga, iwm.

Haba yaraato'e marba wax ku leexi, waxa uu iska gaadhi heer uu wax ku taro, faa'idana kuu soo saaro, si yar oo aan la dareemayn ayuu u korayaa qorshahaasi, kaas ayaana kaaga fiican mushaharka kooban ee aan wax koritaan ah lahayn.

Ku dedaal in aanad Shilin keliya ka isticmaalin xisaabtaada hodantinimada oo aad iyada kobciso oo aad ilaaliso.

Naftaadu Qayb ma ku Leedahay Dakhligaaga?

Caasha (muuminiinta hooyadood) Ilaahay ha ka raalli noqdo'e waxa laga weriyay [19], in ay maalin neef qasheen, waxna sadaqo ay ula baxeen, waxna ay la hadheen.

Markaasuu rasuulkii Ilaahay ﷺ weydiiyay: "maxaa ka hadhay?" Markaasay tidhi: "waan wada bixiyay garabkii mooyaane." Markaasuu nebigu ﷺ ku yidhi: "gebi ahaanba way hadhay garabkaa mooyaane!" Jihayntaas nebiga ﷺ ee wanaagsani waxa ay ina baraysaa in wixii la sadaqeeyo ama hadyad ahaan loo bixiyaa uu

[19] waa xadiis sugan waxa wariyay Tirmidi (2470)

yahay dhab ahaan waxa inoo soo hadhaya, waxa uu qofku la hadho ama uu sidiisa u cunaana in uu yahay inta dhammaatay.

Isla sidaas oo kale ayaa ku dhaboobaysa mushaharkaaga, waad la yaabaysaa marka lagu weydiiyo "naftaadu qayb ma ku leedahay mushaharkaaga?"

Aan ku weydiiyo mar kale'e, "maxan kuu soo hadha mushaharkaaga?" Mise dadka kale ayuun baad siisaa, naftaadana waad ka tagtaa?! Ma xasuusataa mushaharkii ugu horreeyay ee aad qaadato?

Sidee ayaad u isticmaashay?

Mushahrkaagii labaad maxaad ka yeeshay?

Kii saddexaad ama kii u danbeeyay ee aad qaadato maxaad ka yeeshay? Dadka badankooda dakhliga soo galaa waxa uu ku horreeyaa jeebabka dadka kale, markaasay wixii yaraa ee soo hadha naftooda ka siiyaan, halka in yar oo dadka ka mid ahi ay ku bilaabaan naftooda, ka dib wixii ka soo hadha, qorshohoogana ay kaga adeegtaan jeebabka dadka kale.

Adigu miyaad ka mid tahay dadka ku bixiya mushaharkooga oo dhan si ay ugu bixiyaan baashaalka nolosha iyo kala-beddelka dharka iyo cuntooyinka iwm?

Haddii aad sidaa tahay ogow, waxa aad kordhinaysaa hantida maalqabeenka, naftaadana waxa aad ku haynaysaa duruufta saboolnimada iyo cidhiidhiga dhaqaale ee aad doonayso in aad ka baxdo. Waxa aad isku qiyaasi kartaa in aad naftaada u shaqayso iyo in aad dad kale u shaqayso su'aalahan soo socda:

1.Mushaharkaagii wax ka mid ah ma sadaqaysatay?

2.Wax ka mid ah kaydsi ma ku samaysay?

3. Akoonkaaga xisaabta hodantinimada wax ma ku ridday haba yaraado'e?

4. Haddii ay jawaabtaadu tahay "haa" waxa aad u shaqaysaa naftaada, haddii ay jawaabtaadu tahay "mayana" waxa aad u shaqaysaa dadka kale. Aan kula wadaago jaantus muujinaya sida uu dib kuugu soo noqonayo waxa aad kaydsato ee aad maalgashataa adiga oo aan dhaaddanayn.

1- Kaydka (mushaharka)
2. Ku bilaw naftaada oo wax u jar
3. Ku rid akoonka hodantinimada
4. Ka shaqaysii kaydka
5. Ku iibso hanti ama maalgasho
6. Rog rog oo kobci
7. waxa uu kugu soo celinayaa dakhli bilaa dhib ah

Xisaabta Kaydsiga

Dadka badankoodu, gaar ahaan shaqaalaha noloshoodu, waxa ay ku dhammaataa kaydsi-la'aan mushahar la soo qaado, haddana la dhammeeyo. Dadkaas badankoodu haddii ay si uun shaqadaa u

joojiyaan, waxa ay u baxayaan caydh iyo saboolnimo. Uma dhexeeyo iyaga iyo caydhnimada hal tallaabo mooyaane wax kale.

Dadka kubbadda ciyaara, fanaaniinta, amaba kuwa ku hela dhaxal, waxa soo gala hanti badan, haddana muddo kooban ka dib waxa ay dib ugu laabtaan jidkii saboolnimada, sababtuna waa in ay sabool ka yihiin fahanka iyo maaraynta dhaqan dhaqaalohooga gaarka ah.

Badankoodu ma laha wax kayd ah, waxana ay ku mar-marsoodaan, "ma awoodi karo in aan wax dhigto, waayo; noloshaa cidhiidhi ah!" Waxa se ka dahsoon in kaydsigu aanu xidhiidh la lahayn badnaanta dakhliga iyo yaraantiisa.

Waxa aad arki kartaa qof ku shaqeeya $5000 oo haddana aanay waxba u dhigmayn, halka mid kale uu ku shaqeeyo $400, haddana ay wax u dhigmaan. Waxa suuragal ah in labadooduba ay ka siman yihiin duruufaha nololeed, ama kan wax dhiganayaaba uu ka nolol adag yahay kan kale. Wax-kaydsigu kuma xidhna badnaan iyo yaraan, ee waa hadba qofka iyo sida uu isu maareeyo, naftana uu go'aan ula qaato.

Kaydsigu waa sida dhaqamada kale ee wanaagsan ee kaaga bahan anshaxa iyo adkaysiga, illaa uu kuu noqonayo wax caado kuu ah. Haddaba; haddii aad doonayso in aad kobsciso oo aad kaydiso hantidaada, waa in aad isku waajibisaa wax-kaydsi. Waxa aan kula wadaagayaa shan tallaabo oo kaa caawinaya sidii aad ku gaadhi lahayd kaydsi waxku'ool ah oo guuleysta:

U kaydso hantidaada qaab nidaamsan, sida toddobaadkii ama bishii wax go'an. Adigu isku bilaw kaydka, qaabka la isugu bilaabayana waan soo

sharraxnay, waana aad u noqon kartaa. Qayb ka mid ah kaydka uqorshee noloshaada gaarka ah, sida waxyaabaha kadiska ah.

Ka feejignaw in aad wax ka soo saarto kaydkii aad dhigatay si kasta oo aad ugu baahato. Marka aad gaadho yoolkii aad la doonaysay kaydka ka dib, waxa aad mari kartaa mid ka mid ah qaababka loo maalgeliyo ee looga shaqaysiiyo hantidaada.

Si aan u muujinno muhiimadda kaydsigu uu leeyahay, aan isla eegno hal tusaale. Ka soo qaad haddii aad maalintiiba kaydsato $5 oo keliya, sannad ka dib markii ay gaadho $1,800 aad ku darto mashruuc maalgashi ama mid ka mid ah bangiyada Islaamiga ah ee sannadkii sameeya $10 faa'iido ah,

shan ama toban sano aad sidaa ku waddo, sannad walbana aad sidaas yeesho, muddo kooban gudeheed waxa aad samayn karaysaa hanti badan adiga oo aan dhibaato badan marin, waxana ay kuu noqon kartaa qorshe wanaagsan oo aad ku maarayso waxbarashada qoyska, ama maalgashi ballaadhan, amaba qorshahaaga hawlgabka iwm.

Side ayaad ugu Noolaan Kartaa 70% Dakhligaaga?

Maaraynta gole-ka-fuulka ah ee aan lahayn wax qorshe ah ayaa adkaysa in lagu noolaado dakhliga, si kasta oo uu u badan yahayba. Qorshaynta miisaaniyad kula jaanqaadi kartaana waa ta mar walba kuu suuragalinaysa in ay wax kuu soo hadhi karaan.

Adiga ka hoggaamiye ahaan, waxa kugu waajib ah in aad miisaaniyad samayso. Haa! Hoggaamiye waxa aad u tahay qoyskaaga iyo inta Ilaahay SWT uu ku baday, haddii kalena ugu yaraan naftaada ayaad hoggaamiye u tahay, mar walbana waa in aad maanka ku haysaa qaaciidada ah:

"illaa aad awood u yeelanayso maamulka iyo maaraynta inta aad hayso, ma helaysid mana maarayn kartid wax kale."

Qofka maamuli kara $100 ayuun baa maamuli kara $1000 iyo wixii ka sii badanna, qofka aan intaas maamuli karini wax ka badanna ma maamuli karo. Aniga oo qiyaasaya qaab isticmaalka dhaqaalahaaga, kana qiyaas qaadanaya dadka waqtigan nooli sida ay u badan yihiin. Aan kula wadaago jaantus muujinaya qaabka aad u isticmasho dakhligaaga.

Filashada kharashaadkaaga	**Qiimaha**
Kharashaadka naftaada	$000,00
Kharashaad kedis ah	$000,00
Waxbarshada carruurta	$150,00

Sekada	$000,00
Sadaqadda	$000,00
Kirada	$300,00
Laydhka iyo biyaha	$100,00
Teleefan iyo internet	$50,00
Deyn	$100,00
Dawo	$100,00
Biil	$500,00
Shidaal	$100,00
Madadaalo	$000,00
Total	**$1,400**

Maxaa kaaga soo baxay marka aad u fiirsatay qiyaaska isticmaalka dakhligaaga ee la mala'awaalay oo sidan noqon kara ama u dhowaan

kara. Waxaa ka soo baxay in uu khilaafsan yahay in badan oo ka mid ah talooyinkii aan soo bixinnay ee ku saabsanaa qaabka aad ku gaadhi karto xorriyaddaada maaliyadeed. Haddaba waxa kula gudboon in aad kala-hufid iyo haadin ku samayso qaab isticmaalka dakhligaaga, adiga oo maraya ama ku dhadhaweynaya, sida ku xusan jaantuskan soo socda oo u diyaarsan qaabka saxda ah ee ay tahay in aad u maarayso dakhligaaga.

Filashada Kharashka	Dakhliga aan haysano	Kharashka aan ku tala galayno	Fiiro gaar ah
Ku bilaw naftaada			
Kharashka ka diska ah			
Sako			
Sadaqo			
Kiro			
Laydh iyo biyo			
Teleefan iyo net			
Deyn			
Dawo			

Biilka			
Shidaal			
Madedaalo			
Totalka mushaharka			
Farqiga u dhexeeya dakhliga iyo kharashaadka			

Ka dib marka aynnu u fiirsanno labada jaantus ee aynnu soo marnay, waxa inooga soo baxaya in ay waxyaabo badan ku kala duwan yihiin oo midina uu habaysan yahay oo uu qorshaysan yahay, halka ka kale aanu sidaa ahayn, waana halka ay kugu hagayaan labada qorshe mustaqbalkaaga soo socda.

Marka aad bixinayso kharashaadka, iska ilaali fudaydka iyo ka-fiirsi-la'aanta, sidoo kalena in aad dareenkaaga keliya ka jawaabto oo mustaqbalkaaga aad u baabi'iso xoogaa farxad ah oo aad dareemayso marka aad xoogaaga iyo hantidaada ku ciyaarto.

Isa saar masuuliyad, diyaarna u ahaw in aad beddesho caadooyinkaagii soo-jireenka ahaa, iyo in aad si cusub wax u dhisto, natiijaduna iyada ayaa iska warrami doonta ugu danbayn.

Jidka Xorriyaddaada Dhaqaale

Maanta oo aad buuggan akhriyayso toban sano ka dib haddii Ilaahay nafta uu kuu daayo, waxa hubaal ah in aad meel uun taagnaanayso. Waa masuuliyad adiga kula taalla in aad go'aamiso halka aad taagnaanayso

iyo qaabka aad ahaanaysaa. Ilaahay SWT kuma uu qasbin ee waxa uu ku siiyay waxyaabihii kuu suuragalin lahaa in aad marto waddada aad doonto, jidka wanaagsan iyo ka xun labadaba, mid walbana natiijadiisa waad helaysaa adduunka dushiisa iyo aakhirdaba.

Si aad u jaangoyso laba dhinac ka aad noqonayso, ma waxa aad waqtigaaga ku bixinaysaa, cibaado, waxbarasho, dedaal, shaqaysi, mise waxa aad waqtigaaga ku qaadanaysaa ciyaar, hurdo, iyo baashaal?

Go'aanka adiga ayaa leh.Warka oo koobani waxa uu yahay, haddii aad u kacdo in aad uga faa'iidaysato waqtigaaga iyo xooggaaga sida ugu wanaagsan, waxa aad sidaa ku beeraysaa midhaha nolol wanaagsan oo aad u aayi doonto.

Tallaabooyinka Jidka Xorriyada Dhaqaale

Xasuustaydu waxa ay dib iigu celisay tuuladaydii Qabr ku dhawaad 50 sano ka hor. Waxa aan arkayaa oo aan xasuusanahay degaankaas oo faqrigu uu biya dhigay. Guud ahaan dadka ku noolaa xilligaasna aan ku qiyaasayo boqol iyo wax la jira. Kuma uu jirin hal qof oo lagu sheegi karo milyaneer. Iskaba dhaafe erayga milyaneer kuma aanay jirin sheekada caadiga ah ee dadka dhex marta. Degaankii sidaa ahaa maanta

dadkiisu waxa ay kor u dhaafayaan kun qof. Sidoo kale; waxa degaanka jooga qiyaastii soddomeeyo qof oo ku biiray liiska milyaneerrada caalamka.

Waxa aad isweydiin kartaa, waa maxay xidhiidhka ka dhexeeya qisadan iyo ciwaankeedu?


Waxa aan uga dan leeyahay ee aan doonayo in aan isugu kaa xidhaa,

waa in hodantinimada iyo milyaneernimadu ay tahay wax la gaadhi karo oo dadkaasiba ay gaadheen, ka dib markii ay ahaayeen dad ka gaadhay saboolnimo halka ugu hoosaysa, ogowna deeqda Rabigaa cid gaar ah uma xidhna.

Cilmi-baadhisyada dalka Maraykanku waxa ay sheegaysaa in: Tirada milyaneerradu ay ahayd sannadkii 1900 ku dhowaad 100,000 oo qof. Sannadkii 1950kii ay gaadheen 200,000 oo qof. Sannadkii 1960kii ay gaadheen 300,000 oo qof. Sannadkii 1980 kiina tiradu u booday illaa hal milyan oo qof. Tiradu way ka badatay illaa ay tirada milyaneerrada caalamku hadda daqiiqaddii kastaba soo baxaan. Haddiiba ay dadka kale suuragal u tahay, maxaa kuu diiday adiguna in aad ka mid noqotid oo aad ku hamidid. Iska jir in aad nafta marmarsiiyo ka dhegaysatid iyo cudurdaarro aan sal lahayn.

Milyaneerradu meel kasta caalamka way ku nool yihiin, waddanka aad ku nooshahayna way ku nool yihiin. Waddan waliba waxa uu leeyahay duruuftiisa iyo fursadihiisa. Dhammaan dadka milyaneerrada ahina, waxa ay ka siman yihiin in dedaal ay bixiyeen ay kaga soo gudbeen caqabadaha hor taagnaa.

Kalsoonida aad ku qabto naftaadu waa shidaalka ugu muhiimsan ee ku gaadhsiinaya jihooyinka hamigaaga dheer ee aad hiigsanayso. Naftaada u sheeg mar walba, addoon u noqon mayo mushahar keliya.Waddada aad u marayso himiladaadaas waxa kuu Soo koobay Mr Jim Rohn, waxana uu yidhi: "si aad u gaadho xornimo dhaqaale, waa in aad u rogtaa qayb ka mid ah Xooggaaga raasamaal aad ku shaqaysato, ka dibna raasamaalkaas u rog mashruuc, mashruucaasna ka shaqaysii, macaashkaasna u beddel maalgashi, maalgashigaasna u rog madaxbannaani dhaqaale.



Giraanta Madax-bannaanida Dhaqaale

Sida aad arki karto, tallaabadaada ugu horraysaa waa in aad haysato wax aad wax ku bilaabi karto. Shardi ma aha in aad haysato meelo badan oo ay wax kaa soo galaan. Sidoo kale; waxa kugu filan hal meel oo ay wax kaa soo galaan marka hore.

Tusaale ahaan; aan nidhaahnaba waa shaqadaada, haddii aanad shaqaynna waxa aynnu u beddeli karnaa lacag hantidaada rasmiga ah ee Ilaahay SWT ku siiyay, sida xoogga, caqliga iyo waqtiga.

Ogow; cid kasta oo kaaga horraysay waddada ay u martay xorriyaddeeda dhaqaale. Waxa ay ka soo bilaabeen meelo hoose. Ha u hoggaansamin duruufta kugu xeeran ee kala hortag halgan iyo dedaal, adiga oo qaadanaya sababta waxa aad ka gaadhaysaa natiijo aad u aydo iyo in aad ku noolaato nolosha aad rabto, ma aha tan waaqicaagu uu kugu xukumay, deeq-bixiyuhuna waa Ilaahay SWT.

Gebagebo

Si aad u gaadho maalintaada xorriyadda dhaqaale, waxa jira tallaabooyin aanu muran ka taagnayn in ay ku gaadhsiinayaan maalintaada xorriyadda dhaqaale, oo marka aad ogaato, kuna dhaqanto kugu hoggaaminaya himiladii aad xanbaarsanayd, ee ahayd in aad maalin uun gaadhid xorriyaddaada Ilaahay uu kuu abuuray in aad ku noolaato dhinac walba, xorriyad cilmi, caafimaad, dhaqaale, iwm, xayndaabka keliya ee ku joojinayaana uu yahay xayndaabka uu Ilaahay kuu dhigay uun. Aan kula wadaago tallaabooyinka soo socda:

Xeerka Dahabiga ah:

Waxa uu leeyahay xeerkan dahabiga ah ee fududi, si aad u gaadho hodantinimada, bixi wax ka yar waxa ku soo gala, baaqigana ka shaqaysii oo maalgelin ku samee. Muxuu ka dhigan yahay xeerkani?Xeerkani waxa uu kuu tilmaamayaa in aad kaydiso ugu yaraan 10% waxa ku soo gala si aad uga shaqaysiiso. Haddii aad leedahay intaasi way igu badan tahay oo ma awoodo, ha werwerin, muhiimaddu waa in aad barato dhaqanka wax-hanbaynta iyo kaydsiga. Sidaa darteed; waxa aad ku bilaabi kartaa 1%, ka dibna 2%, ilaa aad wax isu geyso.

Haddii aad kaydsato $30 bishii oo aad maalgashi ku samayso marka da'daadu ay tahay 20 jir, waxa aad noqonaysaa milyaneer marka da'daadu ay tahay 65 jir.

Miyaanay taasi kuugu filnayn in aad wax yarna ha noqoto'e wax iska jarto. Sheekada ugu muhiimsan ee aad naftaada kula sheekaysan kartaa, waa in aad go'aan ku gaadho in aad ka baxdo addoonimada mushaharka

oo aad naftaada kula sheekaysato "maalin uun ayaad xoroobi" waana aynnu garan karnaa saamaynta weyn ee ay nafta ku leedahay waxa lagula sheekaystaa. Ma gaadhi kartid xornimo dhaqaale, mana samayn kartid inta ay kula fududdahay in aad dib u isticmaasho wixii aad kaydinaysay. Inta aad meel ka gaadhayso hantidaada dhis oo dib ha u isticmaalin.

Garo Qiimaha Hantida iyo Lacagta

Weligaa ma gaadhaysid madax-bannaani dhaqaale ilaa uu Shilinku kula yeesho qiimo oo aad u fiirsato halka uu kaa soo gelayo Shilin waliba iyo halka uu ku baxayo. Haddii aad u fiirsato dadka maalqabeenka ah $1 agtooda qiimo ayuu ku fadhiyaa, halka dadka saboolka ah $100 wax qiimo ah aanu ugu fadhiyin. Xasuusnow in aanay nafna Ilaahay hortii ka dhaqaaqayn illaa la weydiiyo Shilin walba iyo halka ay ka keentay iyo halka ay ku bixisayba.

Si aad u garato qiimaha lacagta, wa in aad u eegtaa lacagtu in ay tahay sidii wax shakhsiyad leh, tilmaamo u gaar ahna wadata, meelaha qaarna ay isdiidaan, meelaha qaarna ay is oggol yihiin. Tusaale ahaan; lacagtu waxa ay tagtaa meesha ay ka helayso qadderinta iyo ilaalinta, waxana ay ka firdhataa meesha lagu dayacayo ee buuqa ah.

Bal u fiirso haddii aad u qaybiso dadka toban milyan, maalmo kooban gudohood lacagtu waxa ay u tegaysaa dadka qiimeheeda garanaya, waxana ay ka cararaysaa dadka saboolka ah oo ay dib ugu noqonaysaa jeebka dadka wax haysta, sababtuna waa fahanka mid waliba uu ka haysto sida loola dhaqmo lacagta.

Waxa laga garan karaa halka aad ka taagan tahay lacagta, aragtideeda, iyo sida aad u aragtaba, marka la eego qaabka aad u maaraynayso arrimahaaga dhaqaale. Tusaale ahaan; Ma kuu kala habaysan yihiin biilasha laydhka, biyaha, deymaha, i.w.m, mise waa is dhexyaac wax waliba?!

Maalgashi

Aan ku weydiiyo su'aalo dhawr ah:

Ereyga "Maalgashi" ma ka mid yahay erayada qaamuuska noloshaada?

Ma ka fekertay weli?

Weli wax ma ka baratay maalgashiga?

Jawaabaha aad bixinaysaa sida ay ahaadaanba fursaddu Xog intee le'eg ayaad ka haysaa maalgashiga?

weli waa hortaada in aad barato fahanto oo aad samayso maalgashi.Maalgashigu waa: in aad lacag geliso hanti adiga oo filanaya in waqti ka dib ay kugu soo celiso faa'iido intii ka badan.

Waxa ugu muhiimsan ee ugu horreeya maalgashiguna waa naftaada. $100 oo aad gashato naftaada, kuna barato xirfad kaa maqan, ama aad ku iibsato buug kaa caawiya fahanka arrin gaar ahi, waxa uu kugu soo celinayaa labanlaabyo wixii aad bixisay adiga oo aan aad u dhaadayn. Sidoo kale; waxa aad maalgashan kartaa meelo ay wax kaaga soo noqdaan.

Aan kugu baraarujiyo laba qodob oo muhiim u ah fahanka aad ka haysato maalgashiga. Maalgashigu kuma xidhna oo keliya in la maalgashado hanti badan, ee waxa aad maalgashan kartaa $100 iyo wax ka yar.

Maalgashiga khasab ma aha in aad cid kale la wadaagto lacagtaada. Waxa aad samayn kartaa mashruuc yar oo aad adigu iskaa u maalgashatay haba yaraado'e.

Waxa jira tallaabooyin barbilaw wanaagsan u ah maalgashiga, hadii aad martana aad ku gaadhi karto maalgashi guuleysta, waxana ka mid ah tallaabooyinkaa:

- Furo akoon aad ugu talo gashay maalgashiga adiga oo shubaya wixii aad iskaga jartay kayd ahaan, una adeegsanaya hadba maalgashiga iyo kobcinta hantidaada.
- Bilaw mashruuc kooban oo aad keligaa samaysnayso, ama cid aad la wadaagayso adiga oo aan shaqadaadii rasmiga ahaydna dayicin.
- Haddii uu guuleysto mashruucaa aad aasaastay waxa aad ku dedaalaysaa oo aan marnaba maskaxdaada ka maqnaanayn in aad u soo gacan baxdo mashruucaaga gaarka ah.

Siraha ugu muhiimsan ee ay ku dhaqmaan maalqabeenku waxa ka mid ah, in aad ku fekerto sidii aad u wadan lahayd shaqadaada gaarka kuu ah.

Gunaanad

Talooyinkanka maaliyadeed waxa ay kaa caawiyaan in aad si fiican u maamusho lacagtaada oo aad gaadho yoolalkaaga maaliyadeed. Taladani waxa ay ku salaysan tahay mabda'yada qorshaynta maaliyadeed ee wanaagsan, waxana ka mid ah:

waddooyinka loo maro dakhli-abuurka, xeeladaha badbaadinta iyo yaraynta khasaaraha, maalgashiga, maaraynta deynta, iyo ilaalinta hantida maaliyadeed guud ahaan.

Adeegsiga talooyinkan waxa aad ku gaadhi kartaa xasillooni maaliyadeed oo mustaqbalka fog ah, iyo kobac dhaqaale oo isa soo tara maalinba maalinta ka danbaysa, haddii aad ku dhaqanto oo aad joogtayso ku-dhaqankooda.

Waa in aad u diyaargarawdaa in aad samayso go'aamo maaliyadeed oo adag, masuuliyad leh, oo aad u qaadato hab xikmad leh oo aad ku maarayso lacagtaada. Waa in aad sidoo kale u diyaar garawdaa in aad ka faa'iidaysato fursadaha maalgashi ee soo bixi kara iyo in aad isku dheellitirto isticmaalka iyo kaydinta.

Xeerka ugu muhiimsan ee seeska u ah talooyinkan koobkooban ee aan kula wadaagi doonaa waa xeerka odhanaya, qaado masuuliyadda naftaada 100%". Ha sugin dawlad, saaxiib iyo xataa ehelkaaga, waayo; dhammaantood adiga ayay kuu baahan yihiin, adiga ayaana wax taraya haddii aad masuuliyaddaada si wacan u garato, ugana soo baxdo. Aragtidayda dhibaatooyinka u badan ee ay la daalaadhacayaan

dhallinyaradeennu waa in ay masuuliyaddooda cid kale dusha uga tuuraan oo ay xarfaan ku noqdeen sida la isaga fadhiisto, ka dibna loo allifo marmarsiiyo masuuliyaddana dusha looga tuuro meel aanay waxba qaab daran,kuugu hagaagayn xataa haddiiba aad eedayso sida:

1. Dalka iyo dawlada.

2. Qoyskaaga iyo qaraabadaada.

3. Waxbarashada dalkaaga.

4. Asxaabta kugu xeeran, iwm.

Isla kuwaa aad eedaynayso ee aad ka dhiganayso marmarsiiyo aad ugu qiil samayso wahsigaaga ayay rag kula mid ahi ka xaqiijinayaan guulo la taaban karo, weliba adiga oo arkaya. Ma aha in ay kaa awood badan yihiin, ama ay riixayso awood kaa dahsooni, waa se in ay isku tashadeen, waxa ay haysteenna ay hagaajisteen, Ilaahayna ay talo saarteen.

Xaqiiqada qadhaadh, haddana macaan ee ay tahay in aanay maankaaga marnaba ka bixin ayaa ah, naftaada cidi kaagama horrayso, cidina kaagama dhowa, cidina kuuma maqna, ceelna kuuma qodna!

Xagga Ilaahay u kac, noloshaadana maalinba tallaabo hagaaji, si aad muddo ka dib ugu aydo dedaalkii aad soo samaysay.

Xasuusnow in aadan maanta bilaabin wixii kuu dan ahi waa wax aad jeclaysan doonto oo aad qoomamayn doonto muddo ka dib. Talooyinkani waa afartan talo oo aan ugu talo galay in aanay maankaaga marnaba ka maqnaan. Taasi waxa ay keenaysaa in ay

tallaabooyin kaaga yaryar toosiyaan oo ay kugu ridaan waddo yar oo toosan, waddada yarina waxa ay kugu riddaa waddada weyn.

Talooyinkaasi waxa weeye:

1. Qaado Masuuliyadaada Dhaqaale.

Cidna waxba ha ka sugin! Sida aad naftaada masuul uga tahay caafmaadkeeda iyo aqoonteeda si la mid ah ayaad masuul uga tahay dhaqaalaha naftaada, ee ha sugin dawlad, qaraabo, saaxiibo, iwm.

Dhammaan dadka kugu xeerani waa caawiyayaal oo waxa ay kugu caawinayaan sidii aad u gaadhi lahayd yoolkaaga, laakiin iyagu kuma gaadhsiin karaan yoolkaaga haddii aanad adigu u socon horumar dhaqaale.

2. Jooji Ka-Fikirka iyo Sugitaanka Fursadaha.

Noloshaada ka saar waxa la yidhaahdo cudurdaarka iyo marmarsiinyaha noocnooca ah ee dib-u-sii-dhac iyo habsan mooyaane aan kuu horseedayn horusocod.

3. Laba Daran Mid Dooro.

Horumarku waa culays, waxana uu leeyahay damaq iyo xanuun. Sidoo kale; wahsiga iyo baashaalkuna waxa ay wataan xanuun iyo damqasho badan oo kaa daba iman doona, laakiin maanta aanad dhaadayn. Haddaba waxa kula gudboon in aad labada xanuun mid uun doorato.

Taa beddelkeeda adigu samee fursadaha.

4. Xog Fiican ka Baro Hantida iyo Sida ay u Shaqeyso

Wax aanad aqoon u lahayn meel ka gaadhi maysid. Sidaa darteed; waxa lagama-maarmaan kuu ah si aad u hesho madax-bannaani dhaqaale, in aad barato lacagta iyo sida ay u shaqayso, ganacsiga, maamulka, iwm, oo aad siyaabo badan oo kala duwan noloshaada ugu baahan tahay.

Mansab ma aha mid walba in aad uga baxdo jaamacad oo aad takhasus u gaar ah barato, waxa se kugu filan in aad ka qaadato koorasyo iyo casharro koobkooban, sidoo kalena aad ka akhrido buugaagta u gaarka ah. Marka aad xog fiican ka hesho wixii kaa dhimanna waxa aad u kaashan kartaa dadka sida gaarka ah u bartay.

5. Maalgasho Naftaada ka Badan Inta aad Maalgalinayso Ganacsigaaga.

Waxa aad ku dul sugnaanayso shakhsi ahaantaada mustaqbalka soo socda ayaa ka muhiimsan hantida lafteeda. Sidaa darteed; dhis naftaada oo maalgalin ku samee aqoontaada, caafimaadka, iyo houmarkaaga guud ahaan.

6. Samee Dakhli oo Wax uun Bilaw Haba Yaraado'e.

Daadku waxa uu ka bilaabmaa dhibic biyo ah, buuruhuna waa quruurux isu tegay haddii aanad waxsoosaar lahayn. Hawsha ugu muhiimsan ee kuu taallaa waa in aad shaqo tagto, wax-soosaarna aad samayso.

Haddii aad bilaa shaqo tahay shaqo-raadintu shaqo ha kuu ahaato.

7. Ha ka Baqanin Fashilka Kugu Iman Kara.

Dad badani waxa ay wax u bilaabi la'yihiin waa cabsi ay ka qabaan fashilka ku iman kara! Xaqiiqada jirtaa se waxa ay tahay waxa laga baqayaa waa ismoodsiis qofka maskaxdiisa keliya ku jira ee aan xaqiiqo

jirta ahayn. Ha baqin, waayo; weligii go'aanku khasaare ma keeno, ee ama waad guuleysan ama khibrad iyo waaya'aragnimo ayuun baad ka baran. Fashilka ugu weyni waxa uu ka yimaaddaa laba-lugoodinta iyo dhaqaaq-joogsiga aad laba-labayso.

8. U Badheedh Khasaaraha Xisaabsan

Maalqabeenku wuu qaataa khasaaraha, wuuna u badheedhaa, laakiin waxa uu qaataa khasaare xisaabsan oo haddiiba uu ku khasaaro uu garan karo waxa uu kuwaayayo.

9. Samee Miisaaniyad Bille ah iyo Mid Sannadle ah oo aad ku Maarayso Dakhligaaga iyo Kharashaadkaaga

Faahin-faahin dheeri ah waxa aynnu ku soo marnay buuggan dhexdiisa, dibna waad ugu laaban kartaa.

10. La Tasho Khabiir Maaliyadeed

Haddii aanad lahayn khibrad maaliyadeed ama aad u baahato takhasus gaar ah oo inta aad taqaanno ka badan, la tasho qof kaa aqoon badan si aad u hesho caawimo waxku'ool ah.

11. Iska Ilaali Deymaha (Taban).

Haddii aad deyn u qaadanayso si aad ugu isticmaasho danahaaga gaarka ah, waa deyn taban oo aan wanaagsanayn, haddii se aad u qaadanayso ka-shaqaysiinteeda oo aad gelinayso mashruuc shaqaynaya, wax laga faa'iideysan karo.

Sidaa darteed; ka digtoonow deynta ku dhisan isticmaalka kuu gaarka ah.

12. Hadii Lagugu Leeyahay Deyn Sida ugu Dhakhsaha Badan Isaga Bixi, Hana Galin Deymo Kale.

Tallaabooyinka fashilka iyo is-dhexyaaca dhaqaale keena waxa ka mid ah deyn-deyn-ku-bixida! Iska jir! Haddii ay jirtay deyn hore lagugu lahaa waxa aad qorshaysaa sidii aad u bixin lahayd, tu kalena ha u dhowaan!

13. Ka Fogow Kharashaadka aan loo Baahnayn ama Laga Maarmi Karo

Cumar Ibnu Khaddaab Ilaahay ha ka raalli noqdo'e ayaa laga weriyaa weedh dhaxalgal ah oo odhanaysa: "wax kasta oo aad jeclaataan miyaad iska soo iibsataan?!"

Isaga oo tilmaamaya in aanay sax ahayn in qofka jeebkiisa iyo xiisihiisu ay wada socdaan, wixii aanay baahiyi kuu geynin ee iska xiise uun ah ha ku baabi'in hantidaada.

14. Dib-u-eegis ku Samee Kharashaadka Joogtada ah ee aad Bixiso

Kharashaadka laydhka, internetka, iyo naadiyada aad ka midka tahay, dhammaan dib-u-eegis ku samee, oo wixii aad ka maarmi karto jooji,

wixii aanad ka maarmi karinna isku day in aad yarayso ama siyaabo kharash kooban ah aad u maarayn karto.

15. Waxa Aanad ka Maarmi Karin Isku Day in aad u Hesho Sida ugu Habboon Kharash Ahaan.

Qiime dhimista, waxyaabaha fursadda ah, waxyaabaha jumlad ahaan kaaga jaban tafaariiqda, iyo waxyaabaha aad siyaabo kala duwan u maarayn karto, u maaree intaaad u maarayn karto.

16. Raadi Fursado Kale oo aad ku Abuuri Karto Dakhli Kale oo Dheeri ah

Ha ku ekaanin meesha keliya ee ay wax kaa soo galaan hadda. Waqtigu waa lacag. Sidaa darteed; isku day waqtiga aad jaanis haysato in aad soo kordhiso dakhli dheeri ah. Shaqo kale gal. Mashruuc yar samee.

17. Kala Garo Mudnaanta Halka aad ku Bixinayso hantidaada.

Laab-la-kaca iyo bixinta kharashaadka oo aan loo meeldayin sida ay u kala mudan yihiin, waa waxyaabaha dhiigbaxa ku ah dakhliga ku soo gala, dad badanina ay la dhibban yihiin. Sidaa darteed; dib u habee qaab-bixintaada, una kala horraysii sida ay u kala mudan yihiin.

18. Si Si Tartiib Tartib Ah Wax u Bilaw.

Si kasta oo aad awood u leedahay ha u bilaabin si weyn, ee waxa aad wax u bilawdaa sida ugu yar, ugu kooban, ee ay wax kuugu suuragali karaan.

19. Samee Yool iyo Qorshe ku Haboon ah Duruufta kuu Gaarka ah

Qor oo habee dakhligaaga iyo kharashaadkaaga, oo isugu miisaan sidii aan hore ugu soo aragnay buuggan dhexdiisa.

20. Ha iibsan Wax Qiima-dhac uu ku Imanayo.

Maalmaha soo socdaa waxa ay qiimo-ridayaan ha galinin lacag, lidkeedana waxa aad maalgashataa waxyaabaha haba iska koob-naadaane maalmaha soo socda ay wax ku kordhayaan, sida dhulka, dahabka,i.w.m.

21. Samee Dhigaal 10% ugu Yaraan ah.

Qof walba waa uu muhiim in uu barto dhigaalka oo uu yeesho dhigaal ugu yaraan 10% ah. Haddii ay kuu suuragali weydo 1%, ka bilaw inta aad baranayso caadada wax-kaydsiga illaa aad wax kaydsiga barato, naftaadana aad ku qasabto. suuragal kuuma aha in aad qaaddo tallaabo horusocod dhaqaale ahi haddii kale.

22. Raac Tabaha iyo Xeeladaha Kala Duwan ee kaa Caawin Kara

Wax-kaydsiga.

Siyaabo badan oo kala duwan ayaad wax u kaydsan kartaa, sida bangiyada, hagbadaha (ayuutada), iwm.

23. Lacagta aad Dhigayso Dib ha u Isticmaalin.

Samee qorshe aad kaga shaqaysiinayso inta aanad dhigaalka bilaabin ka hor, waa in uu kuu cad yahay mashruuca ama qorshaha aad kaga midho dhallinayso lacagtan aad hadda uruurinaysaa.

Lacagta aad uruuriso dib ha ugu isticmaalin xarrago iyo xiiseraac.

24. Fahan Mudnaanta Maalgashiga.

Qofku keligii wax badan ma samayn karo. Mar walba oo aad doonayso in aad samayso wax weyn waxa uu doonaba ha ahaado'e waxa aad u baahan tahay caqliga dadka kale, cilmigooda, iyo hantidoodaba. Sidaa darteed; waxa kuu muhim ah in aad ogaato muhiimadda ay leedahay maalgashiga aad meel kale maalgashanayso, ama adiguba aad ku shaqaynayso dadka kale hantidooda. [20]

25. Maalgashi ku Samee Lacagta aad Uruurisay.

Lacagta kuu uruurtay dib ha u isticmaalin ee isku day in aad ka shaqaysiiso. Waxa aad samaysan kartaa mashruuc yar oo kuu gaar ah, dakhlina ku soo geliya haba yaraado'e.

Sidoo kale; waxa aad samayn kartaa in aad cid kale la wadaagto, maalgashina uu ku samaysmo mashruuc kale.

26. Noocyada aad Wax u Maalgashan Karto Raadi.

Haddii aanad adigu awoodi Karin in aad samayso mashruuc gaar ah, raadi wax aad maalgashato adiga oo u dhaadhacaya suuqyada, dadkana waraysanaya.

Meelaha aad ka raadin karto fursado ganacsi waxa ka mid ah:

[20] Ta ugu muhiimsan ee bulshada Soomaaliduna badanaa ay seegto ayaa ah, in waxa lagu shuraakoobayaa sharci ahaan iyo xisaab ahaanba u caddaado. Turjumaha

hantida maguurtada ah, raashinka iyo cunada, tamarta noocyadeeda kala duwan, dalxiiska, caafimaadka, wershadaha, iyo teknoolajiyadda.

27. Maalgasho Wax aad Fahmi Karto.

Aasaasiyaadka maalgashiga waxa ka mid ah, in aanad maalgashan wax aanad fahmi karin qaabka uu u shaqeeyo iyo sida looga faa'iidayo. Garashadu ama waa in aad adigu si toos ah u garanayso ama aad u wakiilan karto cid kaaga shaqaysa.

28. Ha u soo Qaadan Deyn si aad u Samayso Maalgashi Cusub.

Maalgashi cusub oo aan hore u shaqaynayni waxa uu leeyahay halistiisa, waxana ka iman kara khasaare. Si aanu kuugu iman khalkhal dhaqaale talo ahaan, waxa lagu bixiyaa in aanad deyn u soo qaadan si aad u furto mashruuc cusub. Deynta waad u soo qaadan kartaa mashruuc hore kuugu shaqaynayay, ama wax aad hubto faa'iidada uu soo celinayo oo aan adiga culays kugu keenayn.

29. Beedkaaga ha ku Wada ridin Selled Qudha.

Waa xikmad caan ah in kasta oo dhinacyo kala duwan loo tiiriyo, oo tilmaamaysa waxa aad haysato meel keliya ha ku wada shubin ee qayb-qaybi maalgashiga, si aad u badbaadin karto qaybo ka mid ah lacagtaada haddiiba khasaare uu ku yimaaddo qaybaha kale.

30. Baahi Maalgashiga oo Badi.

Marka uu guuleysto mid ama laba mashruc oo aad maalgelisay, halkaa ha ku deyn maalgashiga ee kobci oo abuur ilo kale oo dhaqaale, taasina waxa ay ku imanaysaa in aad baahiso oo aad noocyo ka dhigto fursadahaaga maalgashi.

31. Ilaali Shilin Kasta oo ku soo Gala.

Haddii aad ka khajisho ama aad ka xarragooto in aad xisaabiso Shilin kasta oo kaa baxaya, waxa diinteenna suubbani ay inoo sheegtay in aanad Ilaahay hortiisa ka dhaqaaqayn maalinta xisaabta aakhiro illaa lagu weydiiyo Shilin kasta halka aad ka keentay iyo halka aad ku bixisay labadaba, waana su'aasha keliya ee laba dhinac wax lagaa weydiin doono. Haddaba imika sii ogow jawaabtaada aakhiro Ilaahay hortii!

32. Xero ama Xeer

Qofka muuminka ah laba jeer god lagama wada qaniino, sida xadiis nabigeennu uu inoogu sheegay. Marar badan ayay dhacdaa in qofka ay wax kaga lumaan dhayalsi iyo fudaydsi. Taas waxa ka sii daran, in ay lexejecladu kala disho dadkii qaraabada iyo saaxiibbadaba ahaa.

Si aanay taasi u dhicin, dhibaatooyinka soo noqnoqda ee noocan ahna looga gaabsado, waxa muhiim ah xoolahaagu in ay xeradaada ha kuugu jiraan, haddii ay baxayaanna waa in ay xeer kubaxaan.

33. Xogtaada Maaliyadeed ha Bixin.

Siraha gaarka ah ee aan dadka lala wadaagin waxa ka mid ah xogtaada maaliyadeed sida, akoonnadaada, saamigaaga, iyo lambarradaada sirta ah, ciddii gaarka ah ee aad ugala maarmi weydo maahane, baahinta la baahiyo xogaha noocan ah waxa ka dhashay dhibaatooyin badan oo ay

ka mid yihiin xatooyo, xaasidnimo, damac, i.w.m. Sidaa darteed ayuu nebigu inoogu sheegay in aynnu hawleheenna inoo gaarka ah si hoose u wadanno.

34. Ka-faa'iidayso Fursadaha Caymiska

Waxyaabaha lagu yaareeyo khatarta iyo arrimaha kediska ah ee kusoo-booddada ah waxa ka mid ah, fursadaha caymiska. Haddaba ka faa'iidayso fursadaha caymiska adiga oo kala xulanaya shirkadaha hadba meesha aad joogto.

35. Ku Xidhnow Bangiyada.

Ka samayso akoonno oo dhex mari lacagahaaga. Sidoo kale; lacagta aad bixinayso isku day in aad ku bixiso akoon. Taasi waxa ay leedahay faa'iidooyin badan oo dhaqaale oo ay ka mid tahay in aad tixraac u heli karto wax kasta oo kaa lumi lahaa.

Sidoo kale; waxa ay abuuri kartaa kalsooni ay kugula dhaqmaan dhinacyada kale ee ay wax idin dhex marayaan.

36. Xooji Xidhiidhka aad la Leedahay Dadka Hantida leh.

Samee xidhiidho wanaagsan oo aad la samaynayso

dadka hantida leh, adiga oo aan damcayn hantidooda,

laakiin waxa aad ula xidhiidhaysaa ay tahay in aad marwalba ka heli karto fursado kuu fududeeyo yoolka aad leedahay.

Waxyaabaha la kala faa'iidaana lacag keliya ma aha, sida loo sameeyo xidhiidhada ee loo dhex galo bulshaduna waxa ay leedahay koorasyo iyo buugaag u gaar ah ee kaasho.

37. Ka Fogow Damaca Deg-deg ku taajirka.

Dad badani waxa ay aad u suuqgeeyaan fikradaha degdeg-ku-taajirka, taas oo marka waaqica dhabta ah la isla yimaaddo aanay waxba ka jirin, si dhif iyo marla'arag ahna wax waliba way u dhici karaan, laakiin xeerarka nolosha ee aan garanaynaa waxa ay inoo sheegayaan in wax waliba uu koritaan sameeyo, waqtigiisana uu u baahan yahay. Koritaankaga dhaqaale waqtigiisa sii oo iska illaw degdeg-ku-taajirka.

38. Cid Kale Naftaada ha Barbar Dhigin.

Isbar-bardhiggu waa mid ka mid ah dhibaatooyinka ugu waaweyn ee dadka ka hor'istaaga himiladooda. Marka ay arkaan dad aad u horumaray ayay barbar dhigaan xaaladda ay hadda ku sugan yihiin, taas oo dhaxalsiisa caloolyow iyo niyadjab. Sida saxda ahina waa in aad noloshaada ka saartaa isbarbardhigga. Qof waliba maalin ayuu bilaw ahaa sidaada oo kale, maalin keliyana Rooma laguma dhisin, ee qorshahaaga ku soco, ka dadka kalena iska laab.

39. Mar Walba Filo Wax Lama-filaan ah.

Adduunyadu way kedis badan tahay, gaar ahaan marka la joogo caalamka shaqada iyo ganacsiga. Sidaa darteed;

haddii ay kugu dhacaan wax aanad filanayni, haddaba ku sii darso qorshaha in aad nafsi ahaan iyo aqoon ahaanba diyaar u ahaan karto kedisyada nolosha, sideedabana waxa la yidhaahdaa: "wax kasta oo aan nafta kaa jarini way ku sii xoojiyaan uun!"

40. Bakhaylnimada ka Ducayso.

Badanaa dadka way ku adag tahay in ay ilaaliyaan dhex-dhexaadnimada iyo isu-dheellitirnaanta. Marka uu u dhaqaaqo qofku shaqo iyo hanti samaynteed, waxa markiiba uu u tallaabaa dhinaca kale oo uu noqdaa qof gacan adag oo aan waxba laga helin, taasina waa khasaare weyn.

Waxa uu Ilaahay SWT inoo sheegay, in qofka laga badbaadiyay dhabcaalnimada naftiisu uu yahay qof liibaanay. Dariiqa Quraanka la inoogu jeexay waa in aanad xoolahaga daadaadin, isla markaana aanad ku bakhaylin, labadaa dhexdoodana aad ku dhaqanto.

Dardaaran

Waxa aan ku soo afmeeraynaa qoraalkeennan soo taxnaa tan iyo bilawga buuggan, in aynnu is xasuusino: waa maxay hantida dhabta ahi?

Dad badan waxaa ka dhaadhacday, qofku haddii uu lacag helo in wax kasta oo kale ay hagaagayaan.

Laakiin arrintu sidaa way ka fog tahay. Dad badan ayaa lacag haysta, laakiin caafimmaad la', ama aan buug akhriyi karin, amaba dadka iyo qoysku ay ka xumaadeen, ama aan ubad iyo carruur lahayn.

Maxay qiimo leedahay lacagta adduunka oo dhan taallaa haddii caafimaad ahaan lagaaga joojiyo cuntooyinka aad dhadhankooda ku raaxaysato, ama hurdoba aad ledi weydo?

Sidaa darteed; hantida dhabta ahi waa nicmo kasta oo Ilaahay uu ku siiyay, ay tahayna in aad ilaaliso, kobciso, kuna fara'adaygto. Waxa ka horreeya hantida lacagta ah hantiyo kale oo dhawr ah, sida: diinta, caafimaadka, qoyska, sharafta, iyo nabadgelyada.

Markaa ka dib ayaa loo imanayaa dhaqasho iyo xoolo. Adduunyada gabigeeduba Ilaahay agtiisa waxba kama aha, murtida buugganina waxa ay ku dhan tahay hadalkii imaamkii Xasan Albasri ee ahaa: "u shaqayso sidii qof weligii noolaanaya, qalbigaagana uga saar adduunyada sidii qof berri ka dhimanaya!"

Dhammaad